



CILMIGA BULSHADA

BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 7^{aad}

ISBN 978-99944-2-118-3

CILMIGA BULSHADA BUUGGA ARDAYGA Fasalka 7^{aad}

CILMIGA BULSHADA

BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 7^{aad}



JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

MOE



JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA


Birr 68.00



CILMIGA BULSHADA


BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 7^{aad}



JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOOBiya
WASAARADDA WAXBARASHADA

Buugan Ilaali oo daryeel.



Buuggani waa hantida Dugsigina

Daryeel si aynan waxyeelo u gaadhin. Hoos waxa kuxusan 10 fikratood oo ah talooyin kaa caawinaysa sida ad buuga u ilaa linaysid una daryeelaysid.

1. Buugga ku jaldiye jaldi ku haboon dhawrista sida Bilaastiga waraaqad adag sida Jaraaiidka la akhristay.
2. Markasta meesha ad buugga dhigaysaa waa in ay ahaataa meel nadiif ah oo engagan.
3. Buugga marka aad isticmaalaysid waa in ay gacmahaagu nadiif ahaadaan.
4. Waxna ha ku qorin buuga jalddi giisa ama boggaga dhaxdiisa.
5. Iisticmaal waraaqad yar ama kaardi yar markaad bog calaamadaysanaysid.
6. Fadlan ha ka jeexin ama haka jarin sawir ama bog.
7. Boggaga jeexma ku kab, Xamag ama bilaastar.
8. Buugga markaad dugsiga uqaadanaysid boorsada ama shayga aad ku qaadanaaysid qumaati u dhaxdhig si uunan u jacdadin ama u jajabin.
9. Buugga marka aad qofkale u dhibaysid si taxadar ah ugu dhiib.
10. Buugga cusub marka ugu horaysa ee aad isticmaalkiisa bilaabaysid dhinicisa ay boggagiisa u dan beeya ay ku yaaliin u jiifi kadibna markiiba dhawr bogg fur ama banne. Marka aad bogg rogaysid, Cidhifka uu ka taxan yahay gacanta kale ku yar xaji. sidaasina daryeelka jaldiga buuga ayay u wanaagsantahay.



CILMIGA BULSHADA

BUUGGA ARDAYGA

FASALKA 7^{AAD}

Qorayaasha, Tafatirayaasha:

Cabdilcasii Maxamed Aadan (Baaruud)
Cali Muxumed Bakaal

Qiimeeyayaasha:

Maxamed Cabdi Roble
Maxamed Bade Maxamuud
Deeq Axmed Badal



JAMHUURIYADA DIMUQRAADIGA FEDARAALKA
ITOOGIYA, WASAARADA WAXBARASHADA



Wasaarada waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya mashruuca hoos yimaad ee uqaybsan kor u qaadista iyo horumarinta tayada waxbarashada Guud oo taageero ka helay hayada IDA Credit No. 4535 ET oo ah the Fast Track Initiative catalytic fund iyo dawladaha Finland, Italy, Netherland iyo United Kingdom.

© 2011 wasaarad waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya. Xuquuqda buuggani way u dhawsan tahay wasarada waxbarade ee JDFI. Buugga ama qayb ka mid ah buugga lama guurin karo lama daabici karo lamana baahin karo, iyada oo la adeegsanayo qalabyada eletirooniksa iyadoo ogolaansho qoraal ah aan laga haysanin wasaaradda waxbarashada ama liisan ka saamaxaya xeerka qodobka No. 4/0/2004 ee xuquuqda daabaca oo ah maqaal ay jumhuriyada Dimoqraaidiga Federaalka Itoobiya.

Wasaaradda waxbarashadu waxay u mahad naqaysaa shakhsiyadka iyo kooxaha si toos ah iyo si dadban uga qayb qaatay daabicista iyo soo saaridda buuggan.

Kuwa haysta ogolaashaha qoraalka laakiin lagu eedeeyo inay gaf ka galeen xuquuqda buugga. Waa in ay la xidhiidhaan xafiis waynaha wasaaradda Waxbarashada ee ku taala Arata kiilo, Adiss Ababa, Itoobiya.

Waxaa Soo saray oo daabacday

STAR EDUCATIONAL BOOKS DISTRIBUTORS Pvt. Ltd.

24/4800, Bharat Ram Road, Daryaganj,

New Delhi – 110002, INDIA

iyo

ASTER NEGA PUBLISHING ENTERPRISE

P.O. Box 21073

ADDIS ABABA, ETHIOPIA

Under GEQIP Contract No. ET-MoE/GEQIP/IDA/ICB/G-07/09-B.

ISBN 978-99944-2-118-3

Tusmada Buuga

CUTUBKA 1 AAD

KUNOOLAANSHAHAA AFRIKA 1

1.1	BAAXADDA, QAABKA IYO MEESHAY DHACDO QAARADDA AFRIKA	2
1.2	LOOLASHA IYO DHIGAHA	10
1.3	QOYSASKA AMA BAHABA LUUQADAHA WAA WEYN EE AFRIKA	24
1.4	ILBAXNIMADII HORE EE AFRIKA (MASAARIDA IYO KAARTEEJ)	26
1.5	QARAMADII GUUMEYSIGA KA HOR JIRAY EE AFRIKA	29
1.6	GANACSIGII MASAAFADA DHEERAADHOO AHAA QODOB ISKU XIDHA DADKA ITOOBIYA	32
1.7	DADWEYNAHA QAARADDA AFRIKA	35

CUTUBKA 2 AAD

QAAB DHISMEEDKA DHULKA 56

2.1	LAKABYADA DHULKA	57
2.2	SAMEYSKA IYO NOOCYADA DHADHAABAHA	60
2.3	ADEEGSIGA IYO XOG KA HELIDDA KHARIIRADAHA	69

CUTUBKA 3^{AAD}

GEYIGA IYO ISBEDELA DIISA 83

3.1	DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUURJOOTA AH	84
3.2	BIYAH, CARRADA IYO HAWADA	104
3.3	TALLAABOOYINKA DHAWRISTA KHAYRAADKA DABIICIGA AH	112


CUTUBKA 4^{AAD}

ARRIMAHADADWAYNAHA 117

4.1	ARRIMAHADADWAYNAHA LA XIDHIIDHA DADWEYNAHA	118
4.2	ARRIMAHADADWAYNAHA XUQUUQDA IYO BADBAADADA	126
4.3	BARNAAMIJKA ISKAASHIGA	137

CUTUBKA KUNOOLAANSHAHAA AFRIKA

1



Ujeedooyinka guud ee Cutubka

Marka uu dhammaado cutubkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Aqoonsadan meesha, baaxada iyo qaabka Afrika.
- Aqoonsadaan qoysaska ama bahaha luuqada sare ee Afrika.
- Aqoonsadaan iyo inay sharaxaan ilbaxnimadii iyo qaramadii guumeysiga ka hor ee Afrika.
- Islafalanqeeyaan xaalandaha saameeya baahsanida dadka, dagaamada iyo hab-nolaleedka Afrika.

Tusmooyinka Muhiimka ah

- 1.1 BAAXADDA, QAABKA IYO MEESHAY DHACDO QAARADDA AFRIKA
- 1.2 LOOLASHA IYO DHIGAHA
- 1.3 QOYSASKA AMA BAHABA LUUQADAHA WAA WEYN EE AFRIKA
- 1.4 ILBAXNIMADI HORE EE AFRIKA (MASAARIDA IYO KAARTEEJ)
- 1.5 QARAMADII GUUMEYSIGA KA HOR JIRAY EE AFRIKA
- 1.6 GANACSIGII MASAAFADA DHEERA OO AHAA QODOB ISKU XIDHA DADKA ITOOBIYA
- 1.7 DADWEYNAHA QAARADDA AFRIKA
 - *Sookoobidda cutubka*
 - *Su'aalo ka kooban cutubka dhamaantii*

HORDHAC

Ma xasuusataa waxaad ku soo baratay Fasalka lixaad? Cashirada ugu muhiimsanaa waxyabaha ugu waa weyn ee aad ku soo dhigateen waxaa ka mid ahaa oogada sare ee dhulka, dadka Bariga Afrika, deegaankeena iyo arrimo muhiim ah oo ku saabsan arrimaha bulshada sida arrimaha dadweynaha iyo xuquuqda caruurta.

Waxaad fasalkan ku baran doontaan qaab sameyska dhulka iyo arrimaha bulshada ee ay ka mid ka yihiin arrimaha dadweynaha, xuquuqaha badbaadada iyo iskaashiga.

Wuxuu cutubkan si gaar ah ugu saabsanyahay qaaradda Afrika. Waaadna ku baran doontaan arrimo aasaasi ah oo ku saabsan qaaradda Afrika, sida meesha ay kutaalo (dhacdo), baaxadda, qaabka, dadweynaha iyo hab-noleed ka. Waxaa kale oo aad ku baran doontaan arimo taariikhi ah oo ay qaarada Afrika soo martay sida ilbaxnimadii hore, qaramadii gumeysiga ka horeeyey, iyo ganacsigii masaafadda dheeraa ee qaarada Afrika ayaa ka mid ah waxyaabaha aynu cutubkan ku barandoono.

Erayada Furaha u ah Cashirka



- Goob
 - lool
 - Xariiqaha Barbaraha
 - Dhig
 - Dhig dhaxo
 - Dhul-badhe
 - kulaalayaal
 - Khadka caalamiga ah ee kala qaybiya wakhtiga

1.1 BAAXADDA, QAABKA IYO MEESHAY DHACDO QAARADDA AFRIKA

1.1.1 Meesh ay dhacdo Qaaradda Afrika

Marka uu dhamaado cashirkan, ardagdu waxay qwoodi doonaan:

- ❑ Inay isbarbardhigaan baaxadda qaaradda Afrika iyo qaaradaha kale.
 - ❑ Inay aqoonsadaan meesha saxda ah ee ay dhacda (kutaalo) qaaradda Afrika.

Afrika waa mid ka mid ah todobada qaaradood ee kajira aduunka. Waa qaarada labaad ee ugu weyn dhanka baaxadda dhulka ee ku xigta qaarada Aasiya. Waxay ka koobantahay 54 waddan oo ay Itoobiya ka mid tahay.


Waa maxay macnaha meeli halka ay dhacdo (ku taalo)?

Meeli halka ay dhacdo (ku taalo) waxaa weeye halka ay meeli kaga taallo oogada sare ee dhulka. Waxayna noqon kartaa halka saxda ah ee ay xariiq ahaan dhacdo ama halka ay daris ahaan kutaalo.



Hawl-galka 1.1

Eeg khariiradan hoos ku taala oo isku day in aad tilmaantid halka ay kaga taalo qaaradda Afrika dunida.



Jaantuska 1.1: Khariirada Caalamka

Waxaa jira labo siyaabood oo loo tilmaami karo ama loo sheegi karo meel kasta oo aduunka ka mid ah halka ay oogada sare ee dhulka kaga taallo. Waxayna labadaasi kala yihiin meeli halka ay xariiq ahaan dhacdo iyo halka ay daris ahaan kutaalo. Xariiq ahaan meeli halkay dhacdo markaan caddaynayno waxaynu isticmaalaynaa xariiqaha loolka iyo dhigta. Habka kale, daris ahaan halkay meeli dhacdo markaan sheegayno waxaan itsicmaalaynaa dhulka barriga iyo biyaha dariska la'ah.

Meeli halka ay dhacdo ama ay ku taallo xariiq ahaan	Meeli halka ay ku taalo daris ahaan
<ul style="list-style-type: none"> » Waligaa ma'aragtay nidaamka shaqo ee isku xidhan ee xariiqaha kuyaala Galoobka iyo khariiradaha korkooda? Fiiri Jaantuska 1.1. 	<ul style="list-style-type: none"> » Maxaa tixraac ahaan loo isticmaalaa marka la raadinayo meeli daris ahaan halka ay dhacdo
<ul style="list-style-type: none"> » Maxay kulatahay in ay tahay waxqabadkooda (shaqadooda) ugu weyn? 	<ul style="list-style-type: none"> » Tixraacaas ma wuxuu inaga caawinayaa in aan tilmaano halka saxda ah ee ay meeli dhacdo?
<ul style="list-style-type: none"> ◊ Nidaamka wada shaqaynta isku xidhan ee xariiqaha loo yaqaano Loolasha iyo dhigaha waxay naga caawiyaan in aan aqoonsano meelkasta halka ay xariiqahaan kaga taalo khariiradaha caalamka iyo koonka (Glob). ◊ Xariiqaha Loolasha iyo dhigaha ee ku yaala Galoobka iyo khariiradaha korkooda waa qalabka ugu muhiimsan ee aan u isticmaalo tixraaca inoo caddeeya meeli halka ay dhacdo xariiq ahaan. ◊ Adeegsiga xariiqahani waxay inaga caawiyaan in aynu ogaano halka ugu saxsan ee ay dhacaan goobuhu. 	<ul style="list-style-type: none"> ◊ Daris ahaan halkay dhacdo waa halka ay meeli dhacdo (kutaalo) taasoo tixraaceedu yahay dhulka (qaaradaha iyo wadamada) ama biyaha (badaha waaweyn iyo kuwa yaryar). ◊ Inagoo tixraac ahaan u adeegsanayna dhulka kale iyo biyaha badaha, ayey daris ahaan halkay dhacdo inaga caawisaa inaan ogaano meesha ama booska guud ee ay meeli ku taalo. ◊ Jihoyinka (Waqooyi, Koonfur, Bari iyo Galbeed) ayaa ah qalabka ugu muhiimsan ee loo adeegsado daris ahaan halka ay meeli dhacdo.

Hadaba, waan sheegi karnaa meesha ay qaarada Afrika dhacdo xariiq ahaan iyo daris ahaanba.

B. *Xariiq ahaan halka ay dhacdo Afrika*

Afrika waa qaarad ku taala inta u dhaxaysa Loolka $37^{\circ}31'$ Waqooyi ilaa iyo $34^{\circ}52'$ Koonfur iyo dhigaha $25^{\circ}11'$ Galbeed ilaa iyo $51^{\circ}24'$ Bari. Fiiri **Jaantuska 1.2** si aad u ogaato halka saxda ah ee ay loolashaas iyo dhigahaasi ku yaalaan.




Jaantuska 1.2: xariiq ahaan meeshay dhacdo Afrika

Afarta barood ee ugu cidhifeeyaa qaarada Afrika waa:

- *Barta Waqooyiga ugu cidhifaysa ($37^{\circ}31'$ waqooyi) ee qaaradda waa cidhifka Boon.*
- *Barta Koonfurta ugu cidhifaysa ($34^{\circ}52'$ koonfur) ee qaaradda waa cidhifka Agulhaas.*
- *Barta Bariga ugu cidhifaysa ($51^{\circ}24'$ bari) ee qaaradda waa cidhifka Gaardafuu.*
- *Barta Galbeedka ugu cidhifaysa ($25^{\circ}11'$ galbeed) ee qaaradda waa cidhifka Ferdi.*

Fiiri [Jaantuska 1.3](#) si aad u aqoonsatid meesha ama halka saxda ah ee ay dhacaan cidhifyada Afrika.



Jaantuska 1.3: Cidhifyada Afrika

Xariiq ahaan halka ay dhacdo awgeed ayey Afrika u leedahay dabeecadahan gaarka ah ee hoos ku qaran:

- *Waa qaaradda kaliya ee ay maraan dhulbadhaha iyo labada kulaale; waa kulaalaha kansar ($23\frac{1}{2}^{\circ}W$) iyo kaabirkon ($23\frac{1}{2}^{\circ}K$) ama kulaalaha Waqooyi iyo Kulaalaha Koonfureed.*
- *Fogaanta u dhaxaysa cidhifka Waqooyi iyo ka Koonfurta iyo mida u dhaxaysa cidhifka Bari iyo ka Galbeed ayaa ah mid isku dhaw.*
- *Waa qaarada kaliya ee kutaala Afarta Nus-dhuleed, (nus-dhuleedka Waqooyi, Nus-dhuleedka Koonfureed, Nus-dhuleedka Bari iyo Nus-dhuleedka Galbeed).*
- *Guud ahaan dhulka Afrika $\frac{2}{3}$ waxay ku taala kulaalaha.*



Hawl-galka 1.2

Qaybt koobaad

Xusuusashada xaqqiyooyinka

- 1 Qaybtee ayaa Afrika balaadhan? Ma qeybta Koonfurta mise Waqooyiga?
- 2 Xisaabi faraqa u dhexeeya loolasha barta u cidhifaysa Waqooyiga iyo barta Koonfurta u cidhifaysa ee qaaradda Afrika.
- 3 Xisaabi faraqa dhigaha u dhexeeya cidhifka Galbeed iyo ka Bari ee Afrika.
- 4 Fogaantee ayaa dheer? Mata Waqooyi - Konfur mise ta Bari - Galbeed? Daris ahaan Meeshay dhacdo Afrika?

Tartan

$1^\circ = 111$ km meelaha dhulbadhaha u dhaw. Adiga oo tix-gelinaya kala duwanaanshaha ka shaqee su'aasha 2aad iyo 3aad, raadi fogaanta dhinaca hawada ah ee mid kasta kiiloo mitir ahaan.


T. Daris ahaan meeshay dhacdo (kutaalo) Afrika



Hawl-galka 1.3

Fiiri Jaantuska 1.4 kadibna ka jawaab su'aalaha soo socda. Aad u eeg meesha ay qaaradda Afrika khariirada caalamka kaga taalo, kadibna isku day:

- 1 In aad aqoonsatid qaaradaha kale ee u dhaw Afrika.
- 2 In aad aqoonsatid qaaradaha ka fog qaarada Afrika.
- 3 In aad aqoonsatid badaha iyo bad-weynada ku hareeraysan Afrika.



Jaantuska 1.4: Qaaradda Afrika

Daris ahaan meeshay Afrika dhacdo markaynu tilmaamayno waxaan adeegsanaynaa qaaradaha dariska la'ah iyo badaha iyo badweynada ku wareegsan.

Marka aynu tixraacayno qaaradaha dariska la ah, Afrika waxay ku taalaa:

- Koonfurta Yurub*
- Waqqooyiga Antiartika*
- Koonfurta – Galbeed Aasiya*
- Waqqooyiga Bari ee Ameerikada Koonfureed*
- Koonfurta Bari ee Ameerikada Waqqooyi*

Dhanka kale, marka aynu tixraacayno badaha iyo badaha waaweyn, Afrika waxay ku taalaa dhanka:

- Bariga Bad weynta Atlaantika*
- Waqqooyiga Bad weynta Antiartik*
- Galbeedka Badda Cas*
- Waqqooyi Galbeed ee Bad weynta Hindiya*
- Koonfurta Badda Meedhiteraaniyaanka*
- Galbeedka Gacanka Cadmeed*

Layliska 1.1



- 1 Sheeg magacyada afarta barood ama goobood ee ugu cidhifeeya qaaradda Afrika?
- 2 Sharax daris ahaan meeshay Afrika dhacdo?
- 3 Intee digrii ee lool ayey Afrika u dhaxaysaa?
- 4 Intee digrii ee dhigo ayey Afrika u dhaxaysaa?

1.1.2 Baaxadda Qaaradda Afrika

Afrika intay weynaanteedu ama baaxaddeedu la'egtahay?

Qaaradee kawayn Afrika?

Fiiri jaantuskan soo socda, kadibna isku day in aad ka jawaabtid su'aalaha kor ku yaala.

wuxuu soo bandhigayaa qiyas cabir qeyb ka mid ah ay isbarbar dhigayso laba qaaradood iyo shan waddan. Qeybta kalena ay ku taalo hal qaarad oo kaliya taasina tahay Afrika. Waad arki kartaa in qeybta ay Afrika ku taalo ka weyntahay qeybta kale. Taasina waxay si cad inoo tusaysaa waynida baaxada dhulka Afrika. Baaxadda guud ee dhulka Afrika waa bed ku dhaw 30 milyan oo km² (kilo mitir laba jibaaran); taasoo kaweyn saddex jibaar ka qaarada Yurub.

Afrika booskeeda ay ku fadhido waa uu ku dheeli tiran yahay dhulbadhaha agtiisa. Sababatuna waxay tahay cidhifka Waqooyi iyo cidhifka Koonfurta ee qaarada waxay u jiraan dhulbadhaha fogaan qiyaastii isku dhadhaw.

Tusaha 1.1: Baaxadda qaaradaha

Qaarada	Bedka (000' km ²)	Saamigeeda (qaybteeda) caalami (%)
Afrika	30,300	20.2
Aasiya	45,000	30
Yurub	10,000	3.6
Ameerikada waqooyi	24,200	16.2
Ameerikada koonfureed	12,00	11.9
Awstraaliya	8,700	5.8
Antaarkitika	14,000	9.3
Caalamka (Aduunka)	149,000	100

Hawl-galka 1.4



Fahanka xaqiiqooyinka (dhabta ah)

- 1 Imisa wadan ayay ka kooban tahay qaaradda Afrika?
- 2 Qeybtee ayey waddamo badan ku yaalaan? Waqooyi mise koonfurta?
- 3 Gobolkee baa ugu baaxad weyn?

1.1.3. Qaabka Qaaradda Afrika

Ma noos heegi kartaa inta nooc ee qaab ee aad taqaanid? Maxaad u malaynaysaa qaabka Afrika?

Hanaanka ama nooca dhulka ee ay meeli leedahay ayaa loo yaqaanaa qaab. Waxaa loo qeybiyyaa qaabka qaaradaha iyo waddamada saddex nooc ama qeybood.

- Marka uu qaabka qaarad ama wadan yahay wax ku dhow goobo ayaa loo yaqaanaa qaab is haysta ama goobo oo kale ah.
- Marka uu qaabka qaarad ama waddan uu hal dhinac aad u dheeryahay una balaadhanyahay (Waqooyi-Koonfur ama Bari-Galbeed) ee uu dhinaca kalena aad u gaabanyahay una dhuubanyahay (Waqooyi-Koonfur ama Bari-Galbeed) waxaa qaabkaas loo yaqaanaa fidsane.
- Marka ay qaaradi ama uu waddanku yahay mid ka kooban qaybo kala go'an oo aan xidhiidh sanayn, waxaa qaabkiisa loo yaqaanaa firidhsane.

Afrika qaabkeedu waa mid ku dhow qaab sida goobada oo kale ah oo ishaysta. Inkasta oo uu dhulbadhulu u kala qaybiyo laba is le'eg. Afrika qaabkeedu dhulbadhaha labadiisa dhinac ee Waqooyi iyo Koonfur islam a eco (isuma dheeli tirana). Dhinaceeda waqooyi waa mid aad u qaro wayn una balaadhan halka koonfurtu u muuqato wax dhuuban ama ciriiri ah.



Hawl-galka 1.5

Xoojinta (adkeynta) xirfadda garaaf ku muujinta.

Si taxadar leh u fiir Jaantuka 1.2 kadibna ka shaqee su'aalahan soo socda adigoo ka tixraacaya jaantuskaan soo sheegnay.

- 1 Guuri (koobbi ka samee) khariiradda Afrika iyadoo banaan? (ka eego [Jaantuska 1.2](#)).
- 2 Ku-calaamadee cidhifyadan soo socda ee Afrika halka saxda ah ee ay dhacaan:
 - Cidhifka Boon
 - Cidhifka - Agulhaas
 - Cidhifka - Ferdi
 - Cidhifka - Gaardaafi
- 3 Ku dhig xariiqaha loolka iyo dhigaha ee cidhifyada sare ee Afrika (isticmaal [Jaantuska 1.2](#))
- 4 Ku dhig (ku muuji) khariirada biyaha badahan soo socda.

<ul style="list-style-type: none"> ○ Badda Meedheteraaniyaanka ○ Bad weynta Atlaantik ○ Gacanka Cadmeed 	<ul style="list-style-type: none"> ○ Badda cas ○ Bad weynta Hindiya ○ Gacanka Gini
--	---

Tartan

Saddex meelood laba meel oo Afrika ka mid ah ayaa udhaxaysa labada kulaale. Masheegi kartaa qaaradaha kale ee ay labada kulaale maraan?

1.2 LOOLASHA IYO DHIGAHA

Marka uu dhamaado cashirkan, ardaydu waxay awoodi doonaan:

- Inay sharaxaan ereyada loo iyo dhig.
- Aqoonsadaan waxtarka ay loolasha iyo dhiguuhu inoo leeyihiiin.

Walligaa xariiqo ku yaala khariiradaha korkooda, ma'aragtag?

Maxay kula tahay in xariiqaha loogu dul sawiray khariiradaha?

Loolka

Loolashu waa xariiqaha ku yaala khariiradaha dushooda (korkooda), kuwaas oo aan ku aqoonsano meeli halka ay dhacdo iyo fogaanteeda digrii ee Waqooyiga ama Koonfurta dhulbadhaha. Xariiqaha loolasha waa xariiqo isbarbar socda kuwaas oo garab qaada dhulbadhaha, iskuna xidha Bariga iyo Galbeedka ama Galbeedka iyo Bariga khariirada korkooda.

Xariiqaha isbarbar socda ee Waqooyiga ama Koonfurta ka xiga dhulbadhaha, waxay leeyihii tiro digrii ah. Dhulbadhuhu wuxuu kuyaalaa loolka 0° (Eber digrii), halka digriiga labada cidhifna (cidhifka Waqooyi iyo ka Koonfureed) uu yahay 90°. Hadaba, cabbirka hal-beega loolku wuxuu u dhexeeyaa 0° oo dhulbadhaha ah ilaa iyo 90° oo cirifyada ah. Meelaha Waqooyiga ka ah dhulbadhaha waxay yeelanayaan digrii lool oo Waqooyi. Meelaha koonfurta ka ah dhulbadhahana waxay yeelanayaan digrii lool Koonfur ah.

Hawl-galka 1.6



Si fiican u firi khariirada Afrika isticmaal ama ka tixraac Jaantuska 1.2.

- 1 Waxaad heshaa dhulbadhaha, kaasoo kuyaala kala badhka cidhifka Waqooyi iyo cidhifka Koonfureed?
- 2 Isku day in aad heshid digriiga loolka ay ku yaalaan
 - a Addis Ababa?
 - b Qaahira?
 - c Keebtawn?

Dhulbadhaha

Xariiqee ayuu dhulbadhuhu Leeyahay? Waa kee xariiq qiyaaseedka (aan dhabta ahayn) ee u qeybiya dhulka labada Nus-dhuleed (nus-dhuleedka Waqooyi iyo nus dhuleedka Koonfur)? Dhulbadhuhu waa xariiq mala awaal ah sabab?




Dhulbadhuhu waa xariiq qiyaaseed ku yaala badhtamaha dhulka oo u jira fogaan isla'eg cidhifka Waqooyi iyo cidhifka Koonfurta. Dhulbadhuhu wuxuu ku yaalaa loolka 0° cidhifka Waqooyi iyo cidhifka Koonfurtana waxay ku kala yaalaan 90°W iyo 90°K . Xariiqaha loolasha ee ku yaala inta u dhaxaysa 0° (dhulbadhaha) iyo 90°W iyo K (cidhifyada) waxay isu jiraan 1° . (fiiri [Jaantuska 1.6](#)).

Layliska 1.2



- 1 Dhulbadhuhu miyuu maraa (gudbaa) Itoobiya?
- 2 Intee ayuu u jiraa Itoobiya?
- 3 Qeybta Itoobiya ee u dhaw dhulbadhaha waa qeybtee?
- 4 Waa kuwee waddamada Afrika ee uu maro dhulbadhuhu?
- 5 Waddamada Afrika ee ay labadda kulaale maraan waa kuwee?

Dhulbadhaha iyo meelaha u dhawba 1° wuxuu lamid yahay 110 kiiloomitir (km) dhul ahaan, Balse marka la gaadho loolka 45° cabbirkii waa uu isbaddali oo $1^{\circ} = 111 \text{ km}$ (fiiri [Jaantuska 1.8](#)). Celcelis ahaan 1° wuxuu lamid yahay 110.5 km.



Jaantuska 1.5: (b) Loolka 38°W waa fagaanta xagasha barta dhulka oogadiisa waqooyi kalabadhka u ah. (t) halka saxda ah ee ay goobta "x" dhacdo waa loolka 52°W iyo dhigta 27°G halkaas oo ay midba midda kale iska. (j) dhigta 135°G waa fogaanta xagasha waqooyiga xigta Dhig-dhexada

Jaantusyada sare waa kuwo aad muhiim u ah waxaana u isticmaali karnaa xisaabinta fogaanta u dhaxaysa dhulbadhaha iyo cidhifyada. Tusaale: Baadhime waxay ku taalaa jiida ama cidhifka waqooyi ee Tigraay, waxayna dhacdaa 15°W . Marka fogaanta Baadhime iyo dhulbadhaha u dhaxeysa waxay tahay $15^{\circ} \times 111$ km taas oo lamid ah 1665 km.

Kulaalayaasha


Maxay yihiiin kulaalayaashu?

Sidee ayey uga muuqdaan ama ugu sawiranyihiin khariiradaha iyo koonka (Glob)?

Maxay ugu sawiran yihiiin khariiradaha iyo koonka (Glob) korkooda?

Muxuu yahay digriiga loolka ay u taagan yihiiin?

Soonaha kulaaluhu waa dhulka fogaanta isla'eg u jira dhulbadhaha ee u dhexeeya loolka $23\frac{1}{2}^{\circ}\text{W}$ iyo $23\frac{1}{2}^{\circ}\text{K}$. Digiiga loolashan ($23\frac{1}{2}^{\circ}\text{W}$ iyo $23\frac{1}{2}^{\circ}\text{K}$) waa barta (goobta) ugu cidhifeeyaa waqooyiga iyo koonfurta ee sida tooska ah u hela qoraxda ugu yaraan sanadkiiba halmar. Barta Waqooyiga ugu cidhifaysa kulaalaha ee dhacda $23\frac{1}{2}^{\circ}\text{W}$, waxaa loo yaqaanaa kulaalaha kansarka. Barta Koonfurta ugu cidhifaysa kulaalaha dhacdana $23\frac{1}{2}^{\circ}\text{K}$ waxaa loo yaqaanaa kulaalaha kaabrikoon. Si fiican u fiiri muuqalka hoos ku yaala si aad waxbadan ugu ogaato kulaalayaasha una aqoonsatid halka saxda ah ee ay xariiqaha muhiimka ah ee kulaalayaashu dhacaan.



Jaantuska 1.6: halka ay dhacaan kulaalayaashu.

Layliska 1.3



- 1 Maxay yihii digriiga loolasha ay ku yaalaan dhulbadhaha, kulaalaha kansar iyo kulaalaha kaabrikoon?
- 2 Maxay yihii digriiga loolasha ay ku yaalaan cidhifka waqooyi iyo cidhifka koonfureed?
- 3 Qaaradahee ayey kula tahay in ay maraan labada xariiq ee kulaalaha?
- 4 Cimila nooceee ah ayuu dhulka soonaha kulaaluhu leeyahay?

Kulaalaha Kansarka (waqooyi)


Halkee ayuu kulaalaha kansarku ka dhacaa Galoobka? Ma Koonfurta mise Waqooyiga dhulbadhaha?


Kulaalaha kansarka ee ku yaala loolka $23\frac{1}{2}^{\circ}$ W, waa xariiq qiyaseed isku xidha Bari ilaa Galbeed ama Galbeed ilaa Bari oo ku yaala Galoobka iyo khariiradaha korkooda. Wuxuu barbar qaadaa dhulbadhaha iyo xariiqaha loolasha kale ee kuyaala nus-dhuleedka Waqooyi. Kulaalaha kansarka waa xadka ama xuduuda Waqooyi ee soonaha kulaalaha. Kulaalaha kansarka wuxuu ilayska cadceedu si toos ah ugu dhacdaa hal maalin sannad-kiiba (Juun 21). Waa barta waqooyiga ugu cidhifaysa ee ay ugu yaraan sandadkii halka mar qoraxdu sida tooska ah ugu dhacdo.

Kulaalaha Kaabrikoonka (Koonfureed)

Kulaalaha kaabrikoonka ee ku yaala loolka $23\frac{1}{2}^{\circ}$ K waa barta Koonfurta ugu cidhifaysa ee ay qoraxdu sida tooska ah ugu dhacdo ugu yaraan sanadkiiba hal mar, markaas oo ah xiliga jiilaalka ee nus-dhuleedka Waqooyi iyo xiliga xagaaga ay u tahay nus – dhuleedka Koonfureed (Diseembar 22 deeda). Kulaalaha kaabrikoon waa xadka Koonfureed ee soonaha kulaalaha.

Jaantuska 1.7: xagaagaa (juun 21) iyo Jiilaalka (Diseembar 22)





Jaantuska 1.8: cabbirada fogaanta u dhaxaysa dhulbadhaha iyo meelaha kale

Layliska 1.4



Ka shaqee su'aalahan soo socda ee la xidhiidha khariirada sare ee Itoobiya (Jaantuska 1.8).

- 1 Baadhime waxay dhacdaa 15° Waqooyiga dhulbadhaha, Mooyaalena waxay dhacdaa 3° oo Waqooyiga dhulbadhaha ah. Hadaba raadi fogaanta kiiloomitir ee tooska ah ee u dhaxeysa Mooyaale (3° W) iyo Baadhime (15° W).
- 2 Fogaan intee dhan ayey Addiis Saman u jirtaa dhulbadhaha?
- 3 Raadi Fogaanta km (kiiloomitir) ee tooska ah ee u dhaxeysa Addiis Saman iyo Mooyaale.

Dhigaha

Dhiguuh waxay inoo leeyihiiin faa'iido weyn. Wuxaan ku aqoonsanaa halka ay meelahu dhacaan iyo fogaanta Bari ama Galbeed ee ay meeli ka tahay dhig-dhexada. Dhigaha cabbirkoodu waa qiyaas cabbirka xaglahaa ee loo yaqaano digriiga. Xariiqo-qiyaseedka isku xidha meelaha ay dhigtoodu isle'egtahay ayaa loo yaqaanaa meeridiyomyo.

Xariiqaha Dhiguhu waa xariiqa toos ah oo isku xidha Waqooyi iyo Koonfur ama Koonfur iyo Waqooyi. Xariiqaha dhiguhu ma aha sida xariiqaha loolasha kuwa isbarbar socda ama si siman isu barbar qaada. Waa ay ku kala durugsan yihiin dhulbadhaha agiiisa, wayna isku soo dhawaadaan markay ku dhawaadaan labada cidhif, oo ah halka ay ku kulmaan dhamaan dhigaha oo idil. Xariiqahan dhiguhu waxay dhulka u qeybiyaan 360° ; markaa waa in ay jirto bar bilow. Dhiqta bar bilowga u ah xariiqaha dhigaha waxaa la dhahaa dhig-dhexo.

Dhig-dhexadu waa bar bilowga xariiqaha dhigaha taasoo u taagan dhigta ebar dhigrii (0°). Dhig-dhexadu waxay martaa magaalada Giriinwij ee ku taala carriga Ingriiska. Fiiri [Jaantuska 1.11](#) si aad wax badan uga fahantid loolasha iyo dhigaha.

Dhigaha Bari iyo kuwa Galbeed waxay ku kulmaan ama isugu yimaadaan dhigta 180° ee loo yaqaano xariiqda kala badha wakhtiga maalinta (dharaarta) iyo habeenka ee caalamiga ah.

Xariiqan dhigta 180° digrii wuxuu dhanka kale ee dhulka si toos ah uga soo horjeeda Liidinta Giiriinwinka ama dhig dhaxada.

Hawl-galka 1.7



Si fican ugu fiirso khariirada Afrika (Jaantuska 1.2).

- 1 Waxaad raadisaa Dhig-dhexada?
- 2 Waxaad sheegtaa dhigaha mara magaaloyinkan Akrra (Gaana) Qaahira (Masar)?

Meeridiyomka Giriinwij

Muxuu yahay meeridiyamka Giriinwij?

Maxaa waxtar ah oo ay inoo leedahay?


Meeridiyamka Giriinwij waa dhigta eber dhigrii ee isku xidha cidhifka Waqooyi iyo cidhifka Koonfurta, siina dhex marta dhul badhaha oo ah mid ku yaala kala badhka labada cidhif. Xariiqa meeridiyomka ee mara magaalada Giriinwij ayaa waxaa loo aqoonsaday in uu yahay bar bilowga (0°) meeridiyomyada. Waxaa xariiqan dhigta 0° ee bar bilowga meeridiyomyada ah loo yaqaanaa Dhig-Dhexo.



Jaantuska 1.9: muuqaalka goobta barashada cilmiga xidigiska ee
Giriinwij

Si aynu u hello bar ku taala khariirada ama Koonka (Glob) dushiisa, waxaan isticmaalaa xariiqaha sida shabaga ah isugu-xidhan ee ka kooban loolasha iyo dhigaha uu nidaamka wada shaqayneed ka dhexeyyo.

Hadaba marka aan doonayno in aan qorno ama tilmaano goobi halka ay kaga taalo khariirada waxaan horraysiinaynaa loolka ay dhacdo. Tusaale ahaan Addiis Ababa waxay ku taalaa loolka $9^{\circ}03'W$ iyo dhigta $38^{\circ}42'B$.



Jaantuska 1.10: sifooyinka xariiqaha barbaraha (loolasha) iyo xariiqaha dhigaha.

Dabeecadaha Loolasha iyo dhigaha

Xariiqaha barbaro (loolasha)	Meeridiyamyada (dhigaha)
◊ Waa xaariqo isku xidha cidhifka Bari illaa ka Galbeed.	◊ Waxay isku-xidhaan cidhifka Waqooyi iyo cidhifka Koonfureed.
◊ Waa xariiqo iyaga iyo dhulbadhuhuba ay isbarbar qaadaan (isbarbaar socdaan).	◊ Ma aha kuwo isbarbar qaada sida Loolasha ee waxay ku kulmaan cidhifyada..
◊ Waxay isu jiraan fogaan isla'eg oo isku mid ah.	◊ Marka laga tago dhinaca dhulbadhaha ee loo socdo cidhifyada waxaa sii yaraada foganta iyaga dhexdooda ah oo way isku soo dhawaadaan.
◊ Dhererkoodu waa uu sii yaraadaa marka ay ku dhawaadaan cidhifyada (waqooyi iyo Koonfun).	◊ Dhamaantood waxay Leeyihin dherar isla'eg oo meeridiyom waliba dheerer kiisu wuxuu la'egyahay dhulbadhaha badhkii.
◊ Dhamaantood waa xariiqa xoodan.	◊ Dhamaan meeridiyomyadu waxay iskugu yimaadaan cidhifyada.

Dabeecadaha ay wadaagan xariiqaha barbaro (loolasha) iyo Meeridiyamyada (dhigaha)

Lablooduba waa xariiq qiyaseedyo (aan dhab aheyn) oo kuyaala Galoobka iyo khariirada korkooda oo kaliya.

- *Xariiqaha meeridiyamyada (dhigaha) ee qotoma iyo xariiqaha barbaro (loolasha) ee jiifa waxay iska gooyaan xagal quman.*

Hawl-galka 1.8



Idinkoo koox koox ah islaalanqeeya su'aalaha soo socda

- 1 Maxay tahay ujeedada loogu qeybiyey dhulka Loolasha iyo Dhigaha?
- 2 Halkee ayuu ku yaalaa dhulbadhuhu?
- 3 Dhigtee ayey dhacdaa Giriinwij?


Ujeedada loogu qeybiyey aduunka xariiqahan loolasha iyo dhigaha waxay tahay in ay inoo sahlaan garashada meeli halka ay dhacdo ama kaga taalo dhulka dushisa. Si uu fahankoodu inoogu fududaado ayaa digrii kasta ee Lool ama Dhig loo sii qeybiyey 60 daqiqiyo.

Isbedelka Wakhtiga

Dhulku wuxuu sameeyaa wareeg uu 24 kii saacba mar ku wareego udub-dhexaadkiisa, kaasoo sababa:

- b** Isbedbedalka maalinta iyo habeenka.
- t** Faraq hal saac ah oo u dhexeeya labada meeridiyom ee isu jira 15°.

Maalinta (dharaar) iyo Habeenka: Marka uu dhulku ku wareegayo udub-dhexaadkiisa qeyb ka mid ah oogada sare ee dhulka ayaa ku toosta qoraxda oo helaysa iftiinka qoraxda, halka ay qeyb kalena ka fogaaneyso ilayska Cadceeda oo ay ku jireyso madaw ama mugdi. Ma aha waxa arin tan sababa dhaqaaqa ay qoraxdu dhaqaaqayso balse waa wareega uu dhulku ku wareegayo Cadceeda. Wuxaan tusaale ahaan arinkaas aan soo sheegney ugu soo qaadan karnaa hadaad saaran tahay tareen aad u dheeraynaya oo aad Addis Ababa ka soo raacdya una socotid Diri dhaba, waxaad arkeysaa dhamaan geedaha, xoolaha, guryaha iwm oo aad moodid si xawli ah inay u socdaan oo ay idin daba marayaan, tareenkana aad moodid in uu tagan yahay.



Jaantuska 1.11: maalinka iyo habeenka

Layliska 1.5



Isla falanqeeya su'aalahan soo socda

- a Maxay meeluhu u helaan maalin iyo habeen kala duwan?
- b Maxaa loo moodaa qoraxdu in ay ka soo baxdo dhanka Bariga, oo ay u dhacdo Galbeedka?

Maadaama uu dhulku ku sameeyo halkiisa wareeg ee dhamaystiran ee 360° ah hal maalin ama 24 saacadood, wuxuu ku goynayaa 15° - ba hal saac ama 1° - ba 4 daqiiqo.

$$360^\circ = 24 \text{ saacadood}$$

$$? = 1 \text{ saac}$$

$$\frac{360^\circ \times 1 \text{ saac}}{24 \text{ saacadood}} = \frac{360^\circ}{24} = 15^\circ$$

Hadii uu dhulku ku wareego 15° ba hal saac, 1° waxay ku qaadan 4 daqiiqo, taasoo ah

$$\begin{aligned} 15^\circ &= 1 \text{ saac} & \Rightarrow \frac{1^\circ \times 1 \text{ hr} (60 \text{ daqiiqo})}{15^\circ} &= 4 \text{ daqiiqo} \\ 1^\circ &=? \end{aligned}$$


Maadaama uu dhulka wareegiisu ka soo bilowdo Galbeedka oo uu u socdo Bariga, marka aynu u socono 15° xaggaa Bari wakhti degaanka waxaa ku biiri halsaac sidaa waxaa rogaalkeeda ah, hadaad u socoto dhanka Galbeed 15° , wakhti degaanka waxaa ka jarmaya 1 saac. (fiiri [Jaantuska 1.13](#))



Jaantuska 1.12: Isbadalka waqtiga ee ay dhiguhu keenaan

Hadii "S" ([Jaantuska 1.12](#)) ay 15° dhanka Bari ka tahay "Y" oo whakhti 6 ama 12 - kii duhurnima ah ku jirta, markaas "S" way ka hor heshay "Y" ilayska ama

iftiinka maalinimo “S” waxay 6 dii ama 12 - kii duhurnimo soo dhaaftay 1 saaca ka hor, oo wakhti degaanka “S” waa 1-kii ama 7-dii duhurnimo.



Jaantuska 1.13: Farqa Wakhtiga ee u dhexeeya Dhasee iyo Gooba

Dhassee iyo Gooba waxay dhacaan dhigta 40° Bariga ka xigta Dhig Dhexada eber digrii (0°) oo ay wakhti 12 kii ama 6 dii duhurnimo u tahay. Hadaba, wakhtiga Dhassee iy Gooba waxay ka horeeyaan 12 ka duhurnimo 2 saac iyo 20 daqiqiyo (2:20) oo wakhti degaankoodu waa 2:20 ama 8:20 kii duhurnimo.

Layiska 1.6



- 1 Haddii uu wakhti degaanka dhigta 39° G uu yahay 12-kii duhurnimo, muxuu noqon wakhti degaanka magaalada Addis Ababa ee ku taala dhigta 39° B?
- 2 “A” waxay ku taalaa meeridiyomka 60° Galbeedka ka ah meeridiyomka Giriinwij, “B” waxay ku taalaa dhigta 90° Bariga ka xigta meeridiyomka Giriinwij. Hadii uu wakhti degaanka (saacada) goobta “A” uu yahay kowdii duhurnimo (1 pm), muxuu noqon wakhti degaanka goobta “B”?


- 3** Magaalada Buume (oo ah magaalo degmo ka mid ah gobalka Gaama goofa) waxaa mara meeridiyomka 38°B , halka uu meeridiyamka mara Dhabra sayt ka yahay 40°B .
- b** Raadi faraqa digrii ee u dhexeeya dhigaha labadda magaaloo.
 - t** Raadi faraqa waqtii ee u dhexeeya labadda magaaloo.

Dhamaan meeridiyomyada dhanka Bari ka ah Meeridiyomka Giriinwij (GMT) waxay qoraxdu u soo baxdaa inta ayna meeridiyomkan u soo bixin.

Hadaba wakhti degaanka Dhigaha Bariga ka ah meeridiyomka Giriinwij waa uu ka horeeyaa meeridiyomka Giriinwij (GMT). Wakhti degaanka dhigaha Galbeedka ka ah meeridiyomka Giriinwij waa uu ka dambaynayaa GMT-iiga (waqtii degaanka meeridiyomka Giriinwij).

Waxaad isbarbardhig ku samaysaa wakhti-degaanka Riiyodijaneero oo Galbeedka ka ah meeridiyomka Giriinwij (GMT-iiga) iyo Qaahira oo Bariga ka ah meeridiyomka Giriinwij ama liidinta Giriinwijkha (GMT-iiga).

Khariirad



Jaantuska 1.14: wakhti degaanka dhigaha la soo xuley oo uu wakhtiguna yahay 12 kii duhurnimo

Tusaalah 1aad

Dhigta ay meeli dhacdo ama marta goob waxaa laga xisaabin karaa wakhti degaanka iyo GMT-iiga. Ka soo qaad wakhti degaanka Addiis Ababa in uu yahay 18:00 saacadood, ka GMT-iigana yahay 15:00 saacadood. Faraqa wakhti ee u dhixeyya Addiis Ababa iyo meeridiyomka ama Liidinta Giriinwij (GMT) waxaa weeye 3 saacadood.

Si aad u heshid ama u ogaatid digriga ay dhigi leedahay, raac jidkan (habka) soosocda:

- 1 Raadi faraqa wakhti ee u dhixeyya laba goobood;
- 2 Markaad heshid faraqa wakhti kadib u badal digrii;
- 3 Dhulka wuxuu wareegaa 360° oo Dhig 24 saac gudahood.

Furfuris:

Faraqa waqtii ee u dhixeyya Addiis Ababa iyo meeridiyomka Giriinwij waa:

$$18:00 \text{ (Addiis Ababa)} - 15:00 \text{ (Giriinwij)} = 03:00 \text{ ama } 3 \text{ saacadood}$$


Digriiga Dhigeed Addis Ababa waxaan ku heleynaa

$$24 \text{ saacadood} = 360^\circ$$

$$3 \text{ saacadood} = ?$$

$$= \frac{3}{24} \times 360^\circ = 45^\circ \text{ oo dhig ah}$$

Marka dhigta Addiis Ababa ay ku taalo waa 45° Bariga Dhig-dhexada



Jaantuska 1.15: isbadal wakhiyeedka dhigaha

Tusaalah 2aad

Haddii uu wakhti degaanka goobta “X” uu yahay 20 saac (2 dii ama 8 dii fiidnimo), GMT-guna yahay 12 saac (12 kii ama 6 dii duhurnimo). Raadi dhigta ay dhacdo goobta “X”.

- *Faraqoodu waa 20 saac – 12 saac = 8 saac*
- *Faraqa waqtii waa 8 saacdood*
- *15° ee Dhig waxay u taagan tahay 1 saac.*
- *Maadaama ay wakhti degaanka goobta “x” ka horeyso waqtii – deegaanka meeridiyomka Giriinwiji (GMT-iiga), “x” waxay ku taalaa Bariga dhig-dhexada ama meeridiyomka Giriinwijkha.*
- *Dhigta goobta “x” waa*

$$1 \text{ saac} = 15^\circ$$

$$8 \text{ saacdood} = ?$$

$$\frac{8 \text{ Saac}}{1 \text{ Saac}} \times 15^\circ = 120^\circ$$

Marka, Dhigta x waa = 120°B.

Faraqa wakhti ee u dhxeeeya goobaha waxaynu si fudud ugu xasuusan karnaa sidan soo socota:

Tusaale 3

Hadii ‘A’ ay ku taalo Bariga “B”, wakhti degaanka goobta “A” wuu ka horeeya midka goobta “B”. Haddii ay “A” ku ttaalo Galbeedka “B” saacada “A” way ka dambaysaa mida “B”. Fiiri tusaalahan soo socodka oo isku dey in aad fahantid saameynta isbadalka wakhtiga ee uu isbadalayo 15° ee Dhigba halka saac (1saac). Natijjo ciyaar kubbadda cagta ah oo ka dhacday koonfur Afrika ayaa laga soo baahiyey magaalada Keebtawn (15°B) wakhti 6-dii makhrubnimo ah, maalin Isniin ah oo ay bisha Juun tahay 10. sheeg wakhtiga natijjada ciyaartaas laga maqli Loos Anjalis (120°G) iyo Addis Ababa (45°B)?

Faraqa dhigeed ee u dhxeeeya Keebtawn iyo Loos Anjalis

$$= 120^\circ G + 15^\circ B$$

$$= \frac{135^\circ}{15} = 9 \text{ saac}$$

maadaama ay Loos Anjalis Galbeedka ka tahay Keebtawn, wuu ka dambeeyaa wakhti degaankeeda iyo saacadeeduba Keebtawn, oo waxay ka dambeynaysaa 9 saacdood saacada Keebtawn ee ah 6 dii mekhribnimo. Hadaba saacada Loos Anjalis waxay noqon 9 kii barqanimo.

Natijada laga soo baahiyey Keebtawn wakhti fiid ah oo xiligunga yahay Jiilaal waxaa laga maqlayaa Loos Anjalis wakhti aroor ama subax ah oo xiligunga yahay xagaaga maalintuna isku mid ay tahay (Isniin).

1.3 QOYSASKA AMA BAHABA LUUQADAHA WAA WEYN EE AFRIKA

Marka uu casharkan dhamaado kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Inay magacaabaan qoysaska ama bahaha luuqadda sare ee Afrika.

Erayada Furaha u ah Cashirka

 Luuqad

 Luuqad-hoosaadyo

Bahaha Luuqadda Sare

Luuqadaha aynu halkan ku baran doono waa kuwa asal ahaan ka soo jeeda Afrika. Waxay khabiiradu ku qiyaasaan in luuqadaha lagaga hadlo Afrika yihiin in ku dhaw 2000 oo luuqadood. Waxaa luuqadaha sida ballaadhan loogaga hadlo Afrika ka mid ah Sawaaxiliga iyo xawsaha. Sawaaxiliga waxaa wakhti xaadirkan ku hadla in ku dhow 50 milyan oo qof, kuwass oo intooda badan ku nool Bariqa iyo Badhtamaha Afrika. Xawsaha waxaa lagaga hadlaa Galbeedka Afrika oo uu ugu horeeyo dalka Nayjeeriya.

Bahda ama qoysaska luqadaha sare ee Afrika waxaa kamid ah kuwan soo socda:

- 1 Nijjar – koongoo – waxaa lagu qiyaasaa tirada dadka ku hadasha luuqadan 300 ilaa iyo 400 oo milyan.
- 2 Afroo – Aasiyaatik – waa midda labaad dhanka tirada dadka ku hadla. Waxaa ku hadla 200 – 300 oo milyan oo qof.
- 3 Nayloo – Saxaraan – waxaa ku hadla in ku dhaw 30 milyan oo qof.
- 4 Khoysan: waxaa ku hadla dad lagu qiyaaso 200,000 ilaa iyo 300,000.

Waxaadse ogsoonaataan in dad baddan oo Afrikaani ku hadlaan in kabadan hal luuqadood.

Meelaha Afrika ee Lagaga hadlo Luuqadahan

Bahda Nijjar Koongoo: Bahdani waxay leedahay laama fara badan oo hoos yimaada, kuwaas oo lix ka mid ah lagaga hadlo Galbeedka Afrika iyo Jamhuuriyadda bartamaha Afrika. Luuqadda Baantuu oo ah Luuqad bahdan ka mid ah ayaa waxaa lagaga hadlaa dhinaca Koonfureed ee Afrika inteeda badan.

Bahda Afro-Aasiyaatik: dadka luuqadan ku hadla waxaa lagu qiyaasaa 200-300 oo milyan. Dhulka luuqaddan lagaga hadlo waxaa kamid ah – Waqooyiga Afrika; Soomaaliya, Itoobiya, Eritariya, iyo agagaarka harada Jaad ee Afrikada dhexe.

Bahda Nayloo-Saxaraan: luuqadan inteeda badan waxaa lagaga hadlaa Bariga saxaarahaa intiisa badan, qeybta sare ee wabiga Niil, dhulka u dhaw haradda Fiktooriya iyo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Koongo.

Bahda Khoysan: Luuqaddan bahdeedu waxay ka kooban tayah 12 luuqadood, waxaana loo qeybiyaa laba qeybood oo waa weyn oo kala ah khoysanka Koonfur Africa iyo khoysanka Bariga Afrika.



Jaantuska 1.16: Khariiradda Bahda Luuqadaha waa weyn ee Afrika

1.4 ILBAXNIMADII HORE EE AFRIKA (MASAARIDA IYO KAARTEEJ)


Marka uu dhamaado casharkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- aqoonsataan ama tilmaantaan halka ay ku yaalaan Masar iyo kaarteej oo ka mid ah saldhigiyadii ilbaxnimadii hore ee Afrika;
- sharaxaan muhiimadda ilbaxnimadii hore ee Masar iyo Kaarteej.

Erayada Furaha u ah Cashirka



- | | |
|------------------------|--------------------|
| ➡ Ahraam | ➡ Burbur ilbaxnimo |
| ➡ Fircoo | ➡ Heeroglaafi |
| ➡ Qaab-dhismeed Bulsho | |



Jaantuska 1.17: Qaramadii hore ee Afrika

1.4.1 Ilbaxnimadii Hore ee Masaarida


b *Halka ay dhacaysay (ku taaley)*

Masar waxay aad uga dhawrsoonayd dhanka weerarada cadawga shisheeye oo ay ugu wacnayd halka ay kutaalo. Waxaa dhanka Waqooyi ka ahaa Badda Meedhitiraaniyaanka, dhanka Barina waxaa ka ahaa Siinaay iyo Lamadagaanka carabta iyo Badda Cas ee gaashaanka u aheyd sanadadii hore. Waxaa dhanka Galbeedka ka ahaa/ah Lamadagaanka Saxaraha. Wuxuu masar cadawgeeda shisheeye inta badan kaga iman jiray dhanka Bariga iyo dhanka Waqooyi-Bari.

Kaalintii Wabiga Niil: Masaaridu waxay wabiga u isticmaali jireen waraabka beeraha. Waxaa kale oo uu wabigu keeni jiray carro nafaqaysan, taasoo inta badan uu soo qaadi jiray Niilka Buluuga ah ee kayimaada dhulka jooga sare ee Itoobiya. Waxaa kale oo ay u isticmaalaan wabiga gaadiid ahaan.

t *Dhaqaalahaa*

Beeraha ayaa ahaa wax-qabadka dhaqaale ee ugu muhiimsan ee masaarida intooda badan ku tiirsanaayeen. Masaaridu waxay beeran jireen heedda, qamandiga iyo waxyaabo kale. Waxayna dhaqan jireen lo'da iyo xoolo kaleba. Waxaa iyana jiray masaari badan oo uu waxqabadkooda dhaqaale ee ay ku tiirsanyihii ahaa ganacsiga iyo xirfadda farsamada gacanta ee ay ka midka ahaayeen tollidda dharka iyo qorridda dhagaxa dhismaha. Waxaa kale oo intaa u dheeraa kaluumaysiga. Maadaama ay masaaridu heli kareen qalab dhismo oo aad ugu filan, ayay dhisteen dhismayaal waa weyn oo taariikhii ah.



Jaantuska 1.18: Dabaqadihii bulshada ee Masaaridii hore

Ahraamta

Masaaridu waxay lahaayeen nidaam siyaasadeed oo wanaagsan kaasoy hogaaminayeen faraaciyyintii. Waxaa faraaciyyinta lagu yaqaanay oo ay caan ku ahaayeen xirfadoodii dhisida ahraamta. Waxay ahraamtu ahaayeen meelaha lagu aaso (xabaalo) faraacida iyo boqorada. Wuxuu macnaha erayga fircoo (faraaci) yahay guri weyn, wuxuuna horgale magac u ahaa boqorada iyo boqoradaha masaarida. Waxaa xilka masaarida soo martay faraaci dhawr ah oo iska dhaxlaysay. Waxay faraacidu canshuur ka qaadi jireen beeralayda, ganacsatada iyo farsamayqaanada (xirfadlayaasha farsamada gacanta). Si canshuurtan loo diiwaangaliyo darteed ayay u sameysteen qoraal loo yaqaano qoraalkii hiroglaafiya. Hiroglafigu wuxuu ahaa qoraal sida sawirka far shaxanka oo kale ah (sawirka u eg).

Masaaridu waxaa kale oo ay sameyn jireen dawo dhaqameed ay dheecaanka iyo qoyaanka kaga dhawraan (ilaaliyaan) maydka. Waxay masaaridu balaadhiyeen baayacmushtarkoodii oo ay gaadhsiiyeen Bariga dhexa iyo dhulka Uduga ee loo yaqaano Geeska Afrika. Boqoradii la odhan jiray Hatshebsut ayaa u dirtay markab dagaal dhulkii uduga, kaasoo laga soo buuxiyay (lagu soo raray) adoomo, malmal, foox iyo waxyaabo kale oo halkaas ka bixi jiray.

Hoos u dhicci iyo dhicidii Hogaamiyayaashii Masaarida

Dadkii reer Hayksoos ee kaga yimid dhinaca Aasiya ee uu hogaaminayay Alaksaandharkii awooda badnaa weeraraday ku soo qaadeen iyo kuwo kale ayaa ka dambeeyay hoos u dhicci ilbaxnimadii masaarida. Wixii intaa ka dambeeyay ma jirin wax u dhashay masar oo hogaamiye ka noqday ilaa iyo 1952 dii markii uu Jamaal Cabdi Naasir xilka qabsaday.

1.4.2 Ilbaxnimadii hore ee kaarteej

Halka ay dhacaysay (ku taaley) – Kaarteej (carthage) waxay ku taaley (dhacaysay) xeebta badda Meedhiteraaniyaanka, agagaarka halka wakhti xaadirakan kutaalo magaalada Tuunis.

Dhaqaalaha – waxay ahayd magaalo ganacsi oo ay asalkeedii aas aaseen (dhiseen) ganacsato badda ka ganacsan jirtay oo la’odhan jiray Foonashiyaan (Phoenicians). Maadaama ay dawladii kaarteejka dhaqaalaha hodan ku ahayd oo

ay ahayd qaran awood adag oo siyaasadeed leh darteed ayuu tartan iyo dagaal uga dhexeeyay Imbiraadooriyadii awooda badnayd ee Room.

Hoos u dhicii iyo Dhicitaankii Kaarteej (carthage) – Waxaa Boqortooyadii Room iyo Kaarteej dhexmaray dagaalo loo yaqaano dagaaladii buunik (Punic wars). Arrinta ugu weyn ee dagaaladaas ka dambaysay waxay ahayd gacan ku haynta iyo u saraynta ganacsigii Meedhitiraaniyaanka. Hogaamiyihii awooda badnaa ee Kaarteejka ee la odhan jiray Hanibal ayaa intuu ka gudbay buuraha Albis uu dagaal dhex maray Roomaniyiintii. Si kastaba ha ahaatee, Kaarteejkii waxaa muddo kadib baabi'yeey baqortooyadii Room.

Layliska 1.7



- 1 Kaalin intee la'eg ayuu wabiga Niil ka qeyb qaatay nolosha Masaarida?
- 2 Sawir saddex-xagal kadibna u qeybi qaab dhis meedka bulshada ee herarka (darajooinka) kala duwan leh ee Masaarida.
- 3 Sidee ayuu ahaa maamulkii Masaarida ee xilgii faraaciyyinta?
- 4 Qoraal nooceee ah ayuu ahaa qoraalkii Heerooglaafiyadda?
- 5 Maxay Masaaridii hore dhaxalsiyyeen jiilalka hadda jira?
- 6 Maxay ahaayeen qodobada sababay hoos u dhicii iyo dhicitaankii ilbaxnimadii hore ee Masar?
- 7 Ayey ahaayeen kuwii dhisay (aasaasay) ilbaxnimadii Kaarteej?
- 8 Maxay dhaqaalaha ka heli jireen Kaarteejiyiintii?
- 9 Sidee ayuu ku yimid hoos u dhicii iyo bur burkii Kaarteej?

1.5 QARAMADII GUUMEYSIGA KA HOR JIRAY EE AFRIKA

Marka uu dhamaado casharkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- ❑ baadhaan gumeysiga ka hor dhaqaalihii aasaaska u ahaa qaramadii Maali iyo Funji
- ❑ muujiyaan fahamka aqoon cilmyeedkii ay ka gaadheen xagga dhismaha magaalo qaramadii Simbaabwi guumaysiga kahor.

Erayada Furaha u ah Cashirka

- Kunka Sanno
- Dadyawgii hore

→ Reer Yurubkii soo degay

Simbabwe guumeysiga ka hor

Inta ayna guumaystayaashu iman Simbabwe waxay lahayd ilbaxnimo iyo qaranimo, taasoo bilaabantay ku dhawaad kunkii sano ee ugu horeeyay. Dadkii aasaasay ilbaxnimadan loo yaqaano Simbaabwidii weynayd waxay ahaayeen dadkii Shoona. Magaca Simbaabwi laf'ahaantiisa wuxuu macnihiisu yahay dhismayaashii dhagaxa ahaa. Waxaa aasaaska wax qabad ee dhaqaalahooda ahaa baayacmushtarka iyo dhaqashada lo'da. Markii dambe hoos u dhicci iyo xaalufkii kuyimid deegaanka ayaa dad badan ku qasbay in ay iskaga haajiraan Simbabwe. Arrintan waxay dhacday badhtamihii qarnigii 15^{aad}. Kadibna waxaa badalay qaran cusub oo la yidhaahdo Miweene Mutaabaa, kaasoo markii dambe ay qabsadeen Boorjuqiisku.

Hawl-galka 1.9

Sawir khariirada Afrika oo tilmaan (muuji) halkii ay kutaalay Simbaabwi guumaysiga ka hor? Kadib falanqeeya boqortooyoyinkii ilbaxnimooyinkii hore iyo guulihii ay gaadheen.

Maali Guumeysiga ka hor

Qaramadii ka jiray Galbeedka Afrika guumeysiga ka hor waxaa la isku odhan jiray boqortooyada Gaana, taasooy macnaheedu ahaa hogaamiye dagaal. Hogaamiyayaashii mali waxay lahaayeen ciwaanka ama horgalaha magac ee "Mansa". Boqorkii caanka ahaa ee Maali ee la odhan jiray Maansa Muusa (1312 - 1387) ayaa ahaa qofkii ugu horeeyay ee qaatay diinta Islaamka. Wuxuu aaday Maka 1324 tii oo uu ku soo xajiyay. Hoos u dhicci Maali kadib, dadkii reer Songahaay ayaa Songahay ka Sameeyay qaran. Magaaloooyinkeeda ugu waa weyn waxay ahaayeen Gaa'o iyo Timbuktu taasoo markii dambe noqotay xarumaha lagu barto diinta Islaamka. Wuxuu ogsoonaataan in ganacsigii saxaraha ee awrta lagu safrijiray uu sabab u ahaa fiditaanka diinta Islaamka ee Galbeedka Afrika. Kadib, Songahaay waxay colaad (cadawtinimo) ka dhex dhalatay qarankii Moroko.

Moroko ayaa 1591 kii weerar ku soo qaaday Songahay, kaaso ugu dambayntii dumiyay boqortooyadii Sonqahaay, ganacsigii saxarahana ay kula wareegtay Moroko.

Hawl-galka 1.10



Isuqeybiya kooxo, kadibna falanfeeya qaar ka mid ah guulihii ay gaadhay Maali gumneysiga ka hor.


Magaalo qaramooyinkaii Xawsa

Magaalo qaramooyinkii xawsa waxay ahaayeen kuwo uu darbi ku wareegsan yahay (dayran) sida Harar oo kale. Waxaa loo dayray si uu uga difaaco weerarada (duulaanka) dadka reer miyiga ah ee dhaca hantida dadka. Magaalo qaramooyinkan waxay ahaayeen Kano, Gobir, Samfara iyo kuwo kale. Mid kastaaba waxay lahayd siyaasad madax banana oo u gaar ah.

Funji Guumeysiga ka hor

Boqortooyada Funji waxay so if-baxday bilowgii qarnigii 16aad oo ay ka aas aasantay barta ay ku kulmaan Niilka Biluuga iyo Niilka Cad. Waxay caasimada boqortooyadu ahayd magaalada seenaar ilaa 1504tii.

Waxay boqortooyada Funji horaantii xukumaysay dad isugu jira Carab iyo kuwo asal ahaan Suudaan ka soo jeeda. Muddo yar kadib waxay qaateen diinta Islaamka. Boqortooyada Funj awoodeedu waxay halka ugu saraysa gaadhay qarnigii 17aad oo ay gacanta ku dhigeen dhamaan gobalka laga bilaabo Badda Cas ilaa Kordhufaan. Balse waxaa Baqortooyadii Funji ee seenaar xukunkii laga riday 1820kii kadib markay soo weerareen OTOMAANKII uu hogaaminayay Maxamad Cali.



Jaabtuska 1.19: Qaramadii Afrika ee xilligii guumaysiga iyo guumaysiga ka dib jiray



Hawl-galka 1.11

Sameeya kooxo, kadibna ka shaqeeya su'aalahan soo socda.

Muxuu aha aasaaska dhaqaale ee qaramadii Afrika ka jiray gumeysiga ka hor ee Gaana, Maali, Soongahay, magaalo qaramooyinkii Xawsaha, iyo Simbaabwi?

1.6 GANACSIGII MASAAFADA DHEERAAD OO AHAA QODOB ISKU XIDHA DADKA ITOOBIYA

Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- ❑ Fahmaan doorka uu ganacsiga masaafada dheeraad ka qaataay (ka ciyaaray) dhanka isku-xidhka dadka Itoobiya.
- ❑ Aqoonsadaan jiritaankii ganacsiyada kale ay ka jireen Afrika.
- ❑ Aqoonsadaan asaladoodii.

Erayada Furaha u ah Cashirka



- | | |
|--------------------------------|-----------------|
| ❑ Wax qabadka Heerka saddexaad | ❑ Lacag |
| ❑ Baddeecadaha | ❑ Wadiiqooyinka |

Ganacsigii masaafa dheeraad wuxuu iskuxidhay bulshooyin kala duwan oo ku hawlanaa waxaqabadyo dhaqaale oo kala gadisan. Ganaasigu waa qodob ama laan isukeenta ama midaysa dad kala duwan.

Suuqaqa wax loo iib geeyo laf'ahaantoodu waa meel dhab ahaantii lugu soo bandhigo wax qabadyo dhaqaaloo kala gadisan oo ay dadku isku waydaarsadaan wararka cusub iyo khibradahooda.

Ganacsigii Masaafada Dheeraad ee Itoobiya

Guud ahaan nuxurkii ganacsiga:

- Ganacsigu waa wax qabadka heerka saddexaad kaasoo dadku danahooda darteed ay isugu waydaarsadaan (ugu kala badashaan) badeecooyinka ama alaabta iyo khidmada (lacagta)
- Waa hab wax iswaydaarsi kaasoo ka soo bilowday isku badalasho badeeco ama alaab, gaadhayna heerka isticmaalka lacagta.
- Ganacsigu waxaa kale oo uu door muhiim ah ka ciyaaray isu keenida ama midaynta dadka kala duwan.

- Nabadii iyo baahidii dadka ee koradhay darteed ayuu ganacsigii masaafada dheera dib ugu soo noolaaday Itoobiya qarnigii 19aad.

Ayay ahaayeen ganacsatadii ganacsigii masaafada dheeraa?

Dhamaan ganacsatadii xiligaan intooda badan waxay ahaayeen Muslimiin waxaana sababay:

- Badeecooyinka ganacsatadu ay Bariga dhexe ka soo dajin jireen waxay ahaayeen kuwo aan laga heli jirin dhulka beeralaydu kunooshahay.
- Ganacsatada wax dhoofsata (dhoofisa) ee Bariga dhexe waxay ahaayeen dhamaanatood Muslimiin oo xidhiidh wanaagsan ayay samaysteen.

Maxay ahaayeen badeecoyinkii ganacsiga?

- Waxyabaha la dhoofin jirey xiligaas waxay intooda badan ahaayeen waxsoosaarka beeraha, sida saamaha iyo hargaha, fooxa, bunka, xabagta, iwm. Waxaa kale oo la dhoofin jirey dahabka iyo adoomaha. Waxyabahaas la dhoofnjiray waxaa badanaa laga soo qaadi jirey Koonfurta Galbeed ee Itoobiya sida Kafa.
- Alaabaha la soo dajiyo waxay ahaayeen alaabta warshadeysan sida dharka, qalabka qurxinta sida kuulaha, seefaha iyo wixii lamid ah.

Hawl-galka 1.12



Isla falanqeeya noocii ka ganacsiga dadka, idinkoo xooga saaraya sidii loo soo arurin jirey, loo rari jirey iyo sidii loo iibin jiray dadka xiligaas Itoobiya dhexdeeda iyo Galbeedka Afrika.

Wadooyinkii Ganacsigii masaafada dheeraa

Wadooyinkii ganacsiga waxay ku kulmi jireen Boonga, oo ka tirsan Kafa oo kutaala Koonfurta Galbeed ee Itoobiya, taasoo hodan ku aheyd kheyraadyo badan. Waxaa kale oo ay wadooyinku ku kulmi jireen Gondhar iyo Harar oo kadibna ay si toos ah u tagayeen dakada Massawa ee Waqooyi-Bari iyo Saylac iyo Barbara oo ku yaalay Koonfur-Bari.



Jaantuska 1.20: Ganacsigii masaafada dheer ee Itoobiya qarnigii 19^{aad}

Kaalintii (Doorarkii) “Negaadraaska” (Horumuud ka) ganacsiga masaafada dheer

“Negaadraaska” (madaxa geediga ama socdaalka) wuxuu ahaa hogamiyaha geediga iyo socdaalka ganacsatada. Waajibaadyada Negaadraaska saarnaa waxaa ka mid ahaa kuwan soo socda:

- 1 Isku dubaridka iyo u diyaar gareynta ganacsatada socdaalka dheer.
- 2 Qorsheynta maalinta iyo wakhtiga la baxayo ama socdaalku bilaabmayo.
- 3 Waxaa kale oo uu masuul ka ahaa xulashada goobaha nasasho marka la daalo.
- 4 Wuxuu xallin jiray is afgaran-waaga iyo khilaafaadka dhixmara ganacsatada.
- 5 Masuuliyadda bixinta canshuurta goobaha lagu baadhi jiray agabyada.

Sidee bay wax iibinta iyo wax gadashadu u dhici jireen?

Waxaa jiray waxyaabo ay sharci ahaan iyo dhaqan ahaanba isku af-garteen in ay wax ku kala badashaan. Waxyaabaha ay dhaqan ahaan wax ku kala badalanayeen wuxuu ahaa milixdii la odhan jiray Amole ee laga soo guri jiray deegaanka Canfarta. Waxaa kale oo in wax lagu kala badasho loo isticmaali jiray dharka oo

lagu Cabbiri jiray gacanta. Qadaadiicdii Maariya Tareesa ee lagu soo sameeyay Awstiriya ee ay ganacsatadu soo galleyen ayaa aheyd waxa ugu qimaha badan ee loo isticmaalo wax ku kala iibsigii ganacsiga masaaafada dheer. Qadaadiicdan ayaa aheyd mid birahaanteeda qiimo ku fadhida, maadamo laga sameeyay (laga tumay) macdanta qalinka oo khaas ah.

Natijjooyinkii ka soo baxay Ganacsigii masaaafada dheeraa.

- 1 Wuxuu isku xidhay dad ay dhaqamadoodu kala duwanyhiin, oo isqadarin (xushmad) iyo dulqaad ka dhxeeyay.
- 2 Waxaa canshuurtii laga aruurinayay ganacsatada ku taajiray (hantiyaystay) hogaamiyayaashii degmooyinka, wuxuuna dakhligaas soo galayey adkeeyay awoodoodii siyaasadeed.
- 3 Baqortooyooyin dhul-goosi ah ayaa ka dhex samaysmay qaramadii Gibee Oromo, kadib markuu hab dhaqankii Gadha uu si tartiib tartiib ah u baaba'ay.
- 4 Dad badan ayaa ku hawlanaa ganacsiga oo uu u ahaa wax-qabadkooda dhaqaale ee ay ku tiirsan yihiin.

Layliska 1.8



- 1 Muxuu kaga duwanaa ganacsiga masaaafada dheer ganacsiyada kale?
- 2 Sheeg doorarkii Negaadraaska (taliyaha socdaalka ama jid mariyaha)?
- 3 Maxay ahaayeen natijjooyinkii ka soo baxay Ganacsigii masaaafada dheeraa?
- 4 Magaaloooyinkee ayaa ku xidhnaa wadooyinka ganacsiga masaaafada dheer?
- 5 Sideebay maamuladii Gibee ku samaysmeen?
- 6 Sideebay diinta Islaamku maamuladii Gibe ku soo gaadhay?
- 7 Sideebay Maamuladii Gibee ay ku soo af-jarmeen?
- 8 Sidee bay u baa ba'een qaramadii Gibee?

1.7 DADWEYNAHA QAARADDA AFRIKA

Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- aqoonsadaan baahsanida dadka Afrika.
- tilmaamaan qodobada saameeya baahsanida dadka iyo dagaamada Afika.
- sheegaan meelaha dadku ku badan yahay iyo meelaha dadku ku yaryahay ee Afrika;

- sharaxaan noocyada habnolaleedka caanka ah ee laga helo Afrika
- la xidhiidhiyaan qodobadan dagaameynta dadka Afrika iyo inay tilmaamaan dagaamada khariirada dusheeda.
- la xidhiidhiyaan kuwaan xagga cimilada iyo dhirta.
- Isla falanqeeyaaan sababaha keena magaalada dagaankeeda.

Erayada Furaha u ah Cashirka



- | | |
|---|---|
| <input type="checkbox"/> Cufnaanta dadka | <input type="checkbox"/> Habnololeed |
| <input type="checkbox"/> Cadaadiska dadka | <input type="checkbox"/> Saamiga dhalashada |
| <input type="checkbox"/> Saamiga korodhka dadka | <input type="checkbox"/> Saamiga dhimashada |
| <input type="checkbox"/> Magaaloobid | |

Afrika waa qaaradda labaad ee ugu dadka badan ee soo raacdha Aasiya. Wakhti xaadirkan tirada dadweynaha Afrika waa ku dhawaad 800 oo milyan. Waxaa ku nool 12% oo dadweynaha aduunka ah. Koradhka dadwaynaha Afrika waa mid si dhakhsa ah u kordhaya. Saamiga koradh saandeedka dadweynaha Afrika waa kudhawaad 24%. Waana saamiga ugu sareeya uguna dhakhsa koradhka badan Aduunka. Dhakhsa u koradhka tirada dadka ama dadweynaha Afrika waxaa sabab u ah dhalmada badan (saamiga sare ee dhalmada) iyo hoos u dhicidda saamiga dhimasho (dhimashadoo yaraatay). Waxaa hoos u dhaca saamiga dhimashada keeney horumarka dhanka cunadda ama raashinka iyo helitaanka adeega caafimaadka.

Bartilmaameed

- Xadiga dhalashadu; waa tirada nool ee dhalata sanad kasta oo loo qeybiyey (la hoos dhigey) 1000 qof (shakhsi)*
- Xadiga dhimashadu; waa tirada dhimata sanad kasta oo loo qaybiyey 1000 qof (shakhsi).*

Waxaa dadweynaha Afrika ku badan qeybta dhallinta yar ee ay da'doodu ka hooseyso 15 sano. Caruurta da'doodu ka hoosayso 15 ka sano ayaa ku dhawaad 45% dadweynaha qaaradda ah. Tanina waxay ina tusinaysaa in dadweynaha Afrika ku dhawaad kala badh yhiin kuwo aan wax soosaar ama wax-qabad dhaqaale laheyn oo ah yhiin ku tiirsanayaal.

1.7.1 Baahsanida dadka iyo dagaameynta Afrika

Xagee bay dadku jecel yihiiin in ay degaan?

Waxay dadku jecel yihiiin oo ay degaan kolba meesha ay ka heli karaan baahidooda aasaasiga ah ee biyaha iyo cunada. Marka ay aadamuhu helaan baahidooda aasaasiga ah waxay u baahan yihiiin oo u soo raaca baahidooda aasaasiga ah baahida ay u qabaan in ay helaan dhar (huga) iyo hoyga oo iyana lagama maarmaan ah.

Hawl-galka 1.13



Daraaso Sawir ah

Daraasaad ama baaris ku samee sawiradan soo socda ee ku kala yaala

- b** lama degaanka saxaaraaha
- t** dhulka jooga sare ee kiiniya

Kadibna koox ahaan isula falanqeeyaa oo kajawaaba su'aalahan soosocda.



Saxaaraaha Liibiya



Dhulka sare ee Itoobia

Jaantuska 1.21: dagaameynta dadweynaha.

- b** Meeshee ku haboon in lagu noolaado? Waayo?
- t** Meeshee ayey kulatahay dadku inay ku yaryihii (ku tira yar yihii)? Waayo?
- j** Labada meelood teebaad u maleyneysaa in ay ku wanaagsantay beer qodaalka? Waayo?

Waxaa jira Afrika xaalado dhawrah oo dabiici iyo dad sameeba leh kuwaas oo go'aanadag ku leh dadku in ay siraaxa leh ugu noolaan karaan meel iyo in kale. Waana qdobadaas waxa sababey baahsanida iyo degaameynta d'adka qaaradda in ay meelibaa meesha kale aad uga duwanaato.

Dadka Afrika saddex dalool labo (၃၃) waxay ku nool yihiiin marka dhulka qaaradda loo qeybiyo shan meelood hal meel (၁/၅) oo kaliya. Waxay taasi ka dhigan tahay inta badan dadka Afrika in ay ku noolyihiiin qeyb yar oo dhulka qaarada ah. sababtuna waxay tahay dhulka qaaradda Afrika oo ay intiisa badan hadheeyeen Lamadegaanka iyo Keymaha kulaalaha.

Buuraha, taagaga, bananka, wabiyada iyo harooyinka ayaa ah muuqaalada dhulka Afrika ugu waa weyn

Taagaga (dhulka jooga sare) ayaa ah dhulka ugu badan uguna balaadhan Afrika, kaasoo ku yaala meelaha joogoodu sareeyo. Waxaa iyana jira banaano sida banaanada xeebaha, wabiyada iyo banaanada lamadegaanka. Banaanadu waa dhul balaadhan oo fidsan kaasoo joog hoose leh.

1.7.2 Xaaladaha Saameeynta ku leh baahsanida iyo dagaameynta dadka Afrika

Baahsanida iyo dagaameynta dadka Afrika waa natijo ay keeneen xaalado ama qodobo dabiici ah iyo kuwa dadka la xidhiidha (dad samee ah). Waxaa jira meelo dadku ku badan yahay (ku xoonsan yahay) oo ay xaaladaha dabiiciga ah iyo kuwa dad sameeguba yihiiin kuwo lagu noolaan karo oo soo jiidanaya dadka. Dhanka kale, waxaa jira meelo dadku aad ugu yar yahay ama dad uuna ku nooleyn oo ay xaaladaha dabiici iyo kuwa dad same yihiiin kuwo ah oo aan soojiidasho laheyn.

Qdobada ugu waa weyn ee dabiici iyo dad same ah ee saameynta ku leh baahsanaanta iyo dagaameynta dadka Afrika waa kuwan soo socda;

1 Xaaladaha dabiiciga ah:

- Nooca cimilada*
- Kheyraadka dabiiciga ah sida:*
 - Biyaha*
 - Caradda Nafaqaysan*
 - Dhirta dabiiciga ah*
 - Macdanta*

2 Qdobada bani'aadanka la xidhidha (qdobada dad sameega ah)

- Nooca dhaqdhaqaaq ee dhaqaale*
- Waxqabad horumarineed sida:*

- ❖ Warshadaha
- ❖ Isgaadhsinta
- ❖ Qodashada macdanta.
- Socdaalada ama guurguuritaanka ay sababaan dagaalada, ganacsiga, iyo wixii la mid ah.

Hawl-galka 1.14



Khariirad darsid



Jaantuska 1.22: Khariirad muuqaaleedka Afrika

Daraasaad ku samee khariiradan Afrika kadibna ka jawaab su'aalaha soo socda.

- b Tilmaan ama sheeg halka ay ku yaalaan muuqaalada soo socda.
 - Dhulka jooga sare ee Itoobia iyo Bariga Afrika
 - Banaanada qallalan ee lamadegaanka ah
 - Dooxada wabiga Niil iyo dhulka uu ku faafo
 - Banaanada xeebaha Galbeedka Afrika
 - Banaanada xeebaha Waqooyiga Afrika
 - Jiida webiga Koongo
- t Adigoo adeegsanaya khariirada cufnaanta dadka, caddee muuqaalada khariirada korkeeda ee u taagan meelaha ay dadku ku badan yihiin iyo meelaha uu dadku ku yaryahay.

Sideynu horay ugu soo sheegnay cufnaanta tirada dadka Afrika ma aha mid isku mid ah ama siman. Meelaha qaarkood dadku way ku badan yihiin, halka meelaha kalena dadku ay ku filiqsanyihiin.

Cufnaanta dadweynaha ama cufnaanta tirada dadka waa cabbir ina tusiya in dadku ku badan yahay ama ku xoonsan yahay meel iyo in uu ku kala filiqsanyihiin.

Waxaana lagu qeexaa in ay tahay celceliska tirada dadka ku nool halkii isku wareeg ee kiiloomitir (1 km^2). Marka aan rabno in aan xisaabino cufnaanta dadku nool deegaan, waxaynu isku qeybineynaa tirada dadweynaha ku nool deegaanka iyo wadarta baaxada dhulkiisa.

$$\text{Cufnaanta dadweynaha} = \frac{\text{Wadarta tiradadad weynaha}}{\text{Wadarta baaxada dhuleed}}$$

Meesha dadkeedu cufanyahay waa meesha ay dadku aad ka ugu badan yihiin. Waa meeshay 1 km^2 (kiiloomitir ee laba jibaaran) ku nool yihiin tira dad oo aad u badan.

Dhanka kale, meesha dadku filiqsan yahay waa meesha ay tirada yar ee dadka ahi ku nool yihiin halkii kiiloomitir ee laba jibaaran. Waa meel ay cufnaanta tirada dadku aad u hooseyso.

Hawl-galka 1.15



Ka jawaab su'aalaha adigoo ka tixraacaya shaxda soo socota, taasoo ina tusaysa baahsanaanta dadka ee deegaamada Afrika.

Deegaanka	Baaxada dhulka (Km ²)	Tirada dadka (milyan)
Bariga Afrika	6,354,000	246
Waqooyiga Afrika	8,257,743	173
Galbeedka Afrika	6,147,903	235
Badhtamaha Afrika	6,639,000	96
Koonfurta Afrika	2,674,000	50

- 1 Xisaabi cufnaanta dadka ee deegaan kasta?
- 2 Deegaankee ayaa ugu cufan (ayuu dadksiisu ugu cufanyahay)?
- 3 Deegaankee ayaa ugu dad filiqsan?

Afrika meelaha dadku aadka ugu cufan yahay waa meelaha leh:

- *Carra nafaqaysan oo ay fududahay qoditaan keeda.*
- *Biyaha ku filan cabitaanka iyo waraabka.*
- *Cimiladeedu dhexdhexaadka tahay ee ay ku haboontahay bixidda dalaga.*
- *Marin baddeedka leh.*
- *Macdan badan oo la taaban karo leh.*




Hawl-galka 1.16

Khariirad darsid

Adigoo ka tixraacaya khariirada soo socota ee cufnaanta tirada dadka Afrika ka jawaab su'aalaha soo socda.

- 1 Waa meelahee Afrika dadku aadka ugu badanyihiin iyo meelaha ay ku tirada yaryihiin? Maxaa sababey in ay tirada dadku ku badnaato ama ay ku cufnaadaan taagaga sare ee Itoobiya iyo Bariga Afrika?
- 2 Waa maxay sababaha ay cufnaanta dadka ay ugu hooseyo Lamadagaanka saxaraha?
- 3 Maxay dadku ugu badan yihii hareeraha wabiga Niil?



Jaantuska 1.23: Khariirada cufnaanta dadka Afrika


Meelaha Afrika ka midka ah ee ay dadku ku cufanyihiin ama ay cufnaantooda tirada dadka sarayso waa:

- *Jiidaha ama dhulka daafaha wabiyada iyo harooyinka ah*
- *Xeebaha*
- *Meelaha macdanta laga soo saaro (qado)*

Gaar ahaan, meelahan soo socda ayaa ah meelaha dadku ugu cufanyahay (ugu tira badanyahay) Afrika.

- b. Jiidaha wabiga Niil iyo dhulka uu ku faafo
- t. Dulaha Sare ee Itoobiya iyo Bariga Afrika
- j. Xeebaha iyo dhulalka sare ee Galbeedka Afrika
- x. Banaanada xeebta Maqrab ee Waqooyiga Afrika
- kh. Qaybta ugu cidhifaysa qeybta Koonfur Bari ee Koonfurta Afrika.

Jiidaha wabiga Niil iyo dhulka uu ku faafo



Jaantuska 1.24: Wabiga Niil

Niil:- waa wabiga ugu dheer aduunka, wuxuuna u qulqulaa dhanka waqooyi 671 km. Niilka Cad wuxuu ka soo bilowdaa Harada Fiktooriya, halka Niilka Buluuga ah (Abbaay) uu ka bilowdo Itoobiya. Waxay Niilka cad iyo Niilka buluuga ah ku kulmaan Khartuum (Suudaan).

Wabiga Niil wuxuu maraa dhulka lama dagaanka ah ee Suudaan iyo Masar inta uusan ku dhamaanin badda Meedhiteraaniyaanka. Wabiga Niil gaar ahaan Niilka Buluuga ah wuxuu sii xambaaraa carro badaan oo uu geeyaa masar. Waana mida sababtay Masaaridii hore inay ugu yeedhaan ama ay ku magacaabaan dhulkooda “dhulkii madoobaa”. Dad badan oo Masaari iyo Suudaaniyiin ah ayaa ku nool

jiidaha dooxada wabiga Niil oo ah dhul ku wanaagsan beeraha (qodashada beeraha). Waa dhul leh carro nafaqaysan, falitaankiisuna fududyahay, oo waliba leh biyo badan oo kufilan waraabka iyo cabbitaanka. Wuxuuna anfacay wabigan masaarida oo uu dhulkoodu 97% yahay lamadagaan.

Biyo xidheenka Aswaan ee Masar waxaa loo isticmaalaa awood koranto iyo waraabka. Guud ahaan jiida wabiga Niil ayaa ah meesha ugu dadka cufan Afrika.

Su aalo:

- 1 Maxay kula tahay in ay sababtay Masaarida intooda badan in ay ku noolaadaan wabiga Niil hareerihiisa iyo halka uu ku dhamaado?
- 2 Maxay Masaaridii hore ugu bixiyeen dhulkooda “dhulkii madoobaa”?
- 3 Hadii uusan jirin wabiga Niil miyey macquul noqon Laheyd in ay midho beertaan oo uu u baxo oo si raaxa leh loogu noolaado? Waayo?

Sideynu horeyba ugu soo sheegney, waxaa jira meelo kale oo Afrika ka mid ah oo ay cufnaantooda tirada dadka aad u sareyso. Marka aynu eegno qdobada iyana sababey in ay dadku aad ugu badnaadaan meelahaas.

T *Dhulaha sare ee Itoobiya iyo Bariga Afrika*

Dulaha Sare ee Itoobiya iyo Bariga Afrika ee ku yaala inta u dhaxaysa labada kulaale ayaa waxay yihin kuwo leh:

- *Roob badan*
- *Cimilo ama heerkul dhexdhexaad ah oo kuleyl badan iyo qabaw badantoona laheyn.*
- *Carra nafaqaysan oo Casaan ah oo uu asalkeedu yahay dhagaxa dab-dhulka (Foolkaanaha).*

Dhamaan xaaladahaas dabiiiciga ah ee aan soo sheegney dartood ayey meelaha taaga sare ee Afrika u noqdeen kuwa ku haboon aadna ugu wanaagsan wax soo saarka midhaha. Sidaa awgeed ayey dad tira badan ugu nool yihin deegaamadan Afrika ka midka ah.

J *Xeebaha iyo dhulalka sare ee Galbeedka Afrika*

Dhulkan waxaa ku nool dad tira badan oo dhul ay cufnaanta tirada dadku ay sareyso marka labarbar dhigo meelaha kale. Waxaa sababtay laba xaaladood, kuwaas oo kala ah:

- Waxay leeyihiin cimilo qoyan, oo roob sifiican ugu filan beer qodaalka iyo bixitaanka geedaha waxtarka leh.
- Waxay marin u leeyihiin badda, oo marinkaas ayey ka helaan dhaqaale badan, una fududeeya ganacsiga ay la leeyihiin Aduunka intiisa kale.

X Banaanada xeebta Maqrib ee Waqooyiga Afrika

- Waxay leeyihiin cimilada meedhiteraaniyaanka oo ay Xaagaagana kuleyl tahay, Jiilaalkana qabaw roobleh tahay.
- Waxay Leeyihiin marin badeed, u fududaynaya dadka in ay xidhiidh la yeeshaan dunida inteeda kale.

Kh Qaybta ugu cidhifaysa Qeybta Koonfur-Bari ee Koonfurta Afrika

- Waxay leedahay cimilo wacan oo leh roob badan iyo heerkul dhexe iyo dhul ku fiican beer qodaalka.

Meelaha Afrika ee ay dadku ku filiqsanyihiin waa meelaha leh:

- Xaalaada cimilo ee aan wanaagsaneyn sida meelaha lama dagaanka ama Lama dagaan xigeen ka ah.
- Keymaha cufan ee dhirtu aadka ugu badantahay
- Carrada aan wanaagsaneyn
- Cudurada qaniinku sababo.
- Cudurada ay sababaan cayayaanka sida: nooca Daqsiga ka mid ah ee loo yaqaano dhuuga.

Khaas ahaan meelaha Afrika ee ay cufnaanta tirada dadku hooseyso ama ay dadku ku filiqsanyihiin marka labarbar dhigo meelaha kale waxaa ka mid ah meelahan soosocda:

- i Dhulka aadka oomanaha u ah ee Lamadagaanada Saxaarah, Kalahaari iyo Naamiibiya.
- ii Keymolayda rooboon ee kulaalaha ee kuyaala bartamaha Afrika.
- iii Dhul cawseedka Safaanaha.

Sheeko Gaaban

Nolasha Lamadagaanka Afrika

Deegaamada lama dagaanka ah ee Afrika waa meelaha aan helin roob ku filan oo midhihu ku baxaan, mana laha wax soo saarka beeraha. Lama dagaanadan waxay ku yaalaan Waqooyiga iyo Koonfurtaba, waxayna u dhixeyyaan dhul cawseed ka kulaalaha ee Safaana iyo deegaamada cimilada meedhiteraaniyaanka leh.

Dhanka waqooyiga qaarada waxaa ku yaala lama dagaanka Saxaraha oo ah mid is heysta Bari ilaa iyo Galbeed. Dhinaca koonfurta qaaradana waxaa ku yaala lama dagaanka kalahaari iyo lama dagaanka Naamiib. Heer kulka deegaamadan waa mid aad u sareeya, marmarka qaarkood xilingga Xagaaga wuxuu gaadhaa ilaa iyo 50°C.

Ilaa iyo wakhti xaadirkan ma jiraan wax isbadal ah oo iskabadalay habka dadka lamadagaanka Afrika ay u isticmaalaan dhulka lamadagaanka ah ee qaaradda. Ilaa hadda, dadka reer guuraga ah kolba meel ayey u guur guuraan si ay cows iyo biyo ugu helaan xoolahooda.

Geela ayaa ah xayawaanka laga isticmaalo lamadagaanka cuno iyo gaadiid ahaanba. Dadka qaarkii wuxuu kunooliyahay meelo biyo leh oo lamadagaanka ka mid ah, waxayna u isticmaalaan biyahaas waraabka beeraha oo ay dalag ka goostaan.

Hadaba maadaama ay nolasha Lamadagaanku adagtahay dad aad u tirayar ayaa ku nool meelaha lamadagaanada ah ee Afrika marka labar bar dhigo meelaha kale. Wuxuu qoysaale ugu soo qaadan karnaa dhulka banaanka ah ee Canfarta Itoobiya.

Su'aalo:

- 1 Maxay kula tahay in ay sababtay dad aad u yar oo Afrikaan ah inay ku noolaadaan meelaha lama dagaanada ah?
- 2 Maxay dadka meelaha lamadagaanada ah ee Afrika ku nool intooda badan u yihiin reer guuraa?
- 3 Maxay dadka meelaha lama dagaanada ah ee laga helo laasaska biyaha ay si rasmi ah u daganaadaan?

◆ Lamadagaanada Afrika

Lamadagaanadan Afrika waxaa kunool dad aad u yar, waxaana u sabab ah nolasha adag iyo xaalada cimilo ee aan habooneyn ee kjirta meelaha Lamadagaanka ah ee Afrika

Dhulka lamadagaanka ah ee Afrika waa dhul uu heerkulka kulaylku aad u sareeyo. Meela badan oo ka mid ah lamadagaanadan ayaana laheyn biyo joogta ah iyo kuwo kufilan baahida dadka toona.

◆ Keymaleyda Rooban ee Kulaalaha

Waa meelaha Afrika ka midka ah ee ay ku nool yihiin dad aad u yar oo si kala durugsan ama kala fog u degan. Waxaana sababay:

- *Dhirta xidhka ah ee keymahan ayaa ah mid aanan ladhexmarikarin, degaan balaadhana kasuurtoobeynин.*
- *Cimilada roobka badan ayaa ka maydhay (ku keentay in ay ka milanto) carrada macdantii.*
- *Jiritaanka cudurada qaaniinka cayayaanku keeno ayaa iyana ka mid ah sababaha ay dadku oogu yaryihiinee ayna u dagin.*

Bartilmaameed

Lamadagaanada iyo keymaha balaadhan ee Afrika cufnaantooda tirada dadka waa mid ka hooseysa (kayar) halshaqsi halkii kiiloomitir ee iskuwareegba $\left(\frac{1 \text{ qaf}}{1 \text{ km}^2}\right)$. Sikastaba ha ahaatee, waxay deganyihiin dhul aad u balaadhan oo ku dhaw kalabadh dhulka guud ee qaarada Afrika.

◆ Dhul Cowseedka Safaanaha ee kulaalaha

Dhulkaan wuxuu leeyahay caws dhaadheer iyo geeda kala durugsan oo tira yar. Waxaana ka da'a roob xilliyeed (roob xilli uu da'a leh).

Cufnaanta tirada dadka ee dhul cowseedka safaanaha waa uu ka sareeyaa labada meelood ee aan horey uga soo hadalney ee kala ah lamadagaanka iyo dhulka keymaha roobka badan ee kulaalaha. Sababaha ay ooga dad bad atay waa:


- *Dhul wax lagubeeran karo*
- *Taariikh ahaan, waxuu ahaa dhulkani meel mudo hore la degenaan jiray oo lehna magaalooyin qadiimiya kuna tiirsanaan jiray ganacsiga iyo waxqabadyo kale.*

Hawl-galka 1.17




Khariirad darsid

Adigoo ka tixraacaya khariiradan cimilada iyo dhirta Afrika, ka jawaab su'aalaha soo socde.



Jaantuska 1.25: Cimilada deegaanada Afrika



Jaantuska 1.26: dhirta deegaa naga Afrika

b Sheeg noocayada cimilo iyo dhir ee laga helo meelahan Afrika ee soo socda ee cufnaantooda tirada dadka ay sarayo.

- 1 Dhulka joogiisu sareeyo ee Itoobiya.
- 2 Xeebaha waqooyiga Afrika
- 3 Jiidaha dooxada wabiga Niil iyo dhulka uu ku faafo.
- 4 Banaanada xeebaha Galbeedka Afrika.

t Sheeg noocyada cimilo iyo dhir ee laga helo meelahan hoos ku qoran ee Afrika, meelahaas oo ah meelaha Afrika ay dadku ku yaryihii (filiqsanyihii).

- 1 Lamadagaanka Saxaraha
- 2 Keymaleyda rooban ee dhulka kulaalaha
- 3 Dhulka Safaanaha ee kulaalaha

Degitaanka Magaalooinka Afrika

Celcelis ahaan tirada dadka Afrikaanka ah ee ku nool meelaha magaalooinka ah waxaa lagu qiyaasaa 37%. Xaaladani waxay Afrika ka dhigaysaa qaarada ugu yar dhanka tirada dadka ku nool magaaloyinka. Dadka reer miyiga ah ee intay miyiga ka tagaan magaalooinka gala waxay intooda badan tagaan magaalo madaxyada oo ah magaalooinka ugu muhiimsan.

Sannadkii 1900 ma jirin wax magaalo la yidhaahda oo ay ku nool yihin Hal milyan oo qof, laakiin manta waxaa la helayaa ilaa 25 magaalo oo ay ku nool yihin dad ka badan Hal milyan oo qof. Meelaha magaalooabay waxa ka mid ah Qaahira iyo leegoos oo ay ku xeeran yihin dad ka badan 12 milyan iyo 17 milyan oo ah sida ay u kala horeeyaan.

Magaalowga qaaradda Afrika ee Aadka u dheeraynaya ayaa ah mid ay dawladuhu kala kulmeen dhibaatooyin badan, oo ay ka mid yihin hoy la'aan, biya la'aan, nadaafaddaro, shaqo la'aanta i.wm Magaaloooyin badan oo xarumo ah ayaa waxay ku yaalaan xeebaaha. Dawladihii reer Galbeedka ayaa xilgii guumaysiga waddamo badan oo Afrikaan ah ka dhisay wadooyin isku xidha xeebaha iyo meelaha hodanka ku ah khayraadka ay dhoofsanayeen.

Waxaa kale oo ay guumaystayaashii reer Yurub dalal badan oo Afrikaan ah ka dhiseen wadada xadiidka ah ee tareenka oo ku xidhnayd xeebaha. Sidaa daraadeed ayay dad badan oo Afrikaan ah u dageen hareeraha wadooyinka baabuurta iyo tareenka.



Hawl-galka 1.18

- 1 Wuxaan soo qaadataa tirada guud ee dadka kunool shan magaalo oo ka mid ah magaalooinka waa weyn ee ku yaala deegaanka Ismaamulka soomaalida. Imisa ayay ahay tirada dadka ku nool magaalooinkaas toban sano ka hor ?
- 2 Koradhka tirada dadka ee magaalooinkaas maxaa sabab u ah?

1.7.3 Hab-Nololeedka Afrika

Hab-nolaleedka dadyawga Afrika waa mid kala-duwan. Waxaa kala duwanaanshaha hab-nolaleedka afrika saldhig u ah oo lala xidhiidhiya kala duwanaan shaha cimilada, qab samayska oogada sare ee dhulka iyo khayraadka dabiiiciga ah (carrada, biyaha, dhirta, macdanta i.w.m).

Tusaale ahaan, beer-qodaalku kama suuragali karo meel kasta oo Afrika ka mid ah; sababtoo ah waxaa jira meela badan oo ayna xaalada Cimilo u saamaxaynin iyo meelo uu qaab samayska dhulkeedu ku haboonayn. Meelaha uu beer qodaalku ka suuragali karo xataa nooca midhaha aybeeranayaan waxaa saameyn ku leh Cimilada (roobka iyo heer-kulka) iyo qaab samayska dhulka.

Kaluumeyisiga iyo qodaalka macdanta iyaguna waxay ka jiraan Afrika meela kooban oo ay suuragal ka yihiin oo kaliya.

Kala duwanaanta hab-nolaleed Afrika waxay la xidhiidha xaaladaha soo socda:

- *Cimilada (roobka iyo heerkulka)*
- *Sameyska dhulka*
- *Kheyraadka dabiiiciga ah (carrada, biyaha, dhirta, macdanta)*
- *Horumarka Teknoolajiyadeed (farsamada casriga ah).*

Beeraha (xoola dhaqasho iyo Beer falasho)

Beeruhu waa waxqabad dhaqaale oo ka kooban beer falasho (qodasho) iyo xoola dhaqasho. Waa nooca hab nolaleed ee ugu isticmaalkiisu ugu badanyahay ee intooda badan dadka ku nool wadamada soo koriyee Afrikaanka ah ay wali ku tiirsanyihiin.

Bartilmaameed

Beeruhu (xoola dhaqasho iyo beera falasho) waa hab nolaleedka ugu muhiimsan Afrika. Waa aasaaska wax-qabadka dhaqaale iyo nolasha dadka wadamada Afrika. Sababtoo ah beeruhu waa:

- *Isha ugu weyn ee cunada dadka*
- *Isha ugu weyn ee alaabta caydhiin ee warshadaha*
- *Wax-qabadka dhaqaale ee ay ku hawlan yihiin in kabadan 60% oo ah dadka wax-tarka leh.*
- *Isha ugu balaadhan (weyn) ee alaabada la dhoofiyo.*

Dadka ku nool meelaha kala duwan ee Afrika waxay isticmaalaan hab beereed farabidan. Hab beereedka Afrika waxaa si balaadhan loogu qeybiyaa laba qeybood. Labadaasina waxay kala yihiin: *Beer falasho (qodasho)* iyo *Xoola dhaqasho*.

- *Beer falasho (qodasho) waa wax soo saarka midhaha.*
- *Xoola dhaqatadu waa waxqabadka barbaarinta ama korinta xoolaha.*

b *Beer falasho (Beer qodaal)*

Beer falashada ama wax soosaarka midhaha Afrika waxay Leedahay heerar kala

duwan oo hormarineed. Iyadoo laga duulayo heerkan horumarineed, ayaa beer falashada Afrika loo qeybiyya laba qeybood oo waa weyn. Kuwaas oo kala ah.

- ★ Beer falasho dhaqameed ah (quutul maalmeed ah).
- ★ Beer falasho casri ah (Ganacsiyeed).



Hawl-galka 1.19



Jaantuska 1.27: beer falashada (ama qodaalka) dhaqameedkaa ah



Jaantuska 1.28: beerqodashada casriga ah

Su'aalo:

- 1 Maxaad ka fahantay labada sawir?
- 2 Muxuu yahay faraqa u dhixeyya labada nooc ee beer qodasho (mida casriga ah iyo mida dhaqameedka ah)?
- 3 Midkeebaa kubadan Afrika?

1 Beer qodaal ka dhaqameedka ama nolol maalmeedka ah

Beer qodaalka quutul maal meed waa habnolaleed looga danleeyahay wax soo saarka beerta ama midhaha in la quuto (Lacuno) oo kaliya, balse aan la iibinin. In badan oo wadamada Afrika kamid ah ayuu beer qodaal koodu yahay quutul maalmeed (mid af iyo gacan u dhixeyya).

Beer qodaalka quutul maalmeedeed, dadku waxay beertaan oo kaliya midho ku fillan qoyskooda ama baahida tuuladooda. Hadii ay nasiib u yeeshaan in uu midho badan (fiican) oo iyaga ka soo hadhaya ugo'o, waxaa dhici kartaa in ay gadaan.

Beer qodaal quutul maalmeedka Afrika wuxuu leeyahay dabeecadahan soo socda.

- *Qalabyada iyo hababka beer qadaaleedba waa kuwo aad dib udhac u ah oo waqtii dheer qaadanaya.*
- *Xooga ugu wayn ee la isticmaalo waa qoyska iyo xoolaha.*

- Wax-soo saar yar oo aan badnayn, kaasoo aan iskumid ahayn oo xilliba xilliga kale uu kaduwanyahay.
- Aad ugu xidhnaanta xaalada cimilo.

Wadamada Afrika dadka dhaqaala ahaan waxqabadka leh intooda badan waa beer qodato quutul maalmeeedeet. Tusaale ahaan, Itoobiya 77% ayaa Isticmaala noocan beer qodaaleed.

2 Beer qodaalka casriga ah ee ganacsiyeed

Waa nooc beer qodaal kaasoo beeralaydu u beertaan midhaha in ay ka ganacsadaan.

Dabeeecadaha beerqodaalka ganacsiyeed waxaa ka mid ah:


- Isticmaalka farsamooyin iyo qalabyo casri ah.
- Beerleydu way wax soosaar badanyihiin.
- Xoog qeyb yar oo kamid ah dadka (aan badneyn) ayaa kaqeybqaata.



Hawl-galka 1.20

Darsida (Barashada)

khariidad



Jaantuska 1.29: Noocyada ugu muhiimsan hab-nololeedka Afrika

Ka jawaab su'aalahan ku saabsan adiga oo adeegsanaya khariidadan sare.

- 1 Tax ama qor noocyada ugu muhiimsan hab-nololeedka Afrika.
- 2 Sheeg noocyada hab-nolaleed ee ay ku dhaqmaan dadka Afrika intiisa badan? Caddee (sharrax) sababta?

Afrika waxay kaalinta koobaad kaga jirtaa wax-soosaarka dhawr dalag dunida sida:

- *Saliida saytuunka-dalka Tuuniisiya ayaa ah ka hogaaminaya dalalka dhoofiya*
- *Saliida Lawska-dalalka Nayjeeriya iyo Sinigaal ayaa ah kuwa hogaaminaya soo saarayaasha*
- *Saliida caw-baarka (qumbaha) Nayjeeriya ayaa soo saarayaasha ugu horaysa*
- *Bunka-Itoobiya, Ayferikoost, Angola, Ugaandha, Kameruun, Madagaskar iyo Taansaaniya.*
- *Kookaha-Gaana, Nayjeeriya Ayferikoosti iyo Kameruun oo ah dalalka ugu soo saarista badan dunida*
- *Afrika sidoo kale waxay soo saartaa oo ay dhoofisaa: caleenta Shaaha, Bunka, Sisinta, Aale Sonkorka, Tufaaxa, Muuska iyo khudaarta dhan dhanaan.*

Dhaqashada Xoolaha

Afrika waxay leedahay in kabadan 20% oo lo'da iyo Idaha Aduunka ah. Balse doorka dhaqaale ee xoola dhaqashada wadamada Afrika waa mid aad u hooseysa. Wadamada Afrika ee ugu horeeya dhanka xoolaha nool waxaa kamid ah.

Itoobia, Suudaan, Nayjeeriya, Morooko iyo Koonfur Afrika. Meelaha ugu muhiimsan ee lagu Koriyo (barbaariyo) ama lagu raaco xoolaha ee Afrika waa dhulka Safaanaha ee ku hareereysan dhulka keymalayda rooban ee kulaalaha.


Hawl-galka 1.21



Daraasaad khariiradeed

Su'aalo:

- b Muxuu dhulka safaanuhu u noqdey meesha ugu muhiimsan Lo'dhaqashada?
- t Sheeg meelaha ay dadkii hore ee reerguuraaga ahaa ku raacan jireen badanaa xoolahooda?



Jaantuska 1.30: Raacida (ilaalinta) xoolaha (Itoobia)

SOO KOOBIDDA CUTUBKA

- ❑ Meelaha ku yaala dhulka waxaa jira labba nooc oo midkii la doonaba lagu ogaankaro halkay dhacaan. Waxayna kala yihii meeli halka ay dhacdo xariiq ahaan iyo halkay dhacdo meeli daris ahaan.
- ❑ Dhulbadhuu waa xariiq aan dhab ahayn oo mara badhtamaha dhulka u jira fogaan isala'eg labada cidhif (cidhifka Waqooyi iyo ka Koonfureed)
- ❑ Dhulbadhuu waxuu Afrika u qeybiyaa Laba qaybood
- ❑ Afrika waa qaarada kaliya ee kutaala Afarta Nusdhuleed ba; kuwaas oo kala ah Nusdhuleedka Waqooyi, Nusdhuleedka Koonfureed, Nusdhuleedka Galbeed iyo Nusdhuleedka Bari,
- ❑ Dhulka Afrika saddex dalool labo (½)waxay u dhexaysaa labada kulaale (kulaalaha kansarka iyo kulaalaha kaabrikoonka).
- ❑ Dhig-dhexadu waa dhigta marta Grinwijkstra ee bar-bilowga dhigaha iyo waqtiga deegaamada.
- ❑ 15° ee kastee dhigba, waxaa jira faraq halsaac.
- ❑ Kudhawaad 2000 ooluuqadood ayaa lagaga hadlaa Afrika.
- ❑ Ilbaxnimadii Masaarida ayaa ah mida ugu da'da weyn Afrika
- ❑ Wabiga Niil door muhiim ah ay uu ka ciyaaraa nolasha masaarida
- ❑ Afrika waa qaarada labaad ee ugu tirada dadka badan Aduunka, ee sooraacda Aasiya.
- ❑ Cufnaanta tirada dadka ee ugu sareysa Afrika waxaa laga helaa oo leh wabiga Niil hareerihiiisa iyo barta uu ku dhammaado dhulka ah ee Masar.
- ❑ Lamadagaanada Afrika waa meelaha leh cufnaanta tirada dadka ee ugu hooseysa Afrika.

SU'AALAH GEBO GABADA CUTUBKA

I *Uga jawaab “Run” ama “Been”*

- 1 Fogaanta Koonfur – Waqooyi ee Afrika ayaa ka dheeraan badan midda Bari-galbeed.
- 2 Badweynta Baasifiga waa badweynta ugu dhaw Afrika ee dhanka Bari.
- 3 Ahraamtu waxay ahaayeen meelaha lagu aaso ee faraacida iyo boqorada Masar.

4 Koradh ama koradh sanadeedka tirada dadka ee Afrika waa mappa ugu badan, uguna dhakhsaha badan Aduunka.

5 Goobaha ku yaal dhigta iskumidka ah waxay Leeyihiin waqtii kaladuwan.

II *Buuxi meelaha banaan*

1 _____ % oo dhulka Afrika ah ayaa waxay u dhaxeyso labada kulaale.

2 _____, _____, _____, iyo _____ waa baraha (goobaha) ugu cirifeeyaa Afrika.

3 _____ waa xariiq mara loolka 23 ½ o Waqooyi.

4 Xariiqaa dhigta sida tooska ah dhanka kale ee galooinka oo ku aadan Liidinta Giriinwij digriigeedu waa _____.

III *Kabixii Jawaabo Kooban*

1 Qeex dhulbadhe

2 Maxaay dhamaan ganacsatadii ganacsigii masaafada dheeraa u ahaayeen Muslimiin?

3 Maxaay ahaayeen guud ahaan waxyaabihii ka soo baxay ganacsigii masaafada dheeraa?

4 Meelahee ayaa Afrika leh cufaanta dadka ee aadka u hooseysa?

5 Maxay Beeruhu (dhaqashada xoolaha iyo Beer falashada) u yihiin hab – nolaleedka Afrikaanka intiisabadan?

IV *Ficil Waxqabad ku Muujin*

1 Sawir muuqaalka ama qaabka khariirada Afrika, kadibna tilmaan (calaaamadee) meelaha ay dadweynuhu aadka ugu cufan yihiin.

2 Hadii wakhtiga Nuyuu Yook 90°G tahay 2:00 pm maxay noqon saacada wardheer (Itoobiya) 45°B?

V **Kadooro Jawaabta saxda ah**

- 1 Dhigaha soo socda tee baa marta Afrika?
 - B 90°B
 - T Dhig-dhexada
 - J Dhigta 180°
 - X 90°G


- 2 Kuwan soo socda keebaan ahayn astaamaha loolka?
 - B Waa kuwo u xariiqan Bari iyo Galbeed
 - T Ma aha barbaro
 - J Dhererkeedu wuu yaraadaa markay cidhifyada u sii dhawaadaan
 - X Fogaan is le'eg oo isku mid ah ayaa u dhaxaysa

- 3 Keebaan dad samee ahayn qodobada saameeya baahsananaanta dadka.
 - B Cimilada
 - T Baadka
 - J Kheyraadka
 - X Dhigahaay dhacaan

- 4 Kuwan keebaan lahayn dabeecadaha Beer falashada quudka ee Afrika
 - B Qalab iyo Habka casriga loo adeegsado
 - T Bacriminta
 - J Ku xidhnaan xaaladaha jawi sare
 - X Beeraha xoolaha oo ay xubnaha qoysku yihiin shaqaalaha

CUTUBKA

QAAB DHISMEEDKA DHULKA



Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Marka uu dhammaado cutubkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan:

- ❑ Inay tilmaamaan lakabyada dhulka iyo sameysyada qoloftiisa (Oogada sare ee dhulka).
- ❑ Inay fahmaan in saxamada dhulka ay dhaqaaqi karaan iyo in ay dhalin karaan dhul-gariir
- ❑ Inay aqoonsadaan sameyska noocyada iyo faa'iidooyinka dhaqaale ee dhadhaabaha.
- ❑ Inay sharxaan iyo inay isticmaalaan xariiqyada Loolalka, Dhigaha iyo inay fahamaan dhigdhaxada
- ❑ Inay sameeyaan khariirad gacmeed
- ❑ Aqoonsadaan macluumaadyada muhiimka ah ee ku yaala daafaha khariirada.
- ❑ Sharaxaan qaar ka mid ah faa'iidooyinka khariidadaha

Tusmooyinka ugu Muhiimsan

- 2.1 LAKABYADA DHULKA**
- 2.2 SAMEYSKA IYO NOOCYADA DHADHAABAHA**
- 2.3 ADEEGSIGA IYO XOG KA HELIDDA KHARIIRADAHA**
 - *Soo kobidda cutubka*
 - *Su'aalo ka kooban cutubka dhamaantii*

2.1 LAKABYADA DHULKA

Marka uu dhamaado cashirkan, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- shaarxaan lakabyada dhulka
- tilmaamaan waxyabaha uu ka sameysanyahay qoloftiisu (oogada sare ee dhulka)

Erayada Furaha u ah Cashirka



- | | |
|--|--|
| <input type="checkbox"/> lakabka sare | <input type="checkbox"/> lakabka hoose |
| <input type="checkbox"/> lakabka dhexe | <input type="checkbox"/> dulaha lisma ee rifma |

Fiiri bal waxaad ka ogtayah

- 1 Ma ogtayah in uu dhulka asalkiisii ama sameyskiisii hore ay ahayd walax weyn oo hawo kulul oo sida kubada oo kale goobo wareegsan ah, oo uu muddo dheer kadib si aayar aayar ah u qabawday isuna badashay ama noqotay adke leh qaab dhismeedka wakhti xaadirkan dhulku uu leeyahay?
- 2 Ma ogtayah in uu qofku ku ogaan karo ama ku fahmi karo saddexda Lakab ee uu dhulku leeyahay isagoo soo qaada ukun biyo lagu dhexkariyey kadibna u kalajara laba qeybood?

Natiijada Lafilayo barashada cashirkan kadib:

Markaad cashirkan baratid hubso in aad ka jawaabikarto su'aalahan soo socda.

- 1 Waamaxay faraqa u dhexeeya qolafta sar ee dhulka iyo lakabyada kale?
- 2 Maxay oogada sare ee dhulka ka sameysantahay?


2.1.1 Saddexda Lakab

Waad ogsoontihiin in dhulku sida kuwa kale ee culayska leh (tusaale ahaan bahwadaagta cadceeda), uu qaab wareegsan leeyahay. Qaabkan wareegsan ee dhulku wuxuu ka koobanyahay saddex lakab, oo kala ah:

- 1 lakabka sare ama qolafta sare ee dhulka.
- 2 Lakabka dhexe ee dhulka
- 3 Bu'da ama Lakabka hoose ee dhulka

Qofna iskuma dayin in uu gaadho lakabka sare ee dhulka wax ka hooseeya. Lakiin saynisyahaniintu waxay ka soo ururiyeen macluumaadyada dhulka lakabkiisa sare wixii ka hooseeya iyagoo u diraya hirarka jabaqda, kadibna darsaya gariirka jabaqda soo noqotay. Waxaa kale oo ay wax kaga ogaadaan u kuur galada falalka dab dhuleedyada (fool kaanaha) & dhul gariirka.

Marka ukunta biyo lagu kariyo, waxaad ukuntaas ku arkaysaa saddex qeybood; kuwaas oo kala ah qolofta sare, qeybta cad ee dhexe iyo qaybta gudaha ee hurruuda ah. Marka waxaad ka soo qaadaa qolofta ama daboolka sare ee ukunta in ay tahay qolofta ama Lakabka sare ee ku daboolan waxa dhulka gudihiiisa ku jira.



Jaantuska 2.1: qaab dhismeedka dhulka

2.1.2. Qaybaha ugu Muhiimsan

Lakabka sare: waa lakabka ugu dhuuban (khafiifsan) ee dhulka. Wuxuu ka kooban yahay saxamada badweynta iyo qaaradaha. Qarada lakabka sare waxay u dhexaysaa 8km oo badweynta ah iyo 60km oo qaaradaha (dhulka barriga ah) ah.


Lakabka sare wuxuu ka ka kooban yahay dhadhaab adke ah, carro iyo biyo. Inkabadan boqolkiiba todobaatan (>70%) oo Lakabka sare ee dhulka ah ayay biyo ku daboolan yihiin (ku dadan yihiin) kuwaasoo intooda badan ay yihiin kuwa badweynta. Dhulka ka sareeya badweynta ee qalalan ayaa loo yaqaanaa qaarado.

Qeybta kore ee lakabka sare ee dhulka ayaa ah mid qaabab kala duwan oo muuqaaleed leh. Laga bilaabo buuraha sida buurta Eferest (8,848 mitir ka sareysa jooga badda) banaanada, dulaha sare, ilaa iyo qeybta ugu qotonka dheer badda ee hoos u gun-dheerta Maariyaana, ee 10,915 mitir ka hooseysa sagxada ama oogada (dusha kore) ee badweynta Baasifiga.

Waxaa jira quwado gudaha iyo dusha ah oo sababa dhaqdhaqaaq yada lakabka sare. Miyaad xasuusataan sida uu dhulka ku samaysmay?

Saynisyahanadu waxay aaminsanyihii in bilowgii hore ee dhulku uu ahaa walax sida kubbadda oo kale ah, oo hawo kulul (neef oo kale) ah, taasoo si aayar aayar ah muddo dheer kadib isu badashay dha dhaab dareere ah oo markii dambe intay qaboo been adkaaday dabadeedna sameeyay lakabka sare ee dhulka. Wuxuu u kala jajabay qaybo kala duwan oo dhadhaabo aad u waa wayn ah, kuwaasoo loo yaqaano saxamo. Saxamadu meelaha qaar kood way is duqeeyaan (isku dhacaan) halka meelaha qaarkoodna saxamadu ay ku kala tagaan (ku kala go'aan) oo ay ka samaysmaan dooxo.

Cadaadiska quwada saxamaha ee lisanka iyo rifanku ay dhadhaabaha sida qotada dheer hoos ugu riixayaan waxay sababaan qaabka ama muuqaalka badalid ama isbadalo ku yimaada dhanka baaxadda qaabka iyo guud ahaan muuqaalka dhadhaabaha. Dhul-gariirka iyo dabdhuleed kuna (folkaanaha) way qaabeeyaan lakabka sare. Jaantuskan hoose wuxuu natusayaa qeyb ka mid ah Lakabka sare iyo qaab sameysyada qolafta sare ee dhulka.



Jaantuska 2.2: Lakabka sare ee dhulka

Lakabka dhexe ee dhulka: Lakabka dhexe waa lakabka ka hooseeya lakabka sare Lakabka dhexe wuxuu ka kooban yahay dhadhaab adke iyo dareere ah; qeybta sare ee lakabka dhexe ee xigta dhinaca lakabka sare waa adke, halka ay qeybta bu'da ama lakabka hoose xigtaa tahay dareere. Qirada lakabka dhexe waa 2,900 km.

Bu’da: ama lakabka hoose ee dhulka:- Lakabkan wuxuu ka hooseeyaa lakabka dhexe. Waa lakabka ku yaala gudaha dhexe ee dhulka kaasoo qaradiisu tahay 3,470 km. Waxaad ka arki kartaa [Jaantuska 2.1](#) in uu lakabka hoose leeyahay labo qeybood, kuwaas oo kala ah qeybta sare ee bu’da iyo gudaha bu’da.

Bu’da dusheeda sare aad ayey u kulushahay, waxayna leedahay walxo dhalaalay. Laakiin gudaha lakabka hoose ama bu’da waxay leedahay walxo adke ah. Qaybtan gudaha bu’da ee adkaha ah waxay ka sameysantahay walxo Birtu kubadanyahay oo qani ku ah. Heer kulka qaybtan gudaha bu’da wuxuu gaadhaa ilaa iyo 6600°C.

Qeybta sare ee lakabka hoose waxay kasameysantahay xadiid dhalaalay iyo Nikal.

Hawl-galka 2.1



- 1 Adiga oo isticmaalaya dhoobo ka same muunada dhulka (dhulka oo kale) kaas oo aad ku tusaysid dhulka qaabdhismeedkiisa.
- 2 Maktabada buugaata La akhristo ka raadso buuggaag ama ilaha kale ee aad ka heli kartid aadana u soo akhri dulaha lisanka iyo rifanku ay ku dhaceen ha wadaag warbixin ta ama maclummaadka fasalkaaga.
- 3 Ku muuji dhaq-dhaqaqyada saxamada muuqaal ahaan. Soo qaado baaquti (Tashdi) biyo ah ku walaaq (qa) carro oo Ka dhig dhooqo aan aad darereu sii ahayn. Soo qaado warqad adag oo sida jeldiga buuggaagta oo kale ah ugu kala jar-jarqaybo, kadibna Dul-dhig (saar) dhoobada dusheeda. Adiga oo gabal-gabal u kala riixaya ama si wadajir ah. Waad qiyaasi kartaa sida ay saxamada adkaha ahi u socdaan lakabka dhexe ee dareeraha ah.

2.2 SAMEYSKA IYO NOOCYADA DHADHAABAHA

Marka uu dhamaado cashirkan, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- fahmaan sida ay u sameysmaan dhadhaabuhu
- a qoonsadaan noocyada ugu waaweyn dhadhaabaha
- faahfaahiyaan faa ii dooyinka dhaqaale ee ay dhadhaabuhu u leeyihii degaankooda.
- Sharaxaan Ahmiyada dhaqaale ee ay dhadhaabuhu u leeyihii Itoobiya.

Erayada Furaha u ah Cashirka



- | | |
|--|------------------------|
| → Maagma (dhadhaab dhalaashay ama dhagax dab ah) | → Meertada Dhadhaabaha |
| → Dhadhaab dhalan rogan | → Dab-holac |
| → Dhagaxa dhalaalay | → Shiil (danab leh) |
| | → Macdaneed |
| | → Is-haysasho |

Fiiri bal waxaad ka taqaantid

- 1 Dhadhaabuhu waxay ka sameysan yihiin macdano.
- 2 Noocya kala duwan oo dhadhaabyo ah ayaa sameyskoodu kasoo jeedaa dhadhaab dhalaashey oo looyaqaano dab-holac.
- 3 Nooc ka mid ah noocyada dhadhaabaha uu isu badali karaa ama ubadalmi kara nooc kale.
- 4 Carrada iyo busta (ciigada buusta).
- 5 Iisticmaalkooda dhaqaale ee ay u leeyihiin binii'aadamka kasakaw, dhadhaabuhu waxay inoo sahlaan in aan ogaano ama aqoonsano da'da iyo sameyska dhulka.

Hadafkaaga barashada

Marka aad qeybtan akhrisid, waxaad hubsataa in aad ka jawaabi kartid su'aalahsan soo socda:

- 1 Sidee ayey usameysmaan noocyada waa weyn ee dhadhaabaha?
- 2 Ma aqoonsan kartaa dhadhaabyada aad ku aragtid degaankiina noocyada waa wayn ee saddexda ah midka uu yahay?
- 3 Ma sharxi kartaa faa'iiddada dhaqaale ee dhadhaabaha kala duwan ee degaankiina iyo guud ahaan dalkaba?

2.2.1 Sameyska dhadhaabaha

Marka aynu ka hadleyno dhadhaabaha ma eegeyno oo kaliya kuwa dhulka dushiisa kore saaran; ee waxaa kale oo aan eegaynaa kuwa dhulka gudihiisa ah. Waxaa dhacda mar marka qaarkood in ay dhadhaab ku sameysantay dhulka gudihiisa hoose ay sababo kala duwan awgood ugu soo baxdo dhulka dushiisa oo ay noqdaan kuwo aan arki karno. Waxaa badanaa laga helaa dhadhaabtan dooxooyinka iyo wabiyada oo laga yaabo in aad ku aragtaan.

Dhadhaabuhu waa walaxda uu dhulka intiisa badan ka sameysanyahay. Dhadhaabuhuna waxay kasameysanyihin macdano ka kooban curiyayaasha kala ah Oksijiin, Salfar, Kaalshiyam, Kaarboon, Bir (iron) Almuuniyan iyo kuwo kala. Dhadhaabaha qaarkood waxay ka sameysanyihin hal macdan oo kaliya. Tusaale ahaan Mar-marka saafiga ah oo ka samaysan hal macdan oo loo yaqaano kaalsayt Halka ay dhadhaabaha kalena ka sameysan yihiin macdano iskujira ama isutagey. Tusaale ahaan, Garaaneytku wuxuu ka kooban yahay macdanada kuwaartiska, Feldisbar iyo Mika.

Baarista lagu sameeyo dhadhaabaha, ayey saynisyahanadu ku ogaadeen taariikhda muuqaaleed iyo waxyaabaha uu ka kooban yahay dhulku iyo waliba hababka isbadalada ama qaab badalka ku keena meeraheena (dhulka). Barashada ama darsida dhadhaabaha waxaa kale oo aan ka helaa maclumaadyo ku saabsan cimilooyiinkii dhulka ee wakhtigii tagay iyo noolayaashii jiray.

Lafihii ama qalfoofyadii iyo hadhaayadii ka soo hadhay dhirtii iyo xayawaanadii hore ayaa waxay aad inooga caawiyeen in aan wax ka ogaano heerarkii muuqaaleed ee kala duwanaa ee uu dhulku soo maray.

2.2.2 Noocyada dhadhaabaha

Dhadhaabuhu waxay leeyihiin midabo badan, wayna ku kala duwan yihiin dareenka taabasho sida weynaanta, qaabka iyo isku'aadanaanta si gaar ahna looga helo dhadhaabaha macdano jiriir ah.

Jiriirta ama budada macdanata ee dhadhabaha qaarkood waa lakabyo isbarbar socda halka qaarna aynan lahayn hannaan ama nidaam ay raacaan.

Marka loo eego sameys koodii dhadhaabuhu waxay u qeybsamaan saddex qeybood oo kala ah:

- 1 Dhadhaab shiileed
- 2 Dhadhaab lakabeed
- 3 Dhadhaab dhalanrogan

Dhadhaab shiileed

Sida magaca dhadhaabahan laf ahaantiisa aan ka fahmayno ama ku cadd dhadhaab shiileedku wuxuu ka sameysan yahay waxyaabo kulkulul oo dhalaalay kuwaas oo ka soo bilowda gudaha hoose ee dhulka. Waxyaabaha kulul ee dhalaalay inta

ayna oogada sare ee dhulka soo gaadhin ee ay dhulka sagxadiisa ka hooseeyaan waxaa la dhahaa dhagax-dab ah (Maaagma), marka ay dhulka korkiisa soo gaadhaana waxaa la dhahaa dab-holac (lava). Marka ay waxyaabahan kulul ee dhalaaley ay u soo baxaan dhanka oogada dhulka, waa ay qaboobaan waxayna noqdaan dhadhaaba shiileed. Saamiga qaboobitaankooda waxay saameysaa cabbirka waynaanta jiriirta macdanta sameysa dhadhaabahan. Aayar u qaboobidu waxay dhalisaa sameyska jiriir buurburan (waaweyn), dhakhsa u qaboobiduna waxay dhalisaa jiriir yaryar (budo ah).

Dhagaxa danabka leh waa dhadhaabaha ugu wada caansan dhulka dushiisa laakiin intooda badan waxaa laga helaa gudaha qotoda dheer ee dhulka si kastaba ha ahaatee, 75% ka mid ah dhadhaabaha oo aynu ku aragno dhulka oogadiisa sare waa dhadhaab macaaneed ama lakabeed.

Tusaale ahaan, dhagaxa danabka leh waxaan u soo qaadan karnaa, Garaaneytka oo ka samaysmay maagmaha ka yimid ama kasoobaxa dhulka hoostiisa aadka uga fog oogada sare, ee sida tartiib tartiib ah u qabooba. Waxaa jira dhul aad ubalaadhan oo qaarada Afrika ka mid ah oo laga helo Giraaneyt ku sameysmay. Garaaneytku waxaa laga yaabaa inuu u soo dibad baxo xaga oogada sare marka lakabyada dhagxaanta kale ee dusha sare ka ah (ka koreeya) ay burburaan, oo uu cimilowga iyo carro guurku dildilaaciyo.



Jaantuska 2.3: Dhagaxa garaaneyntka

Noocyada Dhagxaanta ugu caansan ee dhagaxa danabka leh kaasoo ka samaysmay dareeraha dab-holaca waxaa ka mid ah Basaaltiga (dhagax buus buusma) waana ka ugu badan ee ay ka samaysan yihin Jasiiradaha Foolkaanaha, kaasoo kor uga soo baxa sagxada bad weynta.



Jaantuska 2.4: Dhagaxa Basaaltiga

Noocyoo kale oo ka mid ah dhagxaanta danabka leh kaas oo ka samaysmsay dab-holaca (laafaha) qulqulayay ee ka yimid foolkaanaha sida degdega ahna u qaboobay oo ah kan loo yaqaano dhagaxa Obsidhiyaanka. Dhagaxani waa mid siman, dhaldhalaala oo leh midabka madow ee qaruurada.



Jaantuska 2.5: Dhagaxa Obsidhiyaanka

Dhagaxa danabka leh ee loogu yeedhaa Buud wuxuuna ka samaysmay markii neefo ama gaasas ka soo firxaday laafaha qaboobay ee ka yimid folkaanaha. Neefahaas firxaday oo tegay godad aad u yaryar soona saaray dhagaxa danabka leh ee la moodo furaashka oo badanaaba leh fudayd uu ku sabayn karo.



Jaantuska 2.6: Dhagaxa Buuda ah



Hawl-galka 2.2

- 1 Dthagxaanta Garaaneytka iyo ka Buuda ah labaduba waa dhagaxa danabka leh. waayo?
- 2 Tusaale miyaad u heli kartaa dhagxaanta aad ku aragtay [Jaantusyada 2.3 – 2.6](#)? Ia wadaag fasalkaaga islaafalanqaynta wixii aad soo heshid?

Dhadhaab lakabeed

Waad fahmi kartaa magacani sida uu ku yimid taasoo ay dhagxaantani ka samaysmeen qurub yaryar oo burburay kuwaas oo hoos udagay (qasharka biyaha salkiisa fadhiista) asharanan waxaa soo qaada ama soo xaaqa biyaha, dabaysha, barafka iyo cuf is jiidadka dhulka oo dhamaantoodba ah kuwa ugu muhiimsan. Waxayna meelahaas ka soo qaadaan dhirta iyo xayawaanada hadhaagooda dhintay waxayna ku tuulmaan dooxooyinka, bannaanada iyo sagxada badaha sannadba sanadka ka dambeeya lakaba lakab buu fuulaa qasharadaas oo kor u dhisma. Malaayiin sano ka hor ayey lakabyadan adkaadeen (dhageen) ee u oo noqdeen dhagxaan ama dhadhaabo. Waxaa ugu hor samaysmay lakabka ugu hooseeya oo uu culayska korsaaran ee dhagaxdu ku qasabtay ama ka dhigtay lakab dhadhaabe oo adag. Sido kale, waxaa iyana u sameysmay labo lakab oo kadambeyay lakabkahoose, waxaana loo yaqaanaa dhadhaabta lakabyadan dhadhaab lakabeed.

Waxay ku kala duwan yihii dhadhaab lakabeedyada aan soo shegnay waxyaabaha ay ka samaysanyihii. Dhagax Nuuradeedka oo ah mid ka samaysan macdantaa kaalsaydka ee biyaha badda iyo noolaha (xayawaanada iyo dhirta) ku dhex nool ayaa ah dhagaxa ugu badan (farabadan) dhadhaab lakabeedyada.

Hawl-galka 2.3



Samee labanka (jaajuurka) qoraxdaa lagu qalajiyo.

Soo qaado carro iyo biyo isku walaaq ku dhex gur saxaaraad (sanduuq) ama wax kasta oo qaabayn kara markii ay mudo qoraxda taalo ee ay adkaato dhoobadu kadib dab badan ku shid halkaas waxaa ka soo baxaya leben aad u adag oo dhagax la moodo.

Dhamaan keydadka dhuxul dhagaxda, saliida iyo gaasku waa kuwa ugu badan ee dhulka oogadiisa biyaha leh waxaana ugu wacan samaysanka dhadhaabahan. Dhuxul dhagaxda waxaa laga helaa meelaha waayo dhirtu ka bixi jirtay oo kaymo ahaan jiray. Kaymahan oo ku aasmay carrada hoosteeda taas oo ay sababeen quwadaha dibada ee sagxada sare ee dhulka ka dhaca oo ay carradu ugu muhiimsan tahay. Malaayiin sanno in ka badan ayaa isbadalada kulta iyo cadaadiska ayaa waxyaalihii ahaa noolaha ama ka soo jeeday noolaha u bedelay dhagxaanta loo yaqaano Dhuxul dhagaxda.

*Dhagax Ciideed**Sheel***Jaantuska 2.7: Dhadhaab lakabeed**

Dhadhaab dhalan rogan


Ereyga dhalan rog oo afka qalaad lagu yidhaahdo “Metamorphic”. Wuxuu ka yimid Giriiga oo uu macnihiisuna yahay “qaab bedel” Dhadhaabta dhalan rogan waa dhadhaab lakabeedka ama dhadhaab shiileed uu isbedel ku dhacay. Xaaladaha wax ka badala qaab-dhismeedka iyo muuqaalkaba waxaa ugu wacan kulaylka iyo cadaadiska hawada.

*Isleyt**Maarbal(marmar)***Jaantuska 2.8: Dhadhaab Dhalan rog an**

Meertada Dhadhaabaha

Waxaa jira isbedel meerta ah oo ay saddexda nooc ee dhadhaabaha ee aan horay u soo sheegnay uu midba midka kale isugu bedalo sida ku cad jaantuska meertada dhadhaabaha ee hoos ku sawiran. Xaaladaha isbedalka dhadhaabaha sababa waxaa ka mid ah cimilowga (burburinta), carro guurka, dhalaalidda barafka, isku-dhegga iyo cadaadiska.

Isbedalka dhadhaabaha waxaan tusaale ugu soo qaadan karnaa dhagax-nuuradeedka oo ka mid ah dhadhaab lakabeeda ayay cadaad iska iyo kulkku aadka ahi u bedalaan dhagaxa marmarka (Marble) oo ah dhadhaab dhalan-rogan.




Jaantuska 2.9: Meertada dhadhaabaha



Hawl-galka 2.4

- 1 Sharax sida dhadhaabo shiileedku ugu horaynba u noqon karaan dhadhaab lakabeed, kadibna dhadhab dhalan rogan?
- 2 Meertada dhadhaabuhu malaha bar bilow iyo bar dhamaad toona. Sharax weedhan adiga oo tixraacaya Jaantus 2.9.
- 3 Fiiri khariirada Itoobiya (Jaantus 2.10) waa kee nooca dhadhaab ee uu, caanka ku yahay qaybta Bari ee wadanku?



Jaantuska 2.10: Baahsanaanta dhadhaabaha Itoobiya

2.2.3 Waxtarka Dhadhaabaha

Casharkii hore waxaad ku soo aragteen inay dhadhaabuhu ka samaysanyihiin hal iyo in ka badan oo macdano ah. Qaar ka mid ah dhadhaabaha waxaa looga faa'iidaystaa degaamada gaar ahaaneed sidan:

- *Garaaneytka – Waa dhagax cimridheer oo adag oo loo isticmaalo dhismaha iyo dhisitaanka wadooyinka i.w.m tusaale dhagaxa Koobalka (waa dhagaxyar oo wareegsan oo loo isticmaalo dhisitaanka wadooyinka iyo marsto biyeedyada).*
- *Basaalti – waa mid si fudud loo jajabin karo oo loo istic maalo wadooyin dhisida*
- *Dhagax-nuuradeedka – Tamaashiirta, dhisitaanka iyo rinjiyaynta guryaha*
- *Dhagaxa milixda ah – Waxaa loo isticmaalaa cuntada dad ku ay ku darsadaan, quudinta xayawaanka, wax-ku- keydsiga.*
- *Maarbalka (marmarka) – waa dhagax aad qaali u ah oo loo isticmaalo qurxinta gidaarada iyo sagxada dhismayaasha.*

Dhadhaab lakabeedka waxaa xidhiidh la leh macdan ahmiyad wayn oo dhaqaale leh. Macdantan waxaa ka mid ah oo aan tusaale ahaan usoo qaadan karnaa dhuxul dhagaxda, batroolka iyo gaaska dabiiiciga ah oo ah kuwo xidhan dhadhaab lakabeed. Hadaba deegaankeena ismaamulka Soomaalida Itoobiya ayaa horay loo xaqiijiyey in meelo (goobo) badan oo dhulkiisa ah ay ku kayd sanyihiin (kujiro) Gaaska dabiiiciga ah iyo Baatoolba. Qaar ka mid ah macdanta ku xidhan dhadhaab dhalan rogan oo ay ka mid yihiin dahabka, dheemanta, maarta, birta, laxaamada, balaatiniyam, niikal, iyo yuraaniyaamta.

Hawl-galka 2.5



Waxaad booqataan laagaha ama dooxada wabiga idiinku dhow si aad u soo aragtaan dhadhaabaha ay biyuhu soo saareen ee muuqda. Wuxuu ka soo diyaarisaa ama ka soo qortaan dhadhaabaha goobta aad boqateen ku aragteen war-bixino kooban, oo ka soo jeediya war-bixinadiina ardayda iyo baraha hortooda.

2.3 ADEEGSIGA IYO XOG KA HELIDDA KHARIIRADAHA

Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Qeexaan ereyga khariirad
- Fahmaan xiriirkha ka dhexeeyaa khariirad maskaxeed iyo kharurad gacmeed
- Cadeeyaan qaar kamid ah waxtarada khariiradaha
- Aqoonsadaan dacalada xogwaranka kharciradaha
- una isticmaalaan calaamado iyo summado aha.
- sameeyaan khariirad gacmeed

Erayada Furaha u ah cashirka



- | | |
|---|--|
| <input type="checkbox"/> Khariidad maskaxeed | <input type="checkbox"/> Khariirada jidadka |
| <input type="checkbox"/> Kariirad gacmeed | <input type="checkbox"/> Luuqada khariirada |
| <input type="checkbox"/> Cabir-qiyaaseed | <input type="checkbox"/> Fariimosideyaasha xog waranka |
| <input type="checkbox"/> Furaha khariirada | <input type="checkbox"/> Xog waranka juquraafiyeed |
| <input type="checkbox"/> Calaamadaha khariirada | <input type="checkbox"/> Xariiqaha marsiimada siman |
| <input type="checkbox"/> Qaab dhismeedka dusha sare ee dhulka | |

Fiiri bal waxa aad ka ogtahay (ka garanaysid)

- 1 Ma ogtahay in qaabka iyo muuqaalada dhulka dushiisa ah lagu muujinkaro khariiradda ama Galoobka?
- 2 Wadada u dhaxaysa gurigiina iyo dugsiga ee aad inta badan martid, waxyabaha hareeraheeda ka muuqda ee aad aragtid markaad marayso, miyey muuqaal maskaxda kuugu sawiranyihiin?
- 3 Waligaa ma aragtay dalxiisayaal isticmaalaya khariirada jidadka?



Hawl-galka 2.6

- 1 Sideebay dadku gaar ahaan indhoolayaashu, ku gartaan wadada gaynaysa halka ay u socdaan?
- 2 Hadii aad haysatid khariirad, ma akhrin kartaa adigoona ka fahmin sumadaha iyo calaamadaha dacalada xog waranka?
- 3 Sharax qaar ka mid ah waxtarada khariirada?
- 4 Sheeg nooca xogeed ee kuyaala khariiradaha ku sawiran buugaagta ardayda?

Gurigiinu ma magaaluu ku yaalaa mise baadiye (miyi)? Wadadeed u martaa iskuulka? Ma sheegi kartaa ama usharxi kartaa macalinkaaga? Majiraan waxyaabo muuqda oo dabiici ah sida buuraha, laagaha, dooxooyinka IWM oo aad kasoo gudubtid (soomartid)? Masajiraan waxyaalo dad same ah sida wadooyinka, dhismayaasha muhiimka ah sida Masaajid, Kaniisad, Huteel, Suuq oo aad soo martid ama soo dhaiftid?

Marka aad doonaysid in aad meel gaadhid waxaa laga yaabaa in aad niyada ka sii sawirato wadada aad mari doontid sidii iyadoo kuu muuqata. Hadaba, niyada ka sawirashada noocaa oo kale ah ee adiga oo aana arkaynin aad goob ama meel muuqaalkeeda ku sawiratid ama ka aragtid niyadaada ayaa ladhahaa khariirad maskaxeed.

Khariirad maskaxeedu waa khariirada ama muuqaalada aad maskaxda ku sawiratid. Wuxaan inta badan maskaxda ku Sawiranaa oo aan ku haynaa niyada aaga dariska aynu nahay iyo goobaha aan aadka ugu noqnoqono ee aan ku badanahay.

Waxaa kale oo dhacda ama laga yaabaa in uu qofku maskaxda ku sawirto goob ama magaalo uusan horay u arag.

Waa maxay khariirad gacmeed?

Khariirad gacmeedu waa khariirada aan ku sawirno xaashi, sabuurada ama shay kale oo fidsan. Wuxaan dusheeda ku sawiran muuqaalo kala duwan oo isugu jira (ka kooban) dabiici iyo dad-samee.

Tusaale ahaan, khariirada gacmeeda wadada u dhaxaysa dugsiga iyo gurigiina

marka aad sawiraysaan waxaad ku dul sawiraysaan oo aad muujinaysaan wabiyada, IWM iyo muuqaalada dabiiciga ah iyo kuwa dadsameeyga ah ee wadada hareeraheed ah. Muuqaalada dabiiciga ah waxaa kamid ah buuraha, wabiyada, laagaha, dhirta iwm. Muuqaalada dad sameega ahna waxaa ka mid ah dhismayaasha caanka ah sida; Masaajida, kiniisada ha i.w.m.

Hawl-galka 2.7



- 1 Sharraxaad ka bixi jidka (wadada) aad martid ee u dhaxaysa guriyiina iyo Dugsiga?
- 2 Sharax wadada aad martid ee u dhaxaysa guriyiina iyo qoys aad qaraaba tiiin oo idii jira dhawr kiiloomitir.

Dhankee ama dhinacee laga sawiraa muuqaalada khariirada dusheeda ku sawiran? Ma dhinac ka aragbaa? Mise waa kor ka arag?

Waxaa jira laba siyaabo loo arki karo waxyaabaha muuqaaleed ee inoo muuqda. Labadan nooc (hab) aragbaa waxay kala yihiin dhinac ka arag iyo kor ka arag.


Dhinac ka aragu waa marka ay muuqaaladu hareeraha ka xigaan ee ay dhinacyadaada ka muuqdaan. Kor ka araguna waa marka aad muuqalada ka koraysid ee aad hoos u firinaysid (ay kaa hooseeyaan). Wuxaan kor ka raga tusaale ugu soo qaadan karnaa sawir ay diyaaradi iyadoo ka koraysa ay korka ka sawirto magaalo.

Marka aad maraysid wadada u dhaxaysa guriyiina iyo Dugsiga muuqaalada aad arkaysid waa kuwo dhinac ka arag ah ee ma a aha kor ka'arag. Hadii kor ka'araga loo baahdo waa in ay diyaaradi korka ka sawirto. Hadaba khariiradahas dhamaantood waa kor-ka aragk oo waa kuwo dhanka kore laga sawiray.

Waa maxay khariirad?

Khariiradu waa muuqaalo sawir ahaan ah oo u taagan dhamaan dhulka ama qeyb ka mid ah dhulka oo lagu muujiyyah shay ama wax fidsan.

Füri khariirad gacmeed kan hoose ee Dugsisga.



Jaantuska 2.11: isbarbar dhigida u dhaxaysa sawir iyo khariidad gacmeed

Sawirkha bidixda xiga wuxuu na tusinayaan dhismaha duggiga, garoonka kubada gacanta, birta calanka iyo geedo; sawirkha midigta xigana waa khariirad gacmeedka dugsigii hore laf ahaantiisa. Wakhti adigoo siinaya labada sawir mid walba soo daalaco sida uu sawir ahaan u eyyahay iyo sida khariirad gacmeedka marka lagu sawiro uu u eyyahay dugsigaas.

Hawl-galka 2.8



Sawir khariiad gacmeedka gurigiina, oo muuji alaabta guriga taala qaar ka mid ah sida miisaska, sariirta hurdada, iwm, iyo guriga dibadiisa sida kushiinka ama jikada musquusha. Kadibna tus macalinkaaga.

2.3.1 Waxtarada khariiradaha

Waxaa khariiradaha la isticmaali jiray tan iyo wakhtiyadii hore. Dadku waxay sawir gacmeedyo fudud ku sawiri jireen dhulka iyo buuraha, kuwaas oo ay ku muujin jireen tilmaamaha goobaha biyaha leh, wabiyada iyo goobaha ugaadhsiga halka ay ku yaalaan. Muddo kadib, hindisidii iyo soo saaridii waraaqaha iyo socdaalada meelaha dhaadheer ee dadka ayaa keenay sahlayna in aan xoggo badan ku sawirno ama ku dhigno khariirada korkeeda.

Xiligan aan kujirno, isticmaalka sawirada ama muuqaalada satalaytku soo sawiro iyo kunbuyuutarada ayaa inoo sahlay in aan ku soo saarno khariirado tayo sare leh wakhti yar gudihii.

Khariiraduhu waxay inoo leeyihiin faa'iidooyin ama waxtaroo aad u badan. Wuxaan waxtaradaas ka mid ah:

- *Waxaa loo isticmaalaa in xogg laga helo tusaala ahaan: khariiradaha ku yaala buuga ardeyga ee aad haysataan waxay idin tusiyaan muuqaalo sida buuraha, wabiyyada, dhirta IWM.*
- *Khariiradaha waxaa loo isticmaalaa in lagu tilmaamo meelaha horumarku ka socdo, sida dhismaha, beeraha, qodaalka macdanta iwm.*
- *Khariiradaha waxaan u isticmaalaa in ay inoo caddeeyaan lahaanshaha (mulkiyadda) dhulka iyo guryaha ee magaaloooyinka waaweyn ee Itoobiya.*
- *Khariiradaha waxaa isticmaala dalxiisayaasha oo ay ku hagtaa goobaha kala duwan ee ay doonayaan.*
- *Khariiraduhu waxay noo caddeeyaan baahsanaanta kheyraadyada.*

Sheeko Gaaban

Aragsan waxay ka shaqaysaa waaxda maamulka dhulka ee qeyb ka mid ah magaalada Dir-dhaba waxayna dadku magaceeda uraaciyaan ama ugu yeedhaan “Injineerad”.

Qofkasta oo doonaya inuu dhisto guri cusub wuxuu ogolaansho in uu helo ka codsadaa duqa-magaalada. duqa magaaladuna wuxuu si toos ah codsiyada ugu gudbiyaa Aragsan.

Aragsan-na inay codsiyada iska hubiso waa waajib saaran oo ay gudato. Haddii codsiga milkiilaha dhulku uu yahay dhaxal ay shaqsiyaad kala iibsadeen ama heshiis xaga dawlada ah. Haddii loo baahdo khariidad cusub sida caadiga ah waxaa loo yaqaanaa “xujad” ama “Mulkiyad”.

Aragsan, waxay booqataa marka hore goobta. Waxayna shaqadeeda ka bilowdaa isla goobtaas. Waxay cabbirtaa dhererka iyo ballaca dhulka ee goobtaas iyadoo adeegsanaysa qalabka wax lagu cabbiro. Waxay xaqiijisaa derisyada ka kala xiga dhamaan jihoyinka; muuqaalada dad-sameega ah iyo kuwa dabiiciga ah sida: wadooyinka, Webiyada oo ay tixgelinta siisaa ka hor inta ayna xadka dhulkaa samaynin.

Marka ay dib ugu laabato xafiiskeeda, Aragsan waxaay sawirtaa khariidad gacmeeda dhulka ee codsadaha. Markii ay sawirto khariiradda, Waxay durbaba ay tixraac ku samaysaa khariirada an oo ay tijaabo isbar-bar dhig ah ku samaysaa iyada iyo khariirada guud ee xaafada. Wakhtiyadan dambe kombiyuutarada ayaa ka caawiya oo ay ka heshaa dhamaan khariirad gacmeedyada xaafadaha magaalada Dir-dhaba.

Khariidada ugu dambaysa waxay ka kooban tahay cinwaanka (magaca milkiilaha), halka ay goobtu dhacd (magaalo-hoosaad, degmo, xaafa dama Qaballee), jihada, qiyas cabbirka, dhamaan cabbirada dhererada oo mitiro ah, wadarta bedka oo mitiro laba jibbaaran iyo taariikhda. Xujadan cusub waxa soo ansixinaya madax-waaxeedyada ugu dambayntiina madaxa magaalo-hoosaadk ayaa qalinka ku duugaya.

Sideed u aragteen shaqadii Aragsan? Ma suuro galbaa in milkiile dhul loo aqoonsado, gaar ahaan magaalo wayn xujad la'aan ama khariidad la'aan in uu wax ka dhisto?

Fahanka iyo Isticmaalka khariirada

Khariiradu waxay leedahay nidaam ama hab af-garasho oo ugaar ah. Habka af-garasho ee khariirada waa nooc xeer ah oo ka kooban calaamado, midabo iwm. Calaamada khariirada waa jaantus sumad, xaraf, ama soogaabin. Calaamad kasta oo khariirada kutaala waxaa lagu faah faahiyaa furaha khariirada. Hadaba, hadii aad damacdid in aad khariirad akarisatid ama fahantid waa in aad tixraacdil furaha khariirada.

Si aad u akhrisatid ama u fahantid xoggaha ama macluumaadka khariirada dusheeda ku yaala, waa in aad taqaano xirfadahan aasaasiga ah:

- *Akhrinta ama fahanka goobi halka ay ka dhaacdo ama katahay goob kale.*
- *In aad garato fogaanta udhaxaysa laba meelood.*
- *Raadinta bedka ay meeli leedahay.*
- *Fahanka midabada iyo calaamadaha aalaa la wadaago ee khariirada.*

2.3.2 Xog ka helidda khariirada

Waxaa xogaha iyo macluumaadka khariirada laga hela oo ay ku yaalaan daafaha ama hareeraha khariirada ee loo yaqaano daafaha xog-warhan.

Waa in aad baratid xogaha muhiimka ah si aad u akhridid (u fahantid) una isticmaashid khariirada. Xog waranka khariirada waxaa ka mid ah:

- **Ciwaanka:** oo ah mid lagu qoro ama ku yaala khariirada dhankeeda kore, ayaa waxuu caddeeyaa hadafka khariirada loogu talagalay ama loo sameeyey.
- **Qiyaas cabbirka:** Badanaa wuxuu ku yaalaa dacalka hoose ee khariirada. Waxaa loo muujiyaa ama looqoraa cabir-qiyaaseedka labada nooc ee kala ah qaabka giraafiga iyo qaabka saamiga midkood.
- **Jahada** waaxaa loo dhigaa qaabka sumadd ama calaamada ah aalaa waxaa la isticmaalaa xarafka “↑” oo u taagan waqooyi (w) oo ay la socoto falaadh tilmaameed kor ujeeda.
- **Taariikhda** waxay na tustaa ama noo cadaysaa xilliga khariirada lasameeyey. Waxaa wanaagsan kuwa ugu sameyska dambeeyey in aan isticmaalo, sababtoo ah waxaa dhici karta in xog waranku uu noqdo wax la soo dhaafay oo ay wax iskabadaleen.
- **Furaha:** wuxuu inoo fududeeyaa fahanka waxa ay u taaganyihiiin sumadaha iyo calaamadaha lagu isticmaalay khariirada.

Hawl-galka 2.9



I Wuxuu inoo fududeeyaa fahanka waxa ay u taaganyihiiin sumadaha iyo calaamadaha lagu isticmaalay khariirada.

Isku aadi kuwan soo socda:

- | | | | |
|---|---------------|-------|---|
| 1 | Jahada | _____ | Calaamadaha iyo Summad aha |
| 2 | Taariikhda | _____ | Ogaanshaha halka ay goobi deris ahaan dhacdo |
| 3 | Qiyaas Cabbir | _____ | Inay khariir adu tahay mid xilli hore ama cusub |
| 4 | Fure | _____ | Helida fogaanta u dhaxaysa |

Sumadaha iyo Calaamadaha Khariirada

Khariiraduhu waxay isticmaalaan sumado (astaamo) iyo calaamado u taagan muuqaalada dhulka dushiisa ah. Way dhib badantahay in lagu sawiro ama lagu dhigo muuqaalada khariirada korkeeda iyagoo sida ay dhulka dushiisa ay ugu yaalaan ah ama u'eg. Sida daraadeed ayaa loo adeegsadaa astaamaha iyo calaamadaha kala duwam ee matalaya muuqaalada dhulka dushiisa ah, Midan


ayaana u suurta galinaysa isticmaalayaashu in ay si fudud (dhibyar) u akhristaan una fahmaan khariiradaha.

Sumadaha iyo calaamadaha aasaasiga ah ee khariirada waxaa loo qeybiyaa saddex qaybood. Kuwaas oo kala ah: *dhibco, xariiqo, iyo kuwo bad leh.*



Jaantuska 2.12: caalamadaha khariirada

Waxaa kale oo jira sumado iyo calaamado kale. Kuwaas oo ah sawiro, garaafyo, iyo qaar jaantusyo ah. (fiiri Jaantus 2.13)




Jaantuska 2.13: Calaamadaha Khariidadda

Sidee ayaa muuqaalka dhulka loogu dhigaa ama loogu sawiraa khariirada korkeeda? Bal aynu soo qaadano khariirada Laba goobood midi waa magaalo mida kalena waa dhul baadiye (miyi) ah. Muuqaalada sida buuraha, wabiyada, bannaanada i.w.m ee kharii rada korkeeda ah waxaa lagu muujin karaa xariiqaha loo yaqaano xariiqaha marsinada siman. Xariiqaha marsirrada siman waa xariiqaha isku xidha goobaha joogoodu isla'egyahay ee ka sareeya heerka badda.

Xariiqahan marsinada siman waxay isticmaalaan oo ay leeyihiin midabo kala duwan si ay u matalaan jooga kala duwan ee dhulka.


Tusaale: Biluuga; wuxuu u taaganyahay biyaawga (badweynada, wabiyada; haraha i.w.m.), midaba Cagaarka iyo Jaalahana waxay utaaganyihiin oo ay matalayaan dhulka hoose, halka midabaka Canabkana uu u taaganyahay dhulka sare ee buuraleyda ah.



Jaantuska 2.14: calaamadaha khariirada

Waxaad sumadaha iyo calaamadaha aan soo sheegnay qaarkood ka arki doontaa khariiradan soo socota (Jaantuska 2.15). Khariiradani waa muunad si qoto dheer u muujineysa dhul miyi ah oo ku yaala deegaanka Tigreega.

Khariirada noocan an waxaa loo yaqaanaa khariirada ha muuqaaleed.




Jaantuska 2.15: Khariirad muuqaaleed oo muujinaysa dhul miyi ah oo ku yaala deegaanka Tigreega

Sumadaha iyo calaamadaha loo isticmaalo in lagu muujiyo muuqaalada kala duwan ee meelaha magaaladu way badanyihiin. Jaantusyada soo socda ayaa na tusaya qaar ka mid ah sumadaha iyo calaamadaha la isku waafaqay ee caalamiga ah.

 Dugsi	 Masaajid
 Kaniisad	 Cusbataal ama Rug-caafimaad
 Safaarad	 Makhaayad (Hudheel)
 Xabaalo (kiristan)	 Xabaalo (muslim)


Jaantuska 2.16: astaamaha iyo calaamadaha khariirada

Waxaa jira astaamo iyo calaamado ay khariiraduhu u isticmaalaan markay muujinayaan ama na tusayaan isgaadhsiinta sida wadooyinka iyo wadada tareenka. Waxaa kale oo jira calaamado iyo sumado ay khariiraduhu adeegsadaan marka ay tilmaamayaan baahsanaanta kheyraadyada dhaqaale, dadweynaha, iyo dagaamada.



Jaantuska 2.17: astaamaha iyo calaamadaha khariirada

Sidee ayaa xaaladaha Jawiga (cimilo maalmeed) iyo cimilada loogu muujiyaa khariirada? Heer kulka, Roobka, Cadaadiska hawada i.w.m. way ku kala duwan yihiin goobilaa goob. Kala duwanaanshaha xaaladahaas cimilo ee aan soo sheegnay ayaa iyana loogu muujin karaa ama tilmaami karaa khariirda dusheeda iyadoo la adeegsanayo sumadaha iyo calaamadaha.



Jaantuska 2.18: Sumaadaha iyo calaamadaha loo adeegsado cimilada

Marka la rabo magaalo in khariirad lagu muujiyo, oo waliba si fudud oo la fahmi karo loo muujiyo waxaa lagama maarmaan ah in sumado iyo caalaamado tira badan ay ku yaalaan khariiradaas. Waxaa hoos ku sawiran khariirada qeyb kamid ah caasimada Addiis Ababa.



Jaantuska 2.19: khariirada magaalada Adiis Ababa



Hawl-galka 2.10

- 1 Qeex erayga khariirad.
- 2 Islafalanqeeya ardayda fasalkiina faa' iidooyinka khariiradaha.
- 3 Sharax saddexda qeybood ama kooxood ee sumadaha iyo calaamadaha ah.
- 4 Sumadee iyo calamadee ayaad ka aqoonsan kartaa khariirada muuqaaleed ee Jaantuska 2.15 _____?
- 5 Sheeg sumadaha iyo calaamadaha loo isticmaalay khariirada magalada Addiis Ababa ee Jaantuska 2.19 _____?
- 6 Sawir khariirad gacmeeda Afrika adiga oo tilmaamaya daafaha xog-waran ee khariirada.

SOO KOOBIDA CUTUBKA

- Saddexda lakab ee dhulka waxay kala yihiiin lakabka sare lakabka dhexe iyo bu'da ama lakabka hoose.
- Waxaa tusaale wanaagsan uga soo qaadan karnaa lakabyada dhulka, ukun biyo lagu dhexkariyey.
- waxyaabaha ugu waa weyn ee uu dhulka lakabkiisa sare ka kooban yahay waxaa weeye dhadhaabo, carro iyo biyo.
- saddexda nooc ee ugu waa weyn dhadhaabaha waa dhadhaab shiileed, dhadhaab lakabeed iyo dhadhaab dhalan rogan.
- meertada dhadhaabaha waa habka noocyada dhadhaabahu ay ugu badalmaan ama isugu badalaan nooc kale.
- khariirad maskaxeedu waa khariirada qofku maskaxdiisa ugu sawiran.
- Khariirad waa muuqaalka sawir ee uu taagan qeyb ama dhamaan dhulka ee ku taala shay ama wax fidsan.
- Khariiraduhu waxay leeyihii nidaam afgarasho oo lagu fahmo.
- waa in uu qofku marwalba eegaa dacalada xogwaran inta uusan bilaabin akhriska khariirada.

SU'AALAH GEBO GABADA CUTUBKA

I *Run ama Been*

Ka jawaab suaalahan soo socda oo tii run ah ku qor Run tii been ahna Been ku qor

- 1 Khariiradu waa sawirada dhulka oo lagu sawiro shay wareegsan.
- 2 Waan akhrin karnaa waanan fahmi karnaa khariirad inagoona baranin adeegsiga (isticmaalka) khariirada.
- 3 Midabka biyaha (sida biyaha badweynado, badaha, wabiyada, harooy inka i.w.m.) ee khariirada korkeeda waa huruud.
- 4 Inagoo ku salaynayna samayskooda ayaa dhadhabaaha waxaa loo qeybiyaa saddex nooc.
- 5 Baatoolka iyo Gaaska dabiiciga aha waxay la xidhiidhaan dhadhaabaha lakabeeda.

II *Meelaha banana buuxi*

- 1 _____ waa lakabka ugu kulul ee dhulka.
- 2 _____ waa xariiqqa isku xidha meelaha jooga isla'eg leh ee ka sareeya heerka badda.
- 3 _____ waa lakabka ugu qarada yar ee dhulka.
- 4 _____ waa dhagaxa danabka leh ee ka samaysma markii gaasaska ka soo firxaday dab-holaca folkaanaha dibada u soo baxay ee uu qaboobay.
- 5 _____ iyo _____ waa xaaladaha dhaliya isbedelada qaab-dhismeedka iyo soo bixida dhadhaa baha gudaha dhulka.

III *Ka bixi jawaabo kooban*

- 1 Waamaxay faraqa u dhexeeya khariirad maskaxeed iyo khariirada Gacmeedka?
- 2 Sheeg waxtarada ama faa'iidada khariiradaha.
- 3 Waa nooceee nooca dhadhaab ee deegaankeena kubadan?
- 4 Maxay kulatahay in ay sababtay in uu dhulka gudihiisu yeesho cadaadis iyo heer kul aad u sareeya oo dhadhaabaha ugu badala nooc kale?

- 5 Tax muuqaalada dabiiciga ah ee aad ku aragtay khariirada [Jaantska 2.15](#).

IV Hawl-gal ficol ku muujin

- 1 Sawir khariirad gacmeedka wadada aad martid ee u dhaxaysa gurigiina iyo Dugsiga.
- 2 Wuxaan keentaaan dhagaxaan kala duwan oo muunad ah, waxaana idin ka caawin doona dhanka noocyada ay muunadaha dhagaxa aad keenteen kala yihiin macalinkiina.

V Kadooro

Ka dooro jawaabta ugu haboon

- 1 Kuwan soo socda keebaan ahayn lakab ka dhulka?

B	Magma	J	Bu'da
T	Dhadhaab lakabeed	X	Oogada sare
- 2 Noocyadan dhadhaabe ee soo socda kee baa ku dul samaysma oogada sare ee dhulka kaliya?

B	Dhagaxa danabka	J	dhagaxa dhalan rogan
T	Dhagax lakabeed	X	Garaaneyt
- 3 Kuwan keebaan sharaxaynin faaiidada khariidadaha?

B	Khariidadaha waxaa adeegsada dalxiisayaasha
T	Waxay tilmaamaan goobaha horumarku ka socdo
J	Waxay tilmaamaan baahsanaanta kheyraadyada
X	Waxay u adeegsadaan inay tusaan magacyada shaqsiyaal taxan.

CUTUBKA GEYIGA IYO ISBEDELA DIISA



Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Marka uu dhamaadoo cutubkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Aqoonsadaan baahsanaanta, waxtarka iyo qodobada ama arrimaha saameeya dhirta iyo xayawaanada duurjoogta ah ee Afrika.
- Inay aqoonsadaan sida loo heli karo iyo dhibaatada ka jirta kheyraadyada ilaha biyaha lacabbi karo laga helo.
- Garwaaqsadaan hababka lagu dhawro khayraadka dabiiciga ah.

Tusmooyinka Muhiimka ah

3.1 DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUURJOOТА AH

3.2 BIYAHА, CARRADA IYO HAWADA

3.3 TALLAABOOYINKA DHAWRISTA KHAYRAADKA DABIICIGA AH

- *Soo kobidda cutubka*
- *Su'aalo ka kooban cutubka oo dhan*

HORDHAC

Ma xasuuusataa waxaad ku soo baratay fasalka shanaad iyo lixaad?

Waxaad fasalka shanaad iyo ka lixaad ku soo kala barateen dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah ee Geeska iyo Bariga Afrika.

Fasalkana, waxaad ku baran doontaan dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah ee Afrika dhamaanteed.

Cutubkan wuxuu ku saabsan yahay:

- Baahsanaanta iyo kala duwaanaanta dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah ee Afrika.*
- Qodabada saameeya baahsanaanta dhirta dabiiciga iyo xayawaanada duurjoogta ah.*
- Waxtarka dhaqaale iyo faa 'idooyinka cilmbaadhista sayniseed ee ay leeyihin dhirta iyo xayawaanada duurjoogta ah.*

3.1

DHIRTA DABIICIGA AH IYO XAYAWAANADA DUURJOOGTA AH

Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Aqoonsadaan iyo inay tilmaamaan dhirta dabiiciga ah ee Afrika oo ay khariirad ku muujiyaan
- Inay kala soocaan duurjoogta muhiimka ah ee Afrika.
- Ka doodaan sida uu xidhiidhku uga dhexeeyo dhirta dabiici ga ah iyo xayawaanaka duurjoogta ah ee deegaankooda.
- Fahmaan dhirta iyo xayawaanku inay qeyb ka yihiin geyiga
- Islafalanqeeyaan xaaladaha (qodobada) aadamuhu ku waxyeeleeyaan xayawaanada duurjoogta ah.
- Xaqijiyaan in xayawaanadu ay dabar go'ayaan haddii laga baabi' iyo sabooyinkooda.
- Kafikiraan waxaan qaban karno ee aan kaga hortagi karno isbadalka cimilada.

Erayada Furaha u ah Cashirka



- | | | |
|-----------------------|---------------------|-----------------------|
| ↳ Dhir | ↳ Geyiga | ↳ Dib-u-dhirayn |
| ↳ Sabo | ↳ Dheecaan | ↳ Dib-kayn uga dhigid |
| ↳ Dhul-cawseed | ↳ Afro-Albayn | ↳ waxyeelayn |
| ↳ Jooga kala saraynta | ↳ Noole kala duwan | |
| ↳ Baahsanida | ↳ Xaalufinta dhirta | |

3.1.1 Baahsanaanta dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah ee Afrika

Dhirtu waxay ka kooban tahay noocya kala duwan oo ay u badanyihin geedaha iyo cawska. Wax kasta oo carada kasoo baxa waa dhir, xataa midhaha aadamuhu beerto ee kadibna uu goosto. Laakiinse dhirta dabiiciga ah waa dhirta iyada oo bani'aadan beerin (wax lug ah ku lahayn) si dabiici ah u baxada una barbaara.

Inkasta oo uunan bani'aadamku abuurin dhirta dabiiciga ah, hadana wuxuu awoodaa in uu baabi iyo oo uu suu doono ka yeelo.

Waxay bixitaanka iyo koritaanka dhirta dabiiciga ah ku xidhantahay oo saameyn ku leh cimilada iyo carrada meesha ay ka baxayso.

Bartilmaameed:

Bani'aadamku wuu baabi'iyaa dhirta dabiiciga ah balse ma uu samayn karo (abuuri karo).

Qodobada ugu waa weyn ee saameeya dhirta dabiiciga ah:

Ma sheegi kartaa qaar ka mid ah qodobada ugu muhiimsan ee saameynta ku leh bixitaanka dhirta?

Ma dhir isku mid ah ayaa ka baxda dhamaan cimilooyinka kala duwan ama dhamaan seerayaasha (soonayaasha) cimilada?

Ma sheegi kartaa geedo ka baxa degaanada dhulka jooga hoose iyo kuwa dhulka jooga sare labadoodaba?

Arrimaha saameeya bixitaanka (koritaanka) iyo baahsanaanta dhirta:

- Cimilada (gaar ahaan heerkulka iyo roobka)*
- carrada*
- noole ili-ma'aragtay ah*
- Biyo mareenada*
- Jooga (saranyata ay meeli ka sarayso heerka badda).*

Bartirmaameed:

Deegaanada buuralayda sare (buuraha dhaadheer) ee Afrika waxaa dhirta diciigiga ah si aad ah u saameeya jooga dhulka. Tusaale, dhulka jooga sare ee Itoobiya, dhulka sare ee Kiinya, Tansaaniya, Ugaandha, iyo Koonfur Afrika.


Cimilada – Cimilooyika kala duwan waxaa ka kala baxa noocyoo kala duwan oo dhir diciiciga ah. Hadii ay deegaan cimiladiisu ay isbadasho ama isbedal ku dhaco, dhirta diciigiga ah ee deegaankaas iyana way isbadali (waxaa ku dhici isbadal ay sababtay cimilada isbadashay). Wuxuu sido kale isbedal ku dhici carrada.

Waxaynu ogsoonahay Afrika in ay leedahay cimilo kala duwan oo qeybo badan u sii kala baxda. Sidaa darteed ayey Afrika u yeelaatay boqolaal nooc oo kala duwan oo dhirta diciiciga ah. Laakiinse inagoo raacayna ujeedadeena ayeynu eegaynaa dhawr nooc oo aasaasi ah. Waxayna yihiin dhawrkaas nooceee dhirta diciigiga ah kuwan soo socda.

1 Keymalayda Rooban ee Kulaalaha

Meesha ay dhacdo (kutaalo):

Keymalaydan rooban waxay ku taalaa kulaalaha, gaar ahaan inta u dhaxaysa loolka 5° ee waqooyiga iyo koonfurta dhulbadhaha ah. Waxay ka koobantahay dhulka saxan-ka Wabiga Koongo iyo dhulka xeebaha Galbeedka Afrika.



Jaantuska 3.1: Keymalayda rooban ee kulaaha

Keymalayda rooban ee kulaalaha waxay gaar ahaan ku taalaa wadamadan soo socda ee Afrika:

- *Jamhuuriyada Dimugraadiga ee Koongo (waa halka ugu dhulka balaadhan ee ay ku xidhiidhsan tahay keymalayda rooban).*
- *Gaboon*
- *Dhulka xeebaha Nayjeeriya*
- *Ikuwaatooriyaal Gini*
- *Siiraaliyoona, Gaana, Biniin, Galbeedka xeebta Angoola, Laybeeriya.*

Cimilada: Keymalayda rooban ee kulaalaha waxay intabadan ku taalaa dhul hoosaad leh joog ka hooseeya 500 m.

- *Waxay helaan roob sanadeed aad u badan ama u sareeyaa kaasoo u dheexeyya 1500 mm to 2500 mm iyo*
- *Heerkul diiran oo joogto ah.*




Hawl-galka 3.1

- 1 Cimilo caynkee ah ayay kaymalayda rooban ee kulaalaha leedahay?
- 2 Sharaxaad ka bixi xidhiidhka ka dhaxeeyaa cimiladan iyo cimiladooyinka kale ee Afrika.
- 3 Sheeg qodobada ugu waa weyn ee saameeyaa baahsanaanta dhirta dabiiciga ah?
- 4 Miyuu deegaanka soomaalida Itoobia leeyahay keymalayda rooban ee kulaalaha? Sabab?

Qaab-dhismeedka dhirta: qaab dhismeed ahaan keymaha rooban waa ay lakabyo badanyihiin. Geedaha ugu dhaadheer oo laga yaabo in uu dherarkoodu gaadho ilaa iyo 50 mitir ayaa ah kuwo sabo (hooy) u ah shinbiro aad u badan iyo xayawaano geedo fuul ah. **Tusaale:** Nooc daanyeero waa weyn (ah) oo loo yaqaano kolumbas.

Dhirta kaymahan ayaa waxay tahay mid aad u dhaadheer oo u kala baratanta ilayska cadceeda si aana looga qarinin.



Jaatuska 3.2: Lakabyada geedaha keymaha rooban ee kulaalaha

Lakabka ugu sareeya wuxuu helaa 70% oo ilayska caddeeda ka imanaya. Waxayna hadheeyaan dhirta ka hoos baxda.


Geedaha ay wadaagaan: geedaha u badan ee kabaxa dhulka kaymaleyda rooban ee kulaalaha waa mahaagani, eboni, roos, loox, ayran woodh (dhuuxa adag) iyo wada cagaaran.

2 Dhul cowseedka kulaalaha (Safaanaha)


Waa maxay safaanuhu? Halkee ayuu kaga yaalaa dhul cowseedka kulaaluhu Afrika?

Erayga Safaanaha waxaa loo isticmaalaa oo sifo ahaan loogu isticmaalaa soonaha dhul cowseedka kulaalaha. Dhul cowseedka kulaalaha wuxuu isugu jiraa oo uu ka kooban yahay dhul cowseed aan geedo laheyn ilaa iyo dhul geedo adkeysi u leh abaarta leh.


Meesha uu ku yaalo (dhaco): dhirta Safaanaha Afrika waxay hadhysaa dhul aad ubalaadhan. Waxaysi guud ugu taalaa inta u dhaxeeyaa keyma layda rooban ee kulaalaha iyo Lamadegaanka Waqooyiga iyo Koonfurta ka ah dhulbadhaha. Dhirta Safaanaha waxay hadhysaa ku dhawaad 65% oo dhulka qaaradaa ah.



Jaantuska 3.3: dhulka ay ku fadhiyaan ama baahsan yihiin dhul cowseedka kulaalahaa iyo dhirta Safaanaha ee Afrika



Jaantuska 3.4: isbedelka dhul cowseedka Safaanaha ee laxidhiidha loolka iyo kala duwanaanshaha roobka (cimilada)




Jaantuska 3.5: La qabsiga dhirta ee dhulka Safaanaha



Hawl-galka 3.2

- 1 Qaaradahee ayaa lagahelaa ama uu kajiraa dhul cawseedka Safaanaha?
- 2 Dhanke buu dhulka safaanuhu ka yahay kaymalayda rooboon ee kulaalaha?
- 3 Maxay yihiiin qodobada saameeya baahsanaanta dhirta safaanaha?
- 4 Marka laga tago (kaco) kaymalayda (dhanka) dhul-cawseedka safaanaha miyey tirada noocyada kala duwan ee dhirtu badanaysaa mise way sii yaraana ysaa? Sabab?
- 5 Deegaanka Safaanaha ma ka baxaan wax dhir ama geedo ah?

Cimilada: Dhirta Safaanaha Kulaalaha waxay leedahay cimilo qoyan iyo mid qalalanba. Celceliska roobeed ee sanadka wuxuu udhexeeyaa 700-1200mm. celceliska heerkuleed ee sanadka wuxuu u dhixeyaa 19°C iyo 27°C.



Joos (Niyjeeriya) 9°54'W, 8°53'E

Jaantuska 3.6: roobka iyo heerkulka Safaanaha.

Dhirta Safaanaha waxay ka koobantahay geedo kala duwan iyo caws. Geeduhi waxay udhexeeyaan kuwo dhaadheer oo cufan (aad isugu dhadhaw ama isku shiilan) ilaa iyo kuwo filiqsan (kala durugsan ama kalafog) oo uu caws dhaadheer ka badanyayahay.

Waxtarka dhaqaale ee dhul cawseedka Safaanaha

Cimilada dhul cawseedka safaanaha ayaa ah mid u dhaqashada Lo'da ku fiican. Waxaa jirta dhir badan oo ka baxda safaanaha taasoo y dadku aad u waxyeleeyaan ama ay aad faragalin ba'an ugu hayaan. Koradhka tirada dadka xoola dhaqata (side dadka xoola dhaqatada ah ee reer Fulaani iyo Tuwaarag) ayaa deegaanka u sababaya inuu deegaanku qarka usaarmo lama dagaanimo.

Hawl-galka 3.3



- 1 Sheeg sida ay dadku faragalinta ugu sameeyaan iyo siday u badalaan (isbadal oogu keenaan) deegaanka Safaanaha kulaalaha.
- 2 Sharax dabeecadaha dhirta Safaanaha.
- 3 Sharax waxtarka dhaqaale ee dhul cawseedka Safaanaha.
- 4 Sharax faraqa u dhaxeeya dhul cawseedka safaanaha iyo dhirta keymalayda rooban ee kulaalaha.


3 Dhirta Lamadagaanka iyo lamadagaan xigeenka

Dabeecadaha Lamadagaanka waxaa kamid ah:

- Biyo yaraan*
- Heerkul aad u sareeyaa*
- Dhirta oo ku yar*
- Koritaanka baadka oo aad u yar*

Tusaha 3.1: xidhiidhka kadhaxeeya roobka iyo dhirta

Caddadka roobka	Natiijada	Nooca dhirta
250 – 500 mm	Lamadagaan- xigeen	Dhir filiqsan (kala durugsan) dhul cawseed geeda tira yar.
25 – 250 mm	Dhul oomana ah lamadag aan)	Geedo aad u tira yar iyo gas (duf caws ah)
< 25 mm	Lamadagaan aad oomane u ah	Dhirtu waxay ka baxdaa oo kaliya marka uu roob da'o kadib



Jaantuska 3.7: Khariirad tilmaamaysa baahsanaanta dhirta lamadagaanka ee Afrika

Qeybta lama dagaan xigeenka ah ee lama dagaanka saxaraha waxaa ka baxda 3,000 oo nooc ama jaad oo dhir ah, kuwaasoo y 20% ka mid ah yihiiin kuwo Afrika oo kaliya u gaar ah.

Lama dagaanada waaweyn waxay ku yaalaan Koonfurta iyo Waqooyiga qaaradda Afrika. Waana kuwan soo socda:

- *Lamadagaanka saxaraha (oo ku yaala Waqooyiga dhulbadhaha)*
- *Lamadagaanka kalahaari (oo ku yaala Koonfurta dhulbadhaha)*
- *Lamadagaanka Naamib (oo ku yaala Koonfurta Galbeed ee qaaradda)*
- ❖ ***Dhirta lama dagaan xigeenka kulaalaha:*** *waxay ka koobantahay – qudhaca (acacia) iyo geedo kale oo qodaxley ah oo tiinka la qoys ah.*
- ❖ ***Dhirta lama dagaanka Kulaalaha:*** *waa qeybaha ugu kulul ee lama dagaan ka saxaraha oo aan wax dhir ah haba yaraatee lahayn. Carradda lamadagaanka ayaa leh dufama gas caws buur buuran ah.*

- Qeybaha kale ee Saxaarahaa waxaa ka baxa geedo gaagaaban oo aan caleen lahayn oo qodax badan kuwaas oo waliba ka durugsan ama kala fogfog (filiiqsan).

Hawl-galka 3.4



- 1 Intooda badan dhirta lamadagaanka waa dhir gaagaaban qodaxna leh oo aan caleemo lahayn. Sabab? Sababta ay saa unoqdeen faah faahi.
- 2 Sharax xidhiidhka kadhixeeya cimilada iyo dhirta?
- 3 Dhirtu waa muraayad cimilada laga daalacan karo (laga arki karo) siday kula'thay adiga.
- 4 Maxay dhirta lamadagaanku u yeelan wayday caleemo? Sabab?
- 5 Noocyada dhirta ee aan soo sheegnay kee bay ka mid tahay dhirta deegaankiina ka baxda?


4 Dhirta meedhitiraaniyaanka

Ma tilmaamikartaa halka uu khariirada aduunka kaga yaalo gobalka meedhitiraaniyaanku?

Cimilo caynkee ah ayuu leeyahay gobalka meedhitiraaniyaanku?

Meesha uu dhaco: gobalka meedhitiraaniyaanku ku yaalaan waaxda Galbeed ee qaarada, inta u dhaxaysa 30° iyo 40° ee Koonfurta iyo Waqooyiga dhulbadhaha.

Dabeecadaha: dhirta meedhitiraaniy-aanku waxay kubaxdaa cimilo kulayl iyo qalayl ah xagaaga oo rooban xiliga jiilaalkaa.



Jaantuska 3.8: Khariirad tilmaamaysa dhirta meedhitiraaniyaanka ee Afrika

Baahsanaanta iyo dabeeecadaha dhirta meedhitiraaniyaanka:

- Geedo kala durugsan (filiqsan) oo leh caleema yar oo ballaadhan.
- Waa ay gaagaaban yihiiin.
- Geeduhi xilli kuma caleema dhacsadaan.
- Koritaankooda ama bixidoodu waa mid aayar ah xilliga qaboobaha rooban ah
- Dhirtu waxay si fiican u baxdaa oo uu bixitaankoodu ku xaddidan yahay xilliyada dayrta iyo guga marka uu heerkulku yahay mid sare.
- Koritaankooda waxaa dib u dhiga xilliga dheer ee xagaaga.

Hawl-galka 3.5



- 1 Maxay cimilada meedhitiraaniyaanku u noqotay mid gaar ah (wax la nooc ah uusan jirin)?
- 2 Qeybtee kale ee Afrika, ayaa leh cimilo tan meedhitiraaniyaanka lamid ah?
- 3 Deegaanka meedhitiraaniyaanku wuxuu leeyahay dhir kala duwan, kuwan soo socda kuwee ayaa kamid ah?

i	Xili walba cagaar ah		
ii	Geedo waa weyn oo kala durugsan		
iii	Dhirta qoyan ee mangiroof		
iv	Cawska Safaanaha		
v	Cawska Gawtiyada leh		
b	1, 3 iyo 4	j	1, 3, 4 iyo 6
t	1, 2, iyo 4	x	3, 4, 5 iyo 6

Noocyada dhirta Meedhitiraaniyaanka

- 1 Keymaha xili walba cagaarka ah:
 - Waxay ka koobanyihiin: dhir isu furan oo abidkeed (sanadka oo dhan) cagaar ah waa meelaha hela roobka wanaagsan ee kabadam 635 mm.
- 2 Keymo (jiq) yar:
 - Nooca dhirta ee kabaxda waxay yihiiin lawreel, mayrttil, arbutus, lafendha iyo roosamaari. Qaarkamidah dhirtan waxaa alaab caydhiin ahaan isticmaala warshadaha soo saara cadarka (baraafuunka).

5 Dhirta Afro-Albaynka (buuraha)

Waa maxay Afro Albayn?

Halkee ayey Afrika kagataalaa ama laga helaa dhirta Afro Albaynka?

Maxay kaga duwantahay noocan dhireed, noocyada kale dhirta?

Meesha ay Kutaalo: Dhirta Afro – Albaynka waxay ku taalaa:

- Dulaha sare ee bariga Afrika (Itoobiya, Kiinya, Tansaaniya iyo Ugaandha)
- Koonfur-Afrika (Buurta dhiraakanisbargi)
- Buurahani waxay ku yaalaan deegaamada ku yaala kulaalaha iyo kulaala xigeenka ee qaarada.




Hawl-galka 3.6

- 1 Waa sidee nooca cimilo ee ka jira dhulka jooga sare ee kulaalaha?
- 2 Ma sheegi kartaa qaar ka mid ah magaacyada buuraha dhaadheer ee kulaalaha Afrika?
- 3 Maxay yihiin dabeecadaha ay wadaagan dhulka buuralayda sare ee kuyaala kulaalaha Afrika?
- 4 Waa tee qeybta Afrika ee ay ku badan yihiin buuraha dhaadheer?

Dhirta Afro-albaynka waxay kabaxdaa Itoobiya iyo dhulka sare ee Bariga Afrika iyo Buurta diraakanisbargi.

Tusaha 3.2: Xidhiidhka ka dhaxeeyaa dhirta buuraha ka baxda iyo jooga

Noocyada keymaha	Jooga (saraynta)
Afromontaane	3000m seeraha ama soonaha dhulbadhaha.
Dhirta Albaynta	3000m kasareeya ama kabaadan
Kaymalayda Baambuu	2000 – 2500 m
Dhirta Abid cagaarka ah ee cimilada dhex dhixaad ka ah kabaxda	Meelaha jooga dhexdhixaadka ah leh
Dhul cawseedka buuraha	Ilaa iyo 2000 m



Jaantuska 3.9: khariirad tilmaamaysa dhirta buuraleyda Afrika

Bartirmaameed

Jooga dhulka ayaa ah mid saamayn balaadhan (weyn) ku leh nooca dhirta ee ay meeli leedahay.

Layliska 3.1




- 1 Ma sheegi kartaa xidhiidhka ka dhaxeeyaa heerkulka iyo jooga?
- 2 Saamayn intee la'eg ayuu jooga dhulku ku leeyahay baahsanaanta iyo nooca dhirta ee ay meeli leedahay?
- 3 Sharax noocyada howla dhaqaaleed ee kajira dhulka ama meelaha sare iyo meelaha lamadagaan xigeenka ah ee Itoobiya?

Sheeko Gaaban

Masayda Cidhib Go'aysa

Masaaydu waa dadyow ku nool dhinaca koonfureed ee dalka Kiinya iyo waqooyiga Taansaaniya. Waxayna u guur-guuraan meel ilaa meel si ay u helaan dhul daaq iyo biyo leh oo u fiican lo'dooda. Lo du waa lafdhabarta nolosha Masaayda lo'da waxay ka helaan cunnadooda sida (caano, dhiig iyo hilib) agabkooda sida (maqaarka lo'da oo ay dhar ka dhigtaan iyo dhiriqda lo'da oo ay ku marqaan guryahooda). Gumeystayaashii reer Yurub ee Afrika waxay mudnaanta siyeeen inay dadka masaayda ahi lo'dooda ugu dhaqdaan six or ah isagana gudbaan dooxada wayn ee Rifti ee Bariga Afrika taniyo markii ugu horaysay ee ay meelahaas soo degeen reer Yurub.

Sannadihii 1840' tirada dadyo wga Masaaydu hoos bay u dhacaysay iyada oo ay ugu wacnayd masiibooyin dabiici ah iyo kuwo dadsame ahba. Reer yurubkii waxay gacanta ku dhigeen dhulka intiisii ugu badnayd saami ahaan. Laakiin dhulkii loo reebay Masaaydu wuxuu ahaa mid xadidan inkastoo dawladuhu ku dadaaleen inay dejyaan hadana intooda badan ilaa iyo haatan waa reer guuraa.



Masayda iyo Dhul-cawseedka kulaalaha ee cidhib go'a Qarka usaaran

Bartilmaameed

Waa xaqiiqoo in dhirta iyo xayawaan ku yihii qeyb ka mid ah gayiga.


Hawl-galka 3.7

- 1 Sheeg waxtarka ay kaymuu u leeyihiin xayawaanada duurjoyta iyo bani'aadamka?
- 2 Xidhiidh nooce ah ayaa ka dhexeeya dhirta dabiiiciga, xayawaanda duurjoogta iyo bani'aadanka?
- 3 Side bay noqon xaalada ban'aadamka iyo xayawankda duurjoogta hadii ay dhirtu ka dhamaato (baa ba'do) dunida oo dhan?

3.1.2 Faa'iidooyinka dhirta dabiiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah

Guud ahaan, dhirta dabiiiciga ah, gaarahaana keymaha ayaa waxay inoo leeyihiin faa'iidooyin aad u badan.

Dhirta cagaaran waa dhir samaysata cuntadeeda. Waxay cuntadeeda ka samaysataa oo ay alaab caydhiin ahaan u isticmaashaa ilayska cadceeda, biyaha iyo macdanta ay carada ka hesho. Xayawaanada dhintay iyo geedaha (dhirta) qalashay ee kadibna dhacd ama burbura ayaa nafaqeeya oo ay macdan ka heshaa caradu. Wuxaan mar kale dib u isticmaala macdantaas dhirta. Hadaba meertadan dhirtu ay ka qaadaay so macdanta carada ee ay iyana marka ay dhimato u nafaqaynayso carada ayaa muhiim u ah jiritaanak nolasha noolaha dunida oo dhan.



Jaantuska 3.10:

Waxtarka dhirta ee silsilada cuntada

Hawl-galka 3.8



- 1 Sharax xidhiidhka meertada ah ee dhanka cuntada dhirtu samaysato iyo nafaqada carada u dhexeeyaa?
- 2 Dhirta dabiiciga ah iyo xayawaana da duurjoogta ah koo dee (mid koodee) ama midkee ayuu waxtarkiisu aasaasi yahay? Madhirta mise xayawaanka? Waayo? Qor habka silsiladeed ee cuntada?
- 3 Sharax sida (habka) ay dhirtu cunada u samaysato. Habab keebay u saamaysaa Geyiga soo saarista Alwaaxa laga ganacsado?
- 4 Ka ganacsiga sharci darada ah ee geedaha laga guro deegaanka, maxaa saamayn ah oo ay leeda hay?
- 5 Saamayn intee le'eg ayay gurida geedaha looxaanta laga dhigo ku leedahay deegaanka?

Faa'iidooyinka ama waxtarada keymuhu inooleyihii waxaa ka mid ah kuwan soosocda:

- *Keymaha waxay naga caawiyaan ilaalinta (dhawrida) deegaanka. Tuusaale: carrada keynta waxay xajisataa roob (biyo) badan.*
- *Waxay ka ilaaliyaan deegaanka nabaadguurka iyo carra guurka.*
- *Waxay ka reebaan ama ka sifeeyaan biyaha socda ee roobka qashinka iyo xaabka.*
- *Waxay ka ilaaliyaan carrada carra guurka (nabeed guurka) Fiiri jaantuska soo socda. [Jaantuska 3.11](#).*
- *Keymuhu waxay cusboonaysiyyaan oksijiinka hawada ee aan neefsano.*
- *Waxay ka yareeyaan ama ka dhimaan hawada kaarboondhaay oksaydh ka marka uu bato.*
- *Waxay hooy u yihiin xayawaanada duurjoogta ah, cayayaano, iyo shimbiraha.*
- *Keymahu waxay inasiiyaan ama aan ka helaa roob. Daraasaadyo lagu sameeyay keymaha Amaasoon ee Baraasiil iyo ta Koongo ayaa waxaa lagu ogaaday in uu roobka afar daloolkii saddex $\frac{3}{4}$ ay keymuhu u celiyaan hawada sare, halka ay laba daloolkii mid $\frac{1}{2}$ noqoto biyo sida daadka kor socda dhulka. Laakiin meelaha aanaan lahayn keynta saamigu wuxuu noqon Lidka saamiga meelaha keynta leh oo laba daloolkii mid $\frac{1}{2}$ oo kaliya oyuu dhulkaasi u celin hawada, afar daloolkii saddex $\frac{3}{4}$ na waxay noqon daad.*




Jaantuska 3.11: keynta rooban (Saxanka koongo)

Natiijooyinka dhir-xaalufintu keento

Waxaa had iyo jeer waxyeelooyin ba'an loo gaystaa dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah. Waxayna saamaynta waxyeelo kaga timaadaa dhanka Aadmaha (sida; caddaadiska dadaka, wacyi galin la'aantaa) iyo qaar dabiici ah sida; cimilada, gubashada duurka iyo kuwo kaloo badan ayaa ka mid ah xaalada ha saameeya dhirta dabiicga ah iyo xayawaanada duurjoogta ah.

Dhir xaalufinta (goynta dhirta) oo ay sababto xaalado kala duwan oo ay ka mid yihiiin.

<ul style="list-style-type: none"> ◊ Beer u banayn (dhulbeereed in laga dhigto darted oo Looguro dhirta) waana xaalufin ◊ Beera shada 	<p><i>Qodashada:</i></p> <ul style="list-style-type: none"> ◊ Dhagaxa nuurada ◊ Macdanta dahabka, luulka iwm iyana way waxyeelaysaa dhirta dabiiciga
<ul style="list-style-type: none"> ◊ daaq ahaan ◊ magaalooyinka yaryar oo balaadhanaya (fidaya), meelaha cufnaanta dadku aadka usarayso ee Afrika, kaabayaasha dhaqaale oo iyana waxyeelo ugaysta keyta iyo dhirta 	<p><i>Gubitaan</i></p> <ul style="list-style-type: none"> ◊ Gubasha soonoq noqota xilliga qalaylka ayaa dhirta jaadka (nooyad waxyeelana gaysata). ◊ Dhirta ama nusqaamisa xayawaanada duurjoogta ◊ Kayamaha waawayn oo kuwa yaryar qariya
Ganacsi dhaqaale iyo shidasho <ul style="list-style-type: none"> ◊ Looxaanta ◊ Xaabo lashito 	Khasaara sabo waxay saameysaa noolaha. qaarkood noocood oo ka dabar go'ay dhul cawseed kii iyo kay mihi roobanaa oo tirtirma.



Jaantuska 3.12: dhir xaalufinta

Natijjooyinka ugu waa weyn ee ay dhirxaalufintu horseedo

- 1 Waxay dhirxaalufintu deegaanka u sababtaa nabaad guur iyo daedad ka fataha.
- 2 Wuxay waxyeelo ugaysataa nolosha xayawaano badan oo ku noolaa dhirta (keynta). Waxayna cidhib-tirtaa noocyoo badan oo dhirta ka mid ah. (Suutideda noocyoo badanta noolaha).
- 3 Waxaa kale oo ay dhirxaalufintu sababtan in ay yaraadaan geedah a ay warshadaha qaarkood u isticmaalaan alaab caydhiin ahaantaa iyo kuwa wax lagu dhistabal
- 4 Waxay keenta isbadal dhanka cimilada ah iyo deegaanka oo ay u horseedo lamadagaanimo.

Baahsanaanta xayawaanada duurjoogta ah ee Afrika

Afrika waxay qani ku tahay kheyraadka naflayda duurjoogtaah. Waxayna leedahay cimilo kala duduwan oo udhexaysa keymalayda rooban ee kulaalaha ilaa iyo lamadagaan iyo lamadagaan xigeen. Kala duwanaanta cimileed ee qaaradda Afrika ayaa sababtay in ay qaaradda laga helo xayawaano badan oo kala duwan.

Xayawaanada duurjoogta ah ee ay guud ahaan wadaagaan Afrika waa xayawaanka naaslayda ah, shinbiraha, xamaarato, xayawaanka barri iyo biyo kunoolka ah iyo kaluunka.

Seerayaasha lagu xanaaneeyo xayawaanada duurjoogta ee Afrika ayaa ah kuwo laga aasaasay (Lagasameeyey) wadamada Afrika intooda badan si loo xanaaneeyo loona ilaaliyo xayawaanka halista ku sugaran iyo deegaanka. Intooda badan gooba

lagu xanaaneeyo xayawaanka ee Afrika waxay kuyaalaan dhulka safaanaha iyo deegaamada buuralayda ah. Seerayaasha ugu caansan Afrika waxaa ka mid ah kuwan hoosku taxan:

Seeraha Qaranka ee Muhiimka	Waddanka
Seregeti-(fiiri Jaantus 3.13 -halkas oo dameerfarow iyo dugaagiiba is daba wareegaysanayaan	Taansaaniya
Ambooseli	Kiinya
Kiruujar	Jamh. Kaafur Afrika
Awaash	Itoobiya
Dooxada Rift	Itoobiya
Maago	Itoobiya
Buuraha Simayn	Itoobiya
Nejsaar	Itoobiya
Buuraha Baali	Itoobiya



Jaantuska 3.13: seeraha qaran ee lagu xanaaneeyo xayawaanada duur joogta ah ee serangeti (Tansaaniya)

Xayawaanada ugu muhiimsan (wiyisha, geriga i.w.m.) ayaa ahaa kuwo si aad ah loogu ugaadhsado gobalka dhul-cawseedka Afrika. Noocyadan iyo kuwa kale oo duur-joog ah ayaa ahaa kuwo si xun loola dhaqmo oo ay daruuri noqotay in la dhawro oo lagu xanaaneeyo seeraha qaran.

Khatar galinta xayawaanada

Marka uu kordho dadweynuhu, waxaa iyana koradha baahida dhul beereed ee dadweynaha, iyo baahidooda dhulka oo ay ka dhistaan guryo (hooy), warshado, wadooyin i.w.m. Hadaba xaggee ayaynu ka heli karnaa dhulkas?

Waxaynu isticmaala dhulka inoo dhaw (hareeraheena ah). Laakiin markaynu barabixino ee aan ka qaadano dhulka (hooyga) xayawaanada iyo dhirta, sidee ayuu noqon xaalka xayawaanada hooygooda laga bara bixiyey? Xayawaanadaas waa in ay daydaydaan goobo cusub oo ay ku noolaadaan. Hadii ay waayaan goob ku filan ama cuno ku filan waa ay dhiman ama way ka qixi deegaankaas oo dhan.



Hawl-galka 3.9

- 1 Xawayaan nooceee ah ayaa jooga ama laga helaa seeraha qaranka ee Buurta Baali?
- 2 Ma taqaana xayawaanada duurjoogta ah ee dunida dhifka ah iyo kuwa u gaarka ah ee laga helo Itoobia?
- 3 Tax magacyada xayawaanada duurjoogta ah ee laga helo deegaankiina (deegaanka soomaalida Itoobiya).
- 4 Waligaa maku aragtay dalxiisayaal deegaankiina ismaamulka soomalida Itoobiya?
- 5 Miyey faa'iido dhaqaale u leedahay deegaankiina dalxiisku?

Soddon sano ka hor deegaanka Soomaalida waxaa ku noolaa xayawaano duur joog ah oo farabadan, sida Maroodiyo Libaaxyo, Haramcadayo, i.w.m. Laakiin hadda wax ka jooga deegaankaas mallaha (majiraan). Waxaana sababay fiditaanka iyo isbalaadhinta dagaamada iyo beeraha.

3.1.3 Qodobada waa weyn ee saameeya dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duur joogta ah

- *Dadweynaha xad dhaafka ah (tirada dadka ee xad dhaafka ah): marka uu kordho dadweynuhu waxaa siyaadaya baahida dhul beereed. Midanayaana keenta gurida iyo goynta dhirta si loo banaysto dhul beereed.*

- Daaqsin la'aan: wadamo badan oo Afrikaan ah oo ay ka mid tahay Itoobiya ayaa waxay leeyihiin xoolo aad u badan oo dhul daaq leh oo la daajio u baahan.
- Hab beereedyo heerkoodu liito (hooseeyo): falitaanka iyo qodashada badan ayaa deegaanka ku keenta iyana nabaadguur.
- Baahida sii kordhaysa ee loo qabo geedaha la shito.
- Saboolnimada: in badan oo wadamada soo koraya ah ayey saboolmimadu sababtaa dadka oo idil in ay ku tiirsanaadaan kheyraadka dabiiciga ah midana waxay keentay in waxyeelo joogta ah loo gaysto dhirta dabiiciga.
- Wacyigaliin La'aan: dadka wadamada soo koraya wacyigalin la'aanta ayaa u sababta in ayna wax qadarin ah siinin dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duur joogta ah.

3.2 BIYAH, CARRADA IYO HAWADA

Marka uu dhamaado cashirkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- ❑ Shaarxaan xidhiidhka u dhexeeya aadamiga iyo biyaha.
- ❑ Isbarbar dhigaan kalana duwi karaan helitaanka iyo yaraanshaha biyaha lacabbo ee Afrika.
- ❑ Tilmaamaan sababaha gundhigga u ah khatarta ka jirta biyaha lacabo ee Afrika.
- ❑ Aqoonsadan halista ka jirta kheyraadka carada ee Afrika.
- ❑ Baadhaan sababaha dhaliya diqawga magaalada ama wasakhawga magaalada.

Erayada Furaha u ah Cashirka



- | | |
|--------------------|-------------------|
| ❑ Dikuawga Biyaha | ❑ Roob-Aysiidheed |
| ❑ Dikuawga Hawada | ❑ Lakabka Osoonka |
| ❑ Dikuawga carrada | |

Fiiri bal waxaad kataqaantid

- 1 Muhiimada ama mudnaanta ay biyuhu u leeyihiin nolasha
- 2 Maxay biyuhu u taraan Aadamaha?
- 3 Xagee baan kahelaa biyaha?

- 4 Maxaynu u isticmaalaa biyaha?
- 5 Biyuhu ma kheyraad dib loo cusboonaysiin karo baa mise ma'aha?

Culimada saynisku waxay xaqiijiyeen in ay jiraan biyo yar oo macaan oo laga helo oogada sare ee dhulka. Intooda ugu badani ee biyaha macaan ee la helayaana waa kuwo ka samaysan barafka. Inta ugu badana waxaa laga helaa cidhifyada dhulka. Biyaha laga helo ee ku jira dhulka hoostiisa ee oogada sare ee qaaraduhu si buuxda uma wada macaana. Biyuhu waa khayraad dib loo cusboonaysiin karo. Helitaanka iyo cadadka biyuhu waa mid ku xidhan:

- i Sameyska goobta laga helay
- ii Suurawga gaadhitaanka goobta
- iii Gudbinta iyo siidaynta dhadhaabaha
- iv Cimilada goobta (meesha).



Hawl-galka 3.10

- 1 Ereyadan soosocda raadi macnahooda:

b Gudbinta t siidaynta	j Biyaha Macaan
---------------------------	-----------------
- 2 Qaabkee baynu ku heli karnaa biyo macaan?
- 3 Waa maxay sa babta biyaha macaan looga helo meelaha cidhifyada dhulka ee uu barafku ku samaysmo?
- 4 Maxay yihiiin faa'iidooyinka ugu muhiimsan ee ay biyuhu inoo leeyihiin?

Tusaha 3.3: kheyraadka Biyaha ee Dhulka

Keydka	Wadarta guud ee Biyaha Boqolkiiba	Boqolkiiba inta Biyaha macaana ah
Badwaynada Barafka	97.54	–
Biyaha hoose ee dhulka	1.81	73.9
Haraha iyo Togogga	0.63	25.7
Milix	0.007	–
Xareed	0.009	0.36
Gibilka	0.001	0.04

Bartirmaameed

Dal-dalloolada dhadhaabaha waa kuwan sida dhagax-ciideedka, kaas oo leh meelo daldaloola oo sida milixda oo kale ah ee uu dhagaxu ka kooban yahay. Waana kuwa u ogolaada inay dhadhaabuhu sii daayaan biyaha si fududna ay uga sii gudbaan.

3.2.1 Waxtarka biyaha

Biyuhu waa lagama maarmaan (daruuri) aad muhiim ugu ah oo u wanaagsan caafimaadka Aadamaha. Jidhka bini'aadamka 40-60% ayaa biyo ah. Wuxuuna jidhka aadamuhu ka helaa biyaha cadad yar oo macdano ah.

Waa maxay sababta aynu ugu baahanahay biyaha mar hadii aan ka helayno cadad yar oo macd an ah kaliya?

Waxaa jira xaalado (sababo) dhawr ah oo ugu wacan sababta ay biyuhu binu-aadanka muhiim ugu yihiin waxaana sababahaas ka mid ah kuwan soo socda:

- *Biyuhu jidhkeena ayay qaboojiyaan. Waxa aynu dhacdadan dareenaa markii aynuu dhididno.*
- *Waxaa jira kiimikooyin badan oo ku jira oogada jidhkeena oo ku qasmi kara biyaha oo keliya.*
- *Biyuhu waxa ay inoo sahlaan markii aynu cunnada cunayno.*
- *Biyuhu waxay inaga caawiyaan qaadista (saarista) waxyaalaha uskaga ama wasakhda ah (sida saxarada, kaadida, iwm).*

Qofka hana-qaadka ahi (wayn) wuxuu u baahan yahay maalin kasta laba litiroo biyo ah. Waxaa jira dad badan oo aan biyo badan cabin, balse si dadban ayay uga helaan raashinka ay cunaan.

Isticmaalka iyo helidda biyaha Afrika

Afrika waxay ka mid tahay qaaradaha ugu hodan san ee caanka ku ah kheyraadka biyaha, laga bilaabo togaga yar yar ilaa haraha waa weyn iyo waliba biyaha ku keydsan dhulka hoostiisa. Webiyada iyo harooyinka ugu badan ee qaaradda waxay ku yaa laan wadamada ka hooseeya saxaarahaa. Tani waxay inoo caddaynaysaa in ayna kheyraadka biyuhu si siman (isla'eg) ugu baahsanayn qaaradda Afrika. Sababta ugu waynee keentay in ayna biyuhu si isle'eg qaarada ugu baahsanain ayaa ah kala duwanaanshaha gobal-ahaaneed ee xadiga roob da'a.

Guud ahaan, biyaha Afrika hadii si sax ah loo xisaabasho (loo jejebsho) way

ku filaan doontaa. Inkasta oo ay Afrika hodan ku tahay biyaha, hadana ilaa iyo haatan waxaa ka jira qaybo badan oo qaarada ah yaraansho biyaha la cabi karo.

Waa maxay qodobada ugu muhiim san ee saameeya ka faa iidaysiga biyaha? Ka faa iidaysiga biyaha waxaa saameeya qodobadan soo socda:

- Hantida*
- xoog-shaqaale oo xirfad leh*
- Siyaasad ku lifaaqan qorsheyaal wakhtiga dhow iyo wakhtiga fogba.*
- ka gun-gaadhida kheyraadka biyaha*
- Kaabayaasha adeeg*

Caddadka biyaha la isticmaalo way ku kala duwan yihii dalalka iyo gobalanduba. Hadii aynu isbarbar-dhig samayno, dadka ku nool Afrika way ka biyo isticmaal yar yihii dadka dalalka horumaray.

Waddamada Afrika laf ahaantooda way ku kala duwan yihii dhanka yaraanta iyo helidda biyaha la cabi karo. Helidda iyo caddadka biyaha la cabi karo waxay ku xidhan tahay dhaqaalahi iyo qaab samayska uu waddan lee yahay.

Sababaha dhaliya wasakhawga biyaha lacabo

Bartirmaameed

Diqawgu waa wax kasta oo ka dhiga nawaaxiga (agagaarka ama deegaanka) waxaan nadaafad laheyn ama caafimaad daro u keena.

Dikhawga biyaha

Waa sidee xaalada biyaha wabiyadeena iyo harooyinkeena? Biyaha sida caadiga ah waxaa wasakheeya:

- Wasakhda ama qashinka ay dadku ku daadiyaan*
- sunta caya yaanka oo lagu daadiyo*
- Wasakhda aan loo baahnayn ee ay warshaduhu sii daayaan*
- Sunta haramaha*
- Kiimikooyinka loo isticmaalo nafaqaynta carrada.*

Hawl-galka 3.11




- 1 Iskuday in aad booqatid hadii uu jiro wabi idiin dhow kadibna, waxaad hubisaa in uu wasakheysanyahay iyo in kale. Iskuday waliba hadii uu wasakheysanyahay in aad garatid oo aad tilmaantid wasakhda ama diqawga waxa u sababay wabiga.

- 2 Isku day in aad aqoonsatid kadibna aad caddaysid halka ay ka soobilaabmayaan ama ay kaga imanayso wasakhda dikhawga ku dhalinaysa biyaha wabiga aad daraasaadka kusamaynaysid.
- 3 Hadii ay magaaladiinu leedahay warshado, baadhitaan ku samee in ay wasakheeyayaal siidayso ama kabaxaan iyo in kale. Aad goobta caafimaad ee kuugu dhow oo kala hadal dhakhaatiirta caafimaad ee goobtaas hadii ay jiraan arrimo caafimaad oo laxidhiidha diqawga biyaha.

3.2.2 Dikhawga hawada

Diqawga hawada waxaa sababa wax qabadyada aadamaha. Waxyaabaha wasakhda ama dikhawga hawada ku dhaliya waxay kasoo baxaan warshadaha, gaadiidka, tamarta (waxyaabaha la shito sida qoryaha ama xaabada, shidaadlka, i.w.m.) hubka Nukleerka, keemikaalada iwm. Hawo dikhawgu wuxuu sababaa kor-ukaca kulaylka dunida kaa soo loo yaqaano saameynta guriga cagaaran.




Jaantuska 3.14: saamaynta Guriga cagaaran

Gaasaska (Walxaha neefta oo kale ah) qaar ka mid ah sida kaarboon-dhaay oksaaydhka, Meetaan (methane) iyo kilooro-flooro kaarboona oo ah kuwo ku xeeran dhulka. Waxay u ogolaadaan ama soo daayaan ilayska ama kulka shucaaca Cad-ceeda si uu udiiriyo dhulka iyo hawada.

Diqawga hawada waxaa kale oo dhici karta in uu sababo in ay khafiifto qarada jarka Oosoonka (dahaadh-hawooyin oo dhulka ka difaaca kulka qoraxda ama shucaaca halista galin kara noolaha ku nool dhulka).

Oosoonku wuxuu dhulka u jiraa oo uu kor ka yahay ilaa iyo 25 km.

Marka hawo dikhawgu waxuu diciifinayaad adayga difaaceed ee uu Oosoonka nagaga difaaco ilaysyada ama shucaayada cad-ceeda ee halista ku ah dhamaan noolaha dhulka dushiisa ku nool. Kadibna waxaa soo gaadhi dhulka aan ku noolnahay shucaacyada cad ceeda ee loo yaqaano Altara-faylet oo ah kuwo halis ku ah dhamaan noolaha dhulka (dunida) kunool waxayna sababaan kansarka maqaarka aadamaha iyo koritaanka dhirta.



Jaantuska 3.15: Dahaadhka-kaah fal dhawrka oo ka dalooshamay God ku aadan Anta-aartika

Ilaha ay ka yimaadaa waxyaabaha dikhawga ku dhaliya hawada – Ilaha ugu daran ee ay ka soo baxaan waxyaabaha dikhawga ku dhaliya hawada waxaa ka mid ah:

- *Baabuurta iyo warshadaha*
- *Qoryaha (xaabada) iyo dhuxusha lashito*
- *Warshadaha dhaliya awooda kul (tamarta kul)*
- *Gubashada gudaha mashiinka*
- *Diyaaradaha, maraakiibta, iwm.*

3.2.3 Dikhawga Carrada

Diqawga carrada waxaa sababa qashinka iyo hadhaaga warshadaha. Qashinka ama hadhaagan waxaa laga yaabaa in ay ku jiraan walxo keemikaala sida biro kumilma dhul beereedyada. Carrada waxaa kale oo dikhawga ku dhaliya qiqa

ka baxa warshadaha dhaliya awooda kulka. Warshadaha dhaliya awooda kul waa ilaha biraha suntan leh (daxalaystay) ee wasakheeya carrada. Carrada ku wasakhawda biraha daxalaystay ama suntan leh sida biraha kadhmiyam, Liidh, i.w.m, waxay raaci karaan ama gali karaan silsilada cuntada. Khudaarta, midhaha iyo cunooyinka kale ee ku baxa carrada oo ay waxyeeleeyaan biraha suntan leh waxay sababi karaan dhimasho.

Kiimikaalada sida kuwa bacriminta carrada ee aan dabiiciga ahayn, sunta cayayaanka iwm ee loo isticmaalo dhul beereedyada waxay waxyeelo u leeyihii caafimaadka aadamaha.

Waxaa kale oo isna keena carro-dikhawga qashinka hadhaaga warshadaha ah. Hadaba si carrada looga ilaaliyo dikhawga, waxaa haboon inaan qaadano talaabooyinkan soo socda ee aan hadhaag iyo qashinka warshadaha kaga ilaalinayno waxyeelada ay carrada ugaysan lahaayeen:

- 1 In aan u isticmaalo oo aan ku buuxino dhismayaasha wadooyinka, sii ayna qashinkaas warshaduhu carrada dikhaw ugu dhalinin oo aysan wasakhoodu ugaadhin (waxyeelynin) dhul beereedyada.
- 2 In hadhaaga la daweyyo in ta aan la daadinin (la qubin) si uu san carrada u waxyeelaynin.

Sababaha dhaliya dikhawga Hawada magaalooyinka

Dikhawga hawadu waa masiibo kale oo dhibaataysa deegaanka. Diqawga ama wasakhawga hawadu kuma koobnaato deegaan ama wadan kaliya. Sababto ah, waxyaabaha dikhawga ku dhaliya hawada ee ka jira deegaan kuma ekaanayaan halkaas oo kaliya ee dabaysha ama hawada ayaa u si gud binaysa deegaamada kale.

Waxyabaaha ugu waawayn ee keena diqawga hawada waxay ka soo baxaan warshadaha, baabuurta, xero dhiigta (goobta xoolaha lagu gawraco), iyo warshadaha dhaliya awooda kul. Tusaale ahaan, sanad kahor, warshada shamiitada Adhiis Ababa, taasoo ku taalay agagaarka (xaafada) layiraahdo Nifaassilki ayaa waxay ahayd mida ugu daran ee hawada wasakheynaysa ama wasakhda hawada ee ugu badan kasoo baxdo.

Isha kale ee dikhawga ku dhalisa hawada ayaa waxay tahay xera-dhiigta Adhiis Ababa taasoo uu ka soobaxo Ur aad udaran. Inkastoo dhibaatadaas dhimid lagu sameeyey hadda, waa ay adkaan jirtay markii hore in dariiqyda u dhow la maro

urka dartii. Dadka daggan nawaaxiga xeradhiigta ayaa waxaa lagu qasbay in ay iskaaga guuraan oo ay meelo kale dagaan.


Waxyaabaha wasakheeya ama dhaliya dikhawga hawada waxay xataa ka gudbaan xuduudaha caalamiga ah oo ay dhul dheer maraan ama gooyaan. Hawada dikheysan ama wasakheysan ee ka soo kacada meel fog, waxay wasakheyn kartaa hawada meel walba oo aduunka ka mid ah, maadaama ay hawada caalamku wareegayso. Dhibaatada ugu daran, hadii ay si joogta ah u siidaynayso gaasaska ama hawooyinka uu kaarboon dhayoksaydhku ka mid ka yahay.

Dhibaatada kale ee uu hawo-dikhawgu sababi karo ayaa waxay tahay in uu soo daayo roob Aysiidheed. Roobkan waxuu ka dhashaa marka ay kaarboon dhayoksaydhka, salfar dhaay oksaaydhka iyo Naaytroojiinku laga siidaayo saldhiga quwada gubashada.

Roob Aysiidheedku wuxuu carrada ka qaadaa ama, kadhameeyaa kaalshiyamka iyo Almooniyamka.

Waxaa kalae oo sababa dikhawga hawada kiloro flooro kaarboona (KFK); CFC oo ah mid ka kooban kilooriin, flooriin iyo kaarban.

KFK wuxuu la falgalaa gaaska Oosoonka (O_3) kadibna waxuu khafiifiyaa jarka Oosoonka ee ku yaale hawada inaga saraysa. Waxayna keeni arintaas in ay shucaacyada khatarta ah ee cad-ceeda ee loo yaqaano Altiraa – faayoleet ay ka soo gudbaan soona gaadhaan dhulka dushiisa, waana shucaacyo haday bataan keena kansarka maqarka joojiyana korintaanka dhirta.



Jaantuska 3.16: Wasakhaynta Hawada

3.3**TALLAABOOYINKA DHAWRISTA
KHAYRAADKA DABIICIGA AH**

Marka uu dhamaado casharkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Laxidhiidhiyaan dhowrida dhirta dabiiciga ah ilaalinta ama dhowrida khayraadka kale.
- Ka doodaan xakameynta diqawga biyaha iyo hawada
- Muujiyaan xiisaha ay kaga qeybgalayaan ilaalinta nadaafadda biyaha si loogu isticmaalo guryaha.

3.3.1 Ilaalinta Biyaha

Waa maxay macnaha dhawrida khayraadka? Maxaynu u ilaalinaa (dhawraa) carrada? Maxay yihiin talaabooyinka laqaado si loo ilaaliyo carrada?

Dhawrida khayraadku waa ilaalinta iyo si wanaagsan u isticmaalka khayraadka dabiiciga. Afrika waxay ka mid tahay qaaradaha Aduunka ugu khayraadka biyaha hodansan. Balse walii ma ayna si buuxda iyo si haboon toona u isticmaalin khayraadka biyaheeda ee buuxa, oo walli waxaa jira dad aad u badan oo aana helin biyo nadiif ah oo lacabi karo.

Biyaha oo aad muhiim ugu ah dhamaan noolaha oo dhan ayaa hadana ah kuwo wasakhoo bay oo ah waliba kuwo si aanan haboonaynay u isticmaalaan aadamuhu. Marka waa in talaabooyn lagu dhawrayo laqaado si loo helo biyo wanaagsan (aan wasakhaysnayn) oo inagu filan hadaan Afrika nahay qaar ka mid ah talaabooyinka ugu muhiimsan ee lagu dhawrayo biyaha ayaa ah kuwan soo socda:

- 1 Iyadoo la sifeeyo kadibna dib-loo isticmaalo biyaha wasakhaystay.
- 2 Biyaha oo loo sameeyo biyo xireeno iyo barkado lagu kaydsado si loogu isticmaalo waraab ahaan, kaluumaysiga iyo dalxiiska.
- 3 Waxaa biyaha wasakhaysan saafi lagaga dhigi karaa iyadoo la isticmaalo daawooyinka kala duwan ee biyaha.
- 4 Iyadoo tababaro ku saabsan sida biyaha loo ilaashado iyo sida loo keydsado la siiyo bulshada (dadka).
- 5 Dhirta oo dib loo beero (dhirayn) iyo iyad oo waliba dhir cusub lagu

beero deegaanka si looga hortago daadka oo ay biyuhu dhulka hoos u galaan.

3.3.2 Dhawridda Xayawaanada duurjoogta ah.

Sidee ayaynu u dhawri (ilaalin) karnaa xayawaanada duurjoogta ah?

xidhiidh cayn kee ah ayaa u dhexeeyaa xayawaanada duurjoogtaah iyo dhirta dabiiciga ah?

maxay tahay sababta aan u ilaalinayno xayawaanada duurjooga ah?

Ka fikir waxaad ka taqaano ama aad ka ogtahay

- *Xaalada xaywaanada duurjoogta deegaankiina ee wakhti xaadirkan*
- *Xaalada ay ku suganyihin wakhti xaadirkan xayawaanada duurjoogta ee Itoobiya.*

Sii yaraanshaha ama nus qaamida xayawaanada duurjoogta ayaa ah masibada ugu daran (halisan) ee deegaamada Afrika.

Aadamaha ayaa saamayn daran ku haya xayawaanada kala duwan ee duur joota ah.

Dhibaatooyinka ugu waawayn ee keena ka siidarida ama sii xumaanshaha aan ka soo raynta lahayn ee xayawaanka iyo dhirta Afrika waa:

- | | |
|--------------------------------|--------------------------------------|
| ○ <i>Dhir-xaalufinta</i> | ○ <i>Daaqsinta xad dhaafka ah</i> |
| ○ <i>Gubashada duurka</i> | ○ <i>Ugaadhsiga sharci darada ah</i> |
| ○ <i>Abaaraha soo noqnoqda</i> | ○ <i>Lamadagaanayn</i> |

Talaabooyinka dhowrida ama ilaalineed?

- *Dib-u-dhiraynta iyo ilaalinta dhirta kaymaha*
- *In lasameeyo seere qaran oo lagu ilaaliyo xayawaanka laguna xakameeyo ugaadhsiga sharci darada ah*
- *Wacyigalinta dadka reer miyiga ah.*
- *Dhawrida carrada*

Carradu waxay kamid tahay kheyraadyada ugu muhiimsan ee ay nolosha aadamuhu ku tiirsan tahay. Waxaynu ogsoonahay sidaan horayba u soo sheegnay in ay carrada Afrika si aad ah hoos u dhac iyo nusqaan ay ku keeneen sababaha aan horay u soo sheegnay. Qaar ka mid ah taalaabooyinka lagu dhawro ama ilaaliyo

carrada ayaa waxay yihiin:

- | | | | |
|-----|----------------------------|----|---|
| i | Meegaarka | iv | Qodaal marsineed |
| ii | Beero iyo Dhirayn labadaba | v | qodaalka habka liid liidka |
| iii | Dhir kubeerid (dhirayn) | vi | Gabaad (Deyr) loo sameeyo dhul beereedyada. |

SOO KOOBIDA CUTUBKA

- ❑ Afrika waa qaarad leh xaalado cimilo oo kala duwan oo u dhaxaysa cimilada keymalayda rooban ilaa iyo cimilada lamadagaanka.
- ❑ Afrika waxaa loogu deeqay dhir dabiici ah iyo xayawaanaa duurjoog ah oo kala duwan.
- ❑ Isbaahinta iyo kaladuwanaashaha dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta waxaa saameeya ama sabab u ah kaladuwanaanta cimilo (roobka, heerkulka) iyo carrada iwm.
- ❑ Dhirta Afrika waxay qarka u saaran tahay (halis u tahay) in ay guud ahaan dhamaato ama baaba'do iyada oo ay sababtu tahay cadaadiska dadweynaha abaaraha, gurrida ama xaalufinta dhirta iyo nabaad guurka.
- ❑ Afrika waxay kamid tahay qaarada ugu hodansan xayawaanada duurjoogta.
- ❑ Dhibaatada ugu weyn ee xayawaanada duurjoogta ah ee Afrika haysata waxay tahay Ugaadhsga sharci darada iyo u daryeel La'aan, xaalufinta dhirta, gubida (dabka), abaaraha iyo gaajada.
- ❑ Waa in la qaad talaaboonyin daryeel si siwanaagsan oo tayo leh loo isticmaalo kheyraadka dabiiciga ah.

SU'AALAHAG EBOGABADA CUTUBKA

I *Kaga jawaab su'aalahan soo socda tii run ah "Run" tii been ahna "Been".*

- 1 Geedka yuukalibtas waa qayb ka mid ah baadka dabiiciga ah.
- 2 Dhul-cawseedka safanuhu wuu is bedelaa markii ay is bedelaan roob da'a iyo joog kala saraynta dhulku.
- 3 Nooca baadku wuu is bedelaa markii loo eego dhigaha.
- 4 Biyuhu waa kheyraad dabiici ah oo dib loo cusboonaysiin karo.

II *Buuxi meelaha banaan*

- 1 Deegaanka kuyaala Afrika ee leh jooga hoose, roobka badan, iyo keynta cufan waa _____.
- 2 Dabeecadaha deegaanka Lamadagaanka ah waa _____, _____, _____ iyo _____.
- 3 Si guud, qeybta Afrika qaniga (hodanka) ugu ah xayawaanada duurjoogta waa _____.
- 4 _____ waa wax kasta oo deegaanka ku keena nadaafad darro iyo caafimaad xumo.

III *Qor jawaab gaaban*

- 1 Waa maxay qdobada saameeya baahsanaanta baadka dabiiciga ah?
- 2 Waa maxay dhawritaanku? Maxay tahayse sababta aynu ahmiyada wayn u siinayno?
- 3 Sharax xidhiidhka ka dhexeeeya dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duur joogta?
- 4 Maxay yihiin waxtarada keymaha ama dhirta.
- 5 Afrika waxay kamid tahay qaaarada ugu hodansan kheyraadka biyaha. Sidey kulatahay?

IV *Ficil Ku muujin*

- 1 Sawir muuqaalka guud ee khariirada Afrika kadibna muuji Shanta seere (soone) ee waaweyn ee dhirta.
- 2 Qor warbixin kooban oo ku saabsan dhirta dabiiciga ah iyo xayawaanada duurjoogta ee deegaankiina.

- 3 Kasoo qaad waxaad socdaal kumartay laga bilaabo buurta Kilmaanjaaro ilaa iyo Koongoo Kinshaasa. Maxaad arki ama kuumuuqan oo isbadal dhanka dhirta ah?

V *Ka dooro*

Ka dooro jawaabta ugu haboon

- 1 Ka soo qaad inaad socdaal ku marto Buurta kilimanjaaro ilaa Koongo. Waa maxay faalada aad ka bixin doontid adiga oo u tixgelinaya isbedelada dhirta?
- B Kala duwanaanshaha, dhirtu way sii korodhaa
 - T Kala duwanaanshaha dhirtu way sii yaraataa
 - J Cufnaanta dhirtu way sii yaraataa
 - X Kala duwanaanshala dhirtu isma bedasho
- 2 Calaamadee weedha saxan
- B Baadka waxaa saameeya cimilada
 - T Cimilada iyo dhirtu malaha wax xidhiidh ah.
 - J Carrada ay meeli leedahay waxaa saameeya cimilada oo kaliya
 - X Meelaha kala duwan ee leh dhirta isku midka ah waxay leeyihiin nooc cimilo oo isku mid ah
- 3 Safaanuhu waa?
- B Dhirta kaymaha ee gobolada kulaalayaasha
 - T Dhul cowseed ka kulaalaha ee isugu jira dhirta iyo cawska
 - J Dhul-cawseedka nooca cimilo kul-dhexaadka ah ee leh cawska kaliya
 - X Nooca baadka ee u adkaysta cimilada qalalan

CUTUBKA ARRIMAH DADWAYNAHA

4



Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Markii uu dhamaado cutubkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- ❑ Lafaguraan raad-reebka bulsho-dhaqaalo ee cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) ka ku yeesho Afrika.
- ❑ U kuur-galaan saamaynta ay maamul suuban la'aantu ku leedahay Afrika.
- ❑ Aqoonsadaan juqraafiga guud ahaaneed iyo bartilmaameedka urur goboleedyada qaaradda Afrika.
- ❑ Lafa-guraan raad-reebka dhakhso u taranka tirada dadka Afrika.

Tusmooyinka Muhiimka ah

- 4.1 ARRIMAH LA XIDHIIDHA DADWEYNAHA.
- 4.2 ARRIMAH XUQUUQDA IYO BADBAADADA.
- 4.3 BARNAAMIJKA ISKAASHIGA.
 - *Soo kobidda cutubka*
 - *Su'aalo ka kooban cutubka dhamaantii*

HORDHACA

Dadka ku xeel-dheer barashada ama dersida tirada dadku waxay si wayn uga soo horjeedaan saamiga laga qaylinayo ee korodhka tirada dadka Aduunka. Sannadkii 1650kii waxay tirada dadka ee dunidu ahayd 500 milyan, waxay isku shareertay oo ay gaadhay 6 bilyan taariikhdu markii ay ahayd 2009 kii waxaana la filayaa markii lagaadho sannadka 2013 da inay tirada dadka Aduunku gaadhayso 7 bilyan.

Koritaankan dhaqsaha leh waxaa weheliya ahmiyad siinta iyo raadreebka Cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis, kaas oo noqday Arrimaha dadwayne ee Afrika mid xagga hore kaga jira, dalalka ka hooseeya saxaarahaa Afrika ha ugu daraadeene. Marka laga yimaado hadaba gaar u ahaanshaha arintan, isku dheelitir la'aanta khayraadyada la heli karo iyo baahida sare u kacaysa ee ay dadku u qabaan kheyraadyadan, waxaa ku soo biiray ama ku darsamay xuquuqda Aadamiga, xuquuqda caruurta maamul wanaaga iyo ka badbaadinta bulshada shilalka oo sidoo kale u muuqda sida Arimaha dadwaynahaa gaar ahaan Afrika. Dalalka Afrika waxay kulamo ka yeesheen Arrimahaan iyaga oo isku dayaya inay taageero caalami ah u helaan Islamarkaana samaysanaya urur-goboleedyo iyo kuwo ilaa heer qaaradeed ah.

4.1 ARRIMAHAA LA XIDHIIDHA DADWEYNAHA

Marka uu dhamaado casharkani kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- ❑ Aqoon u yeeshaan, Islamarkaana ay lafaguraan faafida iyo raadreebka Cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis ka ee qaarada Afrika.
- ❑ Faahfaahiyaan natijjooyinka ugu waawayn ee ka dhasha koritaanka dhaqsaha leh ee tirada dadka Afrika.
- ❑ Ka soo qoraan warbixin ku saabsan saamaynta ay ku yeelatay korodhka dhaqsaha leh ee tirada dadku deegaamadooda.

Erayada Furaha u ah Cashirka



- ❑ Arimaha Dadwayne
- ❑ Baahsanaanta
- ❑ Maamulka

- ❑ Raad-reeb
- ❑ Shaqo li'ida

Way ay iska caddahay in tirada dadka ee qaarada Afrika iyo xataa duniduba ay in badan aad u kordhayso. Tani waxay sawir ka bixinaysaa kadib qiyaasta tira koobka laga helay ee ay xaqiijisay Hay'ada Qaramada Midoobay ee caafimaadka

Aduunka ee loo soo gaabiyo (WHO), Baanka Aduunka (WB), xafiiswaynaha tirada dadka Aduunka (WPB). Arrimaha la xiriira koritaanka tirada dadka ee Afrika iyo Aduunwaynahaba waa kuwo heerkii la rabay in looga wada hadlo ka hooseeya sida Arrimahaan soo socda ee hoos ku xusan.

4.1.1 Faafidda iyo saameynta Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka ee Afrika

Maxaad ka taqaanaa waxa uu yahay Cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis, miyaadse aragtay inta uu dilay ee u dhimatay Fayraska degaankiina?

Sida aad ogsoon tiiin Ej-Ay-Fi/Aydhis waa Cudurka dilaaga ah ee hogaamiya Cudurada ka jira qaarada Afrika. Wuxuuna si wayn u haleelay Cududii shaqaale ee kabaysay dhaqaalaha.


1 Faafidda Ej-Ay-Fi/Aydhis (HIV/AIDS) ka ee Afrika

Toban iyo labo dal oo ka mid ah dalalka Afrika ayaa la xaqiijiyay in dadka da'doodu u dhaxeyso 15 ilaa 49 jir ay tobankii hal ka mid ah uu qabo cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis-ka. Qaybaha qaarkood ee ka tirsan Afrika ee uu Cudurkani haleelay 40% (Boqolkiiba Afartan) waa da'da loo yaqaano hanaqaadka ama waxsoosaarka lahayd.

Bartilmaameed

Ku dhawaad 70% dadka uu hayo cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis ku waa dadka ku nool dalalka ka hooseeya saxaaraaha Afrika gaar ahaan, todobada dal ee ku yaala Afrika dhinaceeda koonfureed ee kala ah:- Bootiskaana, Iswaasilaand, Jamhuuriyada koonfur Afrika, Lisoota, Naamiibiya, Saamibiya iyo Simbaabwi oo loo aqoonsaday dalalka uu sida ba'an u saameeyay cudurkani halista ah ee Ej-Ay-Fi/Aydhisku).

Faafida Cudurka ee qaarada Afrika arrimaha ugu waa weyn ee sababa waxaa ka mid ah kuwan ku xusan jaantuskan hoos ku yaala.



Jaantuska 4.1: Khariirad-goobeed ku tusaysa Arrimaha sababa faafida Ej-Ay-Fi/Aydhis



Hawl-galka 4.1

- 1 Magacaw cudurada dilaaga ah ee Afrika gaar ah aan degaankiina.

Tusaale: Duumada (Malaariyada)

Kadib, qalin ama midab casmariya kuwa hogaaminaya ee ugu horeeya sida Ej-Ay-Fi/Aydhis oo kale.

- 2 Sawir khariirada Afrika, kadibna ku calaamadee midabka casaanka ah dalalka ka hooseeya saxaarah, adiga oo midabka huruuda ahna u isticmaalaya todobada dal ee ugu daran dhanka saameynta cudwrka Ej-Ay-Fi/Aydhis.
- 3 Sawir naxashka qof u dhintay Ej-Ay-Fi. Tilmaan Arrimaha sababay in uu qofkaasi u geeriyyoday, adiga oo u isticmaalaya khariirad goobeed iyo fahaadho ka soo horjeeda Naxashka.

2 Saameynta Ej-Ay-Fi/Aydhis ka ee Afrika

xusuusnow inay Afrika tahay qaarada uu sida wayn u asiibay Ej-Ay-Fi/Aydhis. Waa mid cad in saamaynta Ej-Ay-Fi/Aydhisku markii aad aragto qoysas badan oo dhibaneyaal ah oo jira. Maanka geli ama ku hay suaalahan soo socda:

Imisa caruur ah ayaa ku agoomawday Aydhiska aawadii? Imisa qof oo da'waawayn oo noqotay tuugsadeyaal ama u baahan in la caawiyo noqotay?

Hadda, bal aynu isku dayno inaynu barano ama ogaano saamaynta Ej-Ay-Fi (Dilaaga u hogaansha) wuxuu leeyahay saamayn badan.

Kadib markii ay noqdeen da'dii waxtarka lahayd dhban ayaal oo saamaysay waxbarashadii iyo waaxihii kale ee adeega.

Waxay tirtirtay tiradii dadka. Waxaa lagu qiyasay tirada dad ka ee hoos uga dhacays Afrika:

- Sannadka 2013 ilaa 26 milyan oo qof
- sannadka 2050 ilaa 77 milyan

Saamiga korodhka dhimashada dadku waa mid ku xidhan tirada dadka.

Ej-Ay-Fi/Aydhis

Baabiinta tirada dadku waxay markale natijadeedu noqotay:-
Hoos u dhaca xoogii shaqaale ee firfircoona.
Hoos u dhaca cunno siintii.

Tirtiridu waxay markale keentay

- Xoogii shaqaale oo yaraada
- Cunno yaraan

4.1.2 Waxyabaha ka dhasha dhakhsa u koradhka tirada dadka

Ma sharixi kartaa natijjooyinka ugu waawayn ee ka dhashay koriinka dhaqsaha leh ee Tirada dadka Afrika?

Miyaad u kuur gashay koriinka dhaqsaha leh ee tirada dadka dagaankiina?

Ma fahamtay waxa looga jeedo koriinka dhaqsaha leh ee dadka?

Koriinka dhaqsaha leh ee dadku wuxuu ukordhay si labalaab ah mudo gaaban gudaheed iyada oo loo tixgelinayo koriinka dhaqsaha leh ee dadka waxaa jira laba aragtiyood oo lid isku ah.

Waxaana loo tixgelyaa cawaaqib koriinka dhaqsaha leh ee tirada dadka labadaan aragtiyood ee aasaasiga ah ee iska soo horjeeda.

Bartirmaameed

- *Dadku waa kheyraadka ugu muhiimsan ee Tignoolojiga iyo Adamiga cusub oo ka Jawaab kara korodhka dadka.*
- *Fiditaanka tirada dadka ee natijada korodhka soo saarista cunada oo sababay dhibaa tooyin deegaan iyo dhaqaale.*

Tirada dadka ee Afrika waxay u dheeraynaysaa si ka badan sida qaaradaha kale. Dalalka ka hooseeya saxaarahaa Afrika oo keliya ayaa ay ku noolyiihin 700 milyan oo qof. Tiradani waxay labalaabantay 1960 meeyadii. Qoysasku waxay leeyihiin celcelis ahaan 6 caruur ah markii la barbar dhigo 4 ay haystaan celcelcs ahaanta Aasiya iyo dalalka laatiinka.

Markii laga reebo Jamhuuriyada Koonfurta Afrika, waxaa jira koriin aan isku dheelitirnayn iyo kheyraad la heli karo. Tani way caddahay markii loo kuurgalo koriinka degdega ah oo ay ka dhalatay natijada xaaladahan soo socda:

- *Isku dheelitir – la'aanta ka dhaxaysa kheyraadyada iyo Baahida*
- *Shaqo la'aanta*
- *Saboolnimada*

Isku Dheelitir la'aanta ka Dhaxaysa kheyraadko iyo Baahida

Xidhiidhka ka dhexeeuya tirada dadka iyo kheyraadyada waxay dadku ahmiyada siin jireen kumanaan sanno. Tusaale konfiyuushas, oo ahaa Filasoofer konfiyushaaskii shiinihi hore ayaa sheegay in koradhka xad dhaafka ah ee tirada dadka ay yaraysay waxsoosaarkii shaqaalaha halkii qofba ayna sababtay hoos udhaca heerka nolaleed.

Filosooferada casriga ah waxay soo bandhigeen in korodhka tirada dadka ee sida bilaa saamiga ah ugu wajahan horumarka kheyraadka uu ka badinayo isku filaanshaha cuno ayna horseedayaan masiibooyin.

Maanta, isu dheelitir la'aantu waxay noqotay mid aad u badan, gaar ahaan qaaradda Afrika. Waxaa middan si cad loogu faahfaahiyay (sharxay) hoos:

Isbadelka kheyraadka
haddii uu yahay mid dib loo
cusboonaysiin karo.

1:2:4:6: . . .

Isbadelka koriinka tirade dadka

1:2:4: 8: 16: 32.64 . . .

Isbadalka kheyraadka waa mid ku socda (koriin ama horumar) ka yar isbadalka koritaanka tirada dadka. Hadaba waxaad ogaataan isudhelitir la'aantan aan la xakamayn karin ay tahay mida keentay yaraanshaha kheyraadyada, tartanka loogu jiro kheyraadyada iyo duruufaha dhaqaale.



Hawl-galka 4.2

- 1 Qiimeyn ku samee badeecadaha kheyraadka keymaha ee dagaankiina adigoo isbarbar dhigaya xaalka ay haatan ku suganyihii iyo toban sano ka hor siday ahaayeen.
- 2 Haddii ay xaaladani sii socoto, soo jeedi sida uu xaalka mustaqbal ee dagaankaas ku dambeyn doono.

Shaqa la'aanta

Shaqa-la'aantu waa xaalada meel ee ayna dadku ka heli Karin fursado shaqo. Wuxaan sababi kara:

- Maalgelin la'aanta
- Isku-dheeli tir la'aanta ka dhaxaysa shaqa-doonayaasha iyo shaqooyinka la heli karo.

Inkasta oo ay shaqo la'aantu ay ka jirto meel kasta oo dunida ka mid ah, hadana waxaa ugu darajo saraysa qaarradda Afrika. Xoogii shaqaale ee ugu firfircoonaan dadka ku nool Afrika kuma hawlana waaxda ganacsiyeed ee ay ka tabcan lahaayeen si ay dakhli, mushaar u heli lahaayeen. Waxaa layaab leh in waaxaha casriga ah ee shaqooyinka dawliga iyo kuwa shakhsiyadka ee waaxdan ayna ka shaqaynin in ka badan 10% oo xooga shaqaale ah. Meelaha miyiga ah ee aan beeraha laheyn waxaa ka shaqeeya xooga shaqaale 10 – 20% oo ah xooga shaqaale ee miyiga.

Saboolnimo

Saboolnimadu waa waayitaanka aasaaska nolasha taasoo dadka u horseedi karta sillic ku noolaansho ilaa heer dhimasho gaadha. Wuxaan lagu qeexaa:

- *La'aanta waxyabaha wanaagsan ee lagama maarmaan ka ah.*
- *Waayitaanka aasaaska aqooneed iyo isgaadhsiinta.*
- *Sharaf dhac, kalsooni daro iyo isxushmeyn la'aan.*

Inkasto saboolnimada aynu kalmado guud si qoto dheer ugaga soo hadalnay, hadana halisnimada masiibadeedu waa lagu kala duwan yahay qaarad ilaa qaarad, dalal ilaa dalal iyo bulsho ilaa bulsho.

Tusaale:

Xariiqqa saboolnimada ee loo go'aamiyay wadamada Laatiin Ameerika waa labo doolar maalintii.

Xariiqqa saboolnimada dalalka warshadaha leh waa 4 doolar maalintii.

Xariiqqa saboolimo ee Afrika waa dadka 1 doolar maalintii hela.



Jaantuska 4.2: Muuqaalka Saboolnimada Afrika

Afrika waxaa lagu tilmaamaa in ay tahay qaaradda ugu saboolsan dunida. Waxaa waliba si gaar ah u leh dabeecadahan inta ka hoosaysa saxaraha. Saboolnimadu waa aas-aaska dhibaatada qaaradda Afrika 1980^{dii} iyo 1990^{dii} waxaa si dhab ah hoos ugu dhacay dakhligii qaarada. Tani oo ay macnaheedu tahay in ay Afrikaanka intiisa badan ay helaan cuno ka yar intii ay waalidiintood heli jireen.

Saboolnimada Afrika waxaa lagu sharaxi karaa sidan soo socota:

- *Nafaqo darro saameysa qofkasta oo Afrikaan ah.*
- *Afrikaan badan ayaana helin cuno qaadasho leh barootiino caafimaadkooda ugu filan.*
- *Malaariyada oo disha ku dhawaad 1 milyan oo caruura sanadkii.*
- *Dad lagu qiyaasay 20 milyan oo Afrikaan ayuu indha la 'aan u sababay gooryaanka faafa ee qaniinka dakhsiga madaw ee laga helo daafaha wabiyyada qulqulaya.*
- *Dad gaadhaya shan milyan oo uu asiibay cudurka juudaanka.*
- *Waxaa dadka Afrikaanka ah Cimrigooda celcelis ahaan lagu qiyaasaa in uu gaadho 52 jir, halka dadka Waqooyiga Ameerika celcelis ahaan cimrigoodu gaadho 76 jir.*
- *Wadamada Afrika ee ka hooseeya saxaraha oo 30kii qofba mid ka mid ah uu hayo cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhis.*
- *Marka laga reebo dalka Koonfurta Afrika, Afrika inteeda badan waa beeraley iyo xoolo dhaqato.*
- *Ku dhawaad kala badh, kow iyo labaatan ama laba iyo labaatan waddan ayaa soo maray dagaalo sokeeye, jinsiyadeed iyo diimeedba.*

Maxay yihiin wadooyinka ugu haboon ee lagu dhimi karo ka sii darida saboolnimada iyo soo afjaritaankeeda?

Saboolnimadu waa halgan joogta ah. Dadka qaarkii waxay kor isaga hayaan saboolnimada. Halka ay kuwo kalena Miskiinimo iskaga sugan yihiin ee ay qaar kalena maskiinimadu u cusub tahay.

Shaqsiyaadka, qoysaska iyo Bulsha weynta

Isticmaalka hantida/lacagta raasamaalka ah oo la yareeyo islamarkaana ladhiso istiraateejiyado lagaga kaban karo iyo kuwo lagula dagaalamayo saboolnimada.

- ***Raasamaalka Dhaqaale*** – *dhulka xoolaha nool, shaqaalaha guryeynta iwm. Dhamaan kheyraadyadan ayaa ah kuwo bixinaya aasaaska socodsiiya dakhliga soo gala.*
- ***Qiimaha Bulsho iyo siyaasadeed*** – *waxaa ka mid ah kaalmada caawimo, aasaasida ururo bulsho kuwaasoo shakhsiyaadka u dhisa kaabad ay hayadaha dawlada caawimo kaga helaan.*
- ***Qiimaha deegaan ahaaneed*** – *waxaa weeye in lafahmo in uu deegaanka dabiiciga ah yahay hanti in si fiican looga faa'iidaysto tahay.*

- *Qiimaha shakhsii ahaaneed* – *Qiimaha ugu weyn ee shakhsiyaadku waa in ay ahaadaan kuwo caafimaad qaba iyo in la adkeeyo sidii ay u yeelan la'haayeen xifado iyo farsamooyin si ay isugu fillaadaan.*

Mudnaanta ay Dawladu siisay la-dagaalanka saboolnimada

Waxaa jira qorshayaal badan oo ay dawladuhu isugu dayayaan in ay ku yareeyaan saboolnimada sida:

- *Dajinta habab kala duwan oo loogaga hortagayo saboolnimada.*
- *Xoojinta Nabada*
- *Xakameynta Ej-Ay-Fi/Aydhis*
- *Soo bandhigidda isbadelada taageerada siinaya dadka masaakiinta ah.*
- *Bulsho ama koox u ololaleysa sidii loo gaadhi lahaa iskaashi.*



Hawl-galka 4.3

- 1 Imisa caruur ah ayay lee yihiin qoysaska dalalka ka hooseeya saxaraha?
- 2 Nidaamka (habka) sida saxda ah ay isigu xigaan sababaha iyo cawaaqibka koritaanka dhakhsaha ah ee dadka keebaa ah kuwan soo socda?
 - b Shaqo la'aan — baahida — koriinka dhakhsaha ah ee dadka — saboolnimada
 - t Koriinka dhakhsaha ah ee dadka — baahida — shaqo la'aanta — Saboolnimo
 - j Cuno yaraan — koriinka dhakhsaha ah ee dadka — baahida — shaqo la'aanta
 - x Koriinka dhakhsaha ah ee dadka — shaqo u tartanka (u baratanka) — shaqo la'aanta — saboolnimada.

4.2 ARRIMAHAD XUQUUQDA IYO BADBAADADA

Marka uu dhamaado casharkan kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Qeexaan xeerka caalamiga ah ee UN-ta ee ku saabsan xuquuqda caruurta.
- Tilmaamaan gabood fallada xuquuqda caruurta ee ka dhaca goobaha ay daganyihii.
- Bartaan sida ay naftooda uga ilaalil lahaayeen gabood fallada xuquuqda caruurta.

- Bixiyaan tusaalooyin iyo inay sharaxaan maamul suuban la'aanta Afrika.
- Qoraan warbixin gaaban oo ku saabsan maamulul wanaaga iyo maamul xumada ka jirta dagaamadooda.

Erayada Furaha u ah Cashirka



- | | |
|----------------------|--------------------------------|
| → Xuquuqaha | → Waajibaadyo |
| → Xuquuqda caruurta | → Gabood fallaka (xad-gudubka) |
| → Xuquuqda Aadamaaha | |

Ka fikir waxa aad ka taqaanid

Waxay dadku inta badan islaafalanqeeyaan arrimaha xuquuqda oo ay waliba ku andacoodaan in ay wax walba xaq u leeyihii ee:

- *Miyaad aamin santahay in uu qofku xad la'aan uu wax walba xaq u leeyahay?*
- *Maxaa loola jeedaa gabood fallada xuquuqaha?*

Bartilmaameed

Xuquuqda waxaa ka mid ah xornimo u dhaqanka uusan qofku wax u gaar ah oo aan wanagsaneyn samaynaynin.

Dabeecadaha ugu muhiimsan ee xuquuqda waa:

- *Wax ay shakhsiyaadku ku andacoodaan ama aydalbadaan, laakiin wax kasta oo lagu andacoodaa ma uu noqon karo xuquuq. Sida xuquuqda in aad qof danahaaga shakhsii ahaaneed u weerartid.*
- *Waxa uu shaksi dalbanayo ama uu ku andacoonyo waa in uu aqoonsi (aqbalid) uu ka haystaa bulshada.*

Tusaale ahaan, xatooyadu waa wax aan la aqbali karin oo xad-gudub ku ah nidaamka xuquuqaha ee bulsho kasta.

- *Ugu dambayntii waxaay sax u aragto ayay xukuumadu u turjumi ama u badali kalmado sharci oo qoran kadibna waxay noqon kuwo helay ogolaansho (aqoonsi) sharci ahaaneed.*

Arrimaha xuquuqda iyo Badbaadada

Waxaa jira xuquuqda aan si gaar ahaaneed ugu andacoono sida xuquuqda dumarka, xuquuqda caruurta, xuquuqda aadamiga, xuquuqda dimuqraadiyeed iyo xuquuqaha qowmiyadaha, quruumaha iyo xuquuqda dadka naafada ah.

Xuquuqda Haweenka

Haweenka Itoobiya waxay leeyihiin xuquuq lagu damaanad qaaday dastuurka JDFI qdobkiisa 35^{aad}, qdob hooseedyasha 1, 2 iyo 7. Arrin taas darteed:

- *Haweenku waxay xaq u leeyihiin inay xuquuqahooda ku faa'iidaystaan iyo dhawrida uu u dhawrayo (ilaalinayo) dastuurku si la mid ah xuquuqda raga.*
- *Haweenku waxay leeyihiin xuquuq la siman raga marka ay guurka wadaagayaan (marka ay is guursadaan).*

Waxuu Dastuurku u fasaxayaa haweenka xuquuq ay wax ku kasbadaan, ku maamulaan isticmaalka iyo kala bedalida hantida.



Jaantuska 4.3: Caruur shaqaale ah

Daraasadeed si gaar ah looga tixraacay Itoobiya

Dhibanayaasha ugu badani waa dumarka da'da yar iyo gabdhaha (hablaha) oo inta badan laga dhigto shaqaale ama laga ganacsado jidhkooda. Waxaa wiilashana laga dhigtaa dhul-nadiifiyayaal, alaab iibiyayaal wadada dhinacyaheeda wax ku

iibiya, qasab ku tuugsadayaal, dukaan iibiyayaal, beero qodayaal, iyo xamaaliin meela badan oo dalka ka mid ah siiba magaaloooyinka waa weyn ee gobolada ama kililada iyo magaalada Addis-Ababa laftigeeda.

4.2.1 Ladagaalanka ku xad gudubka xuquuqda caruurta

Xuquuqda caruurta iyo waajibaadyadooda waa kuwo ku cad diiwaano badan sida bayaanka Qaramada Midoobay (“UN”) ee xuquuqda caruurta, axdiga ay Afrikaan ku wada sixiixeen ee xuquuqda iyo u samafalka caruurta iyo dastuurka JDFI qodobkiisa 36^{aad}. Dastuurka JDFI wuxuu xaqijiyay xuquuqaha iyo waajibaadyada caruurta ka saaran bulshada ay la nool yihiin.

Laakiin marmarka qaarkood caruurta waxaa saameeya dagaalada. Waxaana lagu qasbaa in ay waddamadooda ka qaxaan dagaal iyo dhibaatooyin kale dartood.

Waxaa inta badan xuquuqda caruurta loogu xad gudbaa siyaabo badan. Kuwa ugu badan waxaa ka mid ah:

- *In badan oo dalalka soo koraya ka mid ah ayaana caruurta la diwaan galinin dhalashadooda.*
- *Waxaa jira caruur badan oo xoog loogu adeegsado goobo xaaladeedu ay halis tahay.*
- *Caruur badan oo yaraanta lagu guursaday darteed ay cuduro badan ugu dheceen.*
- *Caruur badan oo aan helin daryeel waalid oo waalid la 'aan ah.*
- *Caruur badan gaar ahaan gabdhaha oo dhibanayaal dhanka gal moodka iyo gudniinka fircooniiga ah.*



Jaantuska 4.4: Aabe ciqaabaya wiilkiisii

Bartirmaameed

- Ma akhlaaqbaa mise xuquuq in la ciqaabo ilmaha?
- Ma lagama maarmaan baa in caruurta la jidh dilo si looga saxo edeb darada?

Xuquuqdu waa wax sharciyaysan markay xukuumadu (dawladu) u badasho sharciyan.

Sida loola tacaalo ku xad gudubka xuquuqda caruurta

- Waa in ay qaramadu xushmeeyaan kuna dhaqmaan qaynuunka iyo xeerarka xuquuqda caruurta ee ku cad baaqyada kala duwan ee caalamiga ah ee xuquuqda caruurta.
- Dawladuhu inay xoojiyaan xuquuqaha caruurta ee dastuuradooda.
- Dawladuhu waa inay qaataan talaabooyin lagu daryeelayo caruurta
- Xukuumaduhu waa inay adeegyada. Mac-hadyada sida gaarka ah uga shaqeeya daryeelka iyo waxbarashada caruurta gacan ka siyyaan.
- Dawladuhu waa inay ka ilaaliyaan xadgudubyada jidh ahaaneed ama maskax ahaaneed ee khatarfa ah, galmaada iyo xadgudubka ururada ka ganacsada.
- Waa in loo ururiyo si nidaam sharci ah oo ay caruurstu ka helayaan xuquuqda.
- In la kordhiyo wacyi gelinta dadka sida xun ula dhaqma ee halista ku ah caruurta iyadoo loo marinayo warbaahinta iyo waxbarashada.
- Dawladuhu inay ka waantoobaan in lagu shaqaysto caruurta da 'doodu ka hoosayso 15 jir inay ka dhigtaan ciidamada qalabka sida.
- Caruurtu waxay haystaan fursado ay si fiican oo xor ah wax ugu baranayaan iyo adeegyada kale ee bulsho.
- Caruurtu waxay awood u leeyihii inay bartaan xuquuqdooda iyo waajibaadlyadooda dugsiga dhexdiisa tusaale: barashada maadada Milgaha Qaranka (civic). Ee manhajka dugsuyada
- Xukuumad uhuna waa inay fuliyaan wax qabadyada civics ka (milgaha qaranka) si ay bulshadu uga shaqayso u samafalida caruurta.

Bartirmaameed

- Xuquuqaha dastuur ahaaneed waa inay xukuumaduhu hubiyaan.
- Waa inay xukuumaduhu ka Jawaabaan caruurta dacwadahooda.

Hawl-galka 4.4



- 1 xuquuqihiiна iyo waajibaadyadiина isla falanqeeya ee qoyskiina ku saabsan.
- 2 Waa maxay ku xad gudub xuquuqeed ee dagaankiina? Waa maxay aragtida ku wajahan xuquuqdiina ee ay ka qabaan dadka ku dhaqan dagaamadiina?

Sheeko gaaban

Waayo-aragnimada cunug yar oo askari ah oo ka soo jeeda Bariga Timoor (east Timor).

Isaga laftigiisa ayaa sidan u sharaxaya:

“Markii aan qoriga haleelay 14 jir ayaan ahaa oo ahayd markii iigu horay say. Isla wakhtigaas oo ahayd markii uu aabahay xanuuunsaday oo aan bedelay meeshiisii. Qorigii iigu horeeyay ee aan qaado wuxuu ahaa FBP (Ray fal yar) Anigu xaqqihiyan aad baan u Jeclaa. Markii aan dagaalada ka qayb galay ma garanayn sida loo tago jiida hore ee dagaalka (safka hore) xataa anigoo jeclaa qoriga. Waxaan ahaa wax aad u yar. Waxaan iska joogi jiray xaga dambe oo aan ciidamada ku taageeri jiray ereyo dhiiri gelin ah iyo qalabba...”



Jaantuska 4.5: sawirka cunug yaroo Askari ah

Hawl-galka 4.5



Isku day si aad u heshid jawaabta su aasha adiga oo la falanqaynaya saaxiibadaa. Ma sharci baa in caruurta la shaqaaleeyo oo laga dhigo askar xaga dagaalada markii loo eego xeerarka caalamiga ah?

Xuquuqaha shucuubta, Qowmiyadaha iyo Quruumaha Itoobiya

Ayada oo loo eeggayo dastuurka Jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya (JDFI) qodobka 39aad qodob hoosaad kiisa 5aad waxaa lagu xusay:

“Qowmiyada, Quruumo ama shucuub” waa koox-dadeedyo wadaaga dhaqan caam ah ama caadooyin isku eg, luuqo mudakar ah oo sifudud loo fahmi karo wax guud aaminsan ama xiriir xaga aqoonsiga ahi ka dhixeyyo, oo wadaaga nafsiyad ahaan wax qabsi guud, wada degan iyaga oo is a qoonsan lehna xuduudo lae yaqaano”.




Hawl-galka 4.6

Adigoo ka tixraacaya qeexitaanka sare dhamaystir tusahan hoose.

Tiro	Qowmiyad Quruun/ Ismaamul	Luuqada	Wada degeetaan	Aaminsa naan guud (Diin)
1	Tigray			
2	Afar			
3	Shucuubta koonfureed			
4	Oromoda			
5	Soomaalida			

Intaa waxaa u dheer in dastuurka JDFI lagu cadeeyay qodobka 39^{aad} qodab-hoosaadyadiisa 1, 2, 3, 4, 5

- 1 Qawmiyada, Quruumo iyo shucuub waliba oo Itoobiyaan ahi inay leedahay xuquuq bilaa shuruud ah oo ay iskeed go'aansan karto arimaheeda u gaarka ah oo uu ku jiro xaqa Gu'itaanka.
- 2 Qawmiyad, quruumo iyo shucuub kastaa waxay leeyhiin xuquuq ay ku hadlaan, ku qoraan kuna horumariyaan luuqadahooda, si ay gacan uga geystaan dhaqankooda kuna xafidaan taariikhhooda.
- 3 Qowmiyada, Quruumo iyo shucuub waliba oo Itoobiyaan ahi waxay leedahay xaq ay isku maamulayaan iyaga oo buuxinaya talaabooyinka dawladnimo ee sida inay aasaasaan ama samaystaan dhamaan hayddaha dowliga ah oo ay xaq u leeyihin inta soohdimahooda ee ay degen yihiin si cadaalad lehna u soo doortaan wakiilada shacabka ee heer deegaan iyo heer federaalba leh.



Jaantuska 4.6: Ismaamul goboleedyada federaalka Itoobiya



Hawl-galka 4.7

Idinka oo tixraacaya khariidada (Jaantus 4.6) ee sare lagugu siiyay ka jawaaba su aalahan:

- 1 Dawlada federaalka ah ee Itoobiya waa _____ oo federeeshin ah.
- 2 Waa kee dawlad deegaa meedka ugu wayni?
- 3 Waa kee dawleed deegaameedka ugu yari?
- 4 Inkastoo baaxadooda dawlad deegaameedyadu ayna is le'ekayn hadana waxay lee yihiin xuquuq ah in _____.

Xuquuqaha muwaadiniinta Itoobiyaanka ah waxaa damaanad qaaday dastuurka JDFI ee la qoray sannadkii 1995. Kaas oo xaqijiyay xuquuqaha aasaasiga ah ee dadyawga Itoobiya ee ay kamid yihiin:

- 1 **Xuquuqda Aadimiga:** waxa lagu qeexi karaa xuquuqaha caalamiga ah ee ay iska wada leeyihii dhamaan dadku iyada oo aan loo eegayn kala duwanaanshahooda jinsi isir, Midab luuqo, dhalashada Asalka, da'da Diinta ama siyaasada ay aaminsanyihiin. Xuquuqahan waxaa xushmayn iyo garwaqaqsatayba ururka qaramada mudoobay xaqijiyayna in:

- *Qof waliba leeyahay xuquuq inuu noolaado, xoriyada iyo amaanka shaqsigaba.* (Qodobka 3aad ee ka mida Baaqii U.Q.M ee xuquuqda Aadimiga).

Xubnaha ugu muhiimsan ee Xuquuqda Aadamigu Adnugu waa xaga in la noolaado, xaga xoriyada, iyo xaga sinaanta. Maxay kula tahay in ay kuwani yihiin aasaasi iyo is-ixtiraamka ugu-horeeya si loo dhawro (ilaaliyo) xuquuqda aadmiga?

Xuquuqda aadamiga waxa lagu xiriiriya qodabka diiwaanka caanka ah ku yaal ee Baaqii xornimada maraykanka oo ku cad weedhan soo socota.

“xaqiqadaan aynu hayno waa mid aan cadayn u baahnayn dhamaan aadanaha waxaa loo abuuray si isku mid ah. Waana mid uu ugu hibeyay abuurahoodu (ilaahay) waana hubaal xaqqahani inay yihiin kuwo aan cidgaar ah ku xirnayn oo ka dhaxaysa aadmiga oo dhan waxaana ka mid ah: nolosha, xoriyada iyo Hiwaayada farxadeed”

Hawl-galka 4.8



Mudane “X” waxaa dhibay shakhsii uusan garanayn oo u hanjaba isagoo taleefoon kula soo xidhiidhaya. Wuxuu mar walba ugu caga jugleeyaa in uu dili haddii uusan u yeelin dalabkiisa, oo ahaa in uu lakulmo. Mudane “X” talo wayku cadaatay oo qofkaas uusan garanayn ayaa naftiisa aad u mashquuliyyay. Ugu dambayntii mudane “X” wuxuu tagay saldhiga booliska oo uu uga waramay xaalka haysta. Kadib, booliskii ayaa soo qabtay qofkii dhibayay Mudane “X” oo maxkamad soo taagay. Waxay maxkamdiig go'aamisay in uu ninkii dhibayay Mudane “X” yahay dambiile, wuxuuna gacanta ugu jiraa booliska; Mudane “X” wuu nool yahay isagoo bedqaba. Sidee ayaad u aragtaa ahmiyada Xuquuqqda Aadmiga ee xiriirka la leh arinka aynu kor ku soo xusnay?

Bartilmaameed

Xaga in la noolaado macnaheedu waa xaga in la ahaado ama lagu sugnaado nolol.

Xaga in la noolaado waa xaalad laf-dhabar ah oo hoosta lagaga xariiqay dastuurka Dawlada Dimuqraadiga Fedaralka Itoobiya qodobkiisa 15^{aad}: “Shakhsii kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu noolaado”.

Ququuqda Aadamaha waxaa loo qaybiyaa:

- 1 **Xuquuqda shaqsi ahaaneed** – waxaa xuquuqda shaqsi ka mid ah: xaga in uu noolaado, xaga in uu ka dhawrsanaado jidh dilka iyo xaga in aanan sabab la’aan la xidhin.

- 2** *Xuquuqda koox ahaaneed* – waa xuquuqaha in la sinaado, in diin la haysto iyo caqiidadooda u gaarka ah.

Hawl-galka 4.9



- 1** Go'aanso kuwan soo socda in ay yihiin xuquuq shaqsiyeed ama xuquuq kooxeed: xuquuqda hawl gabka, caruurta gunada lasiyo, shaqaalaha oo si isku mid ah wax loo siiyo, faquuqld la'aan u daawaynta dadka.
- 2** Qodobka sinaanta ee ka dhexeeya Raga iyo Dumarka u kala saar kooxo dadka intiisa badan iyo dadka intiisa yar.
- 3** Waa maxay sababta aanay u qaybsami Karin xuquuqda in la noo laado?
- 4** Waa maxay xuquuqda ay yeelanayaan qaxootiga ku sugaran itoobiya? Aadmi mise Dimoqraadi?

Xuquuqda Dimuqraadiyadeed

Xuquuqahani waxay ka kooban yihiin xaqa fikradaha, rayiga iyo sharaxaada, xoriyada ururada xoriyada dhaqdhaqaaqa iyo xaqa dhalashada. Sida ku cad dasturka Federaalka qdob hoosaadyada hoos yimaada qdob hoosaadka 3.3 “Ma jiro muwaadin Itoobiyaan ah oo laga qaadi karo dhalashadiisa Itoobiyaanimo iyadoo laga hor imanayo rabitaankiisa”.

Hawl-galka 4.10



- 1** Tix geli qdobka sare oo isla falanqeeya in ay dhalashada Itoobiya ku xidhan tahay rabitaaka qofka iyo in kale.
- 2** Ayada oo loo eega yo dastuurka JDFI xuquulqahan u kala saara xuquuqo Aadmi iyo mid dimoqraadiya deed.

Xuuquuqaha	Aadmi	Dimoqradi	Midna
Xaqa Nolosho			
Meel ku noolaan			
Xoriyada Ururada			
Argagixisonimo			
Dambiyada ka soo horjeeda aadminimada			
Xaqa keli ahaansho			
Samaynta qoys			
Xuquuqaha Dhalashada			

4.2.2 Maamul suuban la'aanta Afrika

Dawladnimadu waa nidaam dahan oo hab dhaqanka is maamulista. Nooca ay tahay maamulista ay dadyawgu ku andacoonaayaan sida shaqsigan caanka ah ee soo jeediyay Bal dadku haka fikiraan iyaga oo dawlad ah ayay hadana is maamulayaan kadibna go'aanku wuxuu gacanta ugu jiraa dadka gacmahooda. Afrika intii ay xornimada qaadatay ilaa 1970kii agagarihisii ka dambeeyay wax ay lahayd muuqaal iyada ugaar ah oo dowladnimo, Halkaas oo xukuumado kali talis ahi ay ku gacan sareeyeen.kadibna waxaa lagama maarmaan noqotay in la soo jeediyo yeelatayna laba nidaam oo kala ahaa: Mid kali telis ah iyo mid ka kale oo ahaa Dimoqraadiyada.

muuqaalada Aasaasiga u ahaa labada maamul.

Kelitalis	Dimoqraadi
<ul style="list-style-type: none"> Waa natijada tooska ah ama aan tooska ahayn ee milatariga. Gacanta ku hayay awood ka baxsan dastuurka isaga lafahaan tiisa ayaan is u aqoonsaday xuk uumada. Tusaalahu muuqaalada waa Jiin bedel Bokaasa <p>Bokaasa</p> <hr/> <p>Sanadkii 1971 ayuu kudhawaaqay isla laftigiisu madax weynenni intuu nool yahay ah 1977 wuxuu isu caleemo saaray imbiradoor Bokaassa. Isaga oo shacab badan madaafic la dhacay iyo Dugsi arday waxku baranaysay.</p> <hr/>	<ul style="list-style-type: none"> Natiijadiis waa doorashooyin xiligo odii dhaca. Meesha ay xisbiyada siyaasadeed intay ku guu laystaan codka badan ay awooda la wareegaan Shaqsiga awoodiisu way xadysan tahay xaga sharciga waxaana la xisaabtama shacabka Sharafka awooda xukunku waa mid shacabka ka timaada <p>Nelson Mandela</p> <hr/> <ul style="list-style-type: none"> Wuxuu door wayn ka cayaaray xalinta farqigii kala duwanaa ee u dhexeyay cadaanka iyo madawga ee dalka koonfur Afrika Wuxuu hogaamiyay wadahadalo ayla yeelatay xukuumadii midabtakoorkuna la soo af jaray. Wuxuu door firfircoon ka qaataay sameynta dastuur cusub. Dastuurkii wuxuu aas aasay nidaam federaali ah oo leh dawlad dhexe oo awood adag leh. Wuxuu damaanad qaaday xuquuqda dadka laga badan yahay iyo xoryada saxaafada

Aragtidan is barbar dhiga Nidaamka dimoqraadiga ee maamulka suuban muuqaaladiisa ugu waawayn waxaa kamid ah:

- *Waxqabad fiicni tusaale- ka guul gaarista kharash garaynta dawlada oo aan sababo la'aan u khasaariny qimaha islamarkaana aan la daahayn*
- *Sharafda: waa dawlad aan musuq lahayn*
- *Cadcadaan: Laamaha dawladeed waa kuwo sumcad leh oo hogaansami kara.*
- *Waxtaraya (daacadnimo): waxaa saamayn ku leh jawaabaha ka soo yeedhaya muwaadiniinta dalabyada iyo Baahida.*
- *Wax-garadnimo iyo isla socod: go'aamadu waa kuwo samaysmay salna uu u yahay siyaasada loo sameeyay.*
- *Aragtida dheer (Himilada): qorsheyaa shiisu waa kuwo loo dejiyay himilada la hiigsanayo.*

Sida lidka ku ah kuwaas oo ah maamul suuban la'aanta; waxay leedahay dabeecadahan soo socda:

1	karraan (awood) la'aan	5	Aan xilkas ahayn
2	Musuq-maasuqa	6	Tiisa ayuu ka hormariyaa ta dalka ee guud ahaan
3	Xafiisyo aan isbedelayn oo aan Jawaabis lahayn	7	Go'aan la iska gaaro oo aan laga firsan
4	Cadcadaan la'aan		

4.3 BARNAAMIJ KA ISKAASHIGA

Marka uu casharkani dhamaado ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Magacaabaan urur goboleedyada Afrika
- Aqoonsadaan dalalka ka tirsan ururada
- Garwaaqsadaan Bahwadaagnimada Bartilmaameedyada urur goboleedyada Afrika
- Falanqeeyaan samaysanku OAU iyo isu bedelkii AU

Erayada Furaha u ah Cashirka

匙 Bahwaadaag

匙 Beesha dhaqaale

Ka fikir waxaad ka taqaanid

- Waa maxay sababta ay dadku u bahoobayaan?
- Goorma ayay dadku bilaabeen inay raadiyaan iskaashi?
- Waa maxay ujeeddada bah wadaagnimadu?

Miyaad gacan siisaa saaxiibkaa markii uu kaa doonayo inaad kala taliso dhib haysta?

Maxay yihin waxyaabaha sida caamka ah u hortaagan wadamada wakhti xaadirkan?

Waxyaabaha caamka ah ee hortaagan wadamada waxaa ka mid ah:-

- 1 Xaalada amniga qaran iyo ka aduun ee xilliyada khilaafaadka iyo dagaalka.
- 2 xuquuq Aadmi iyo maamul suuban la'aan.
- 3 Saamiga koradhka tirade dadka ee aadka u sareeya iyo adeegyada bulshada ee uu heerkoodu aadka u hooseeyo.
- 4 Cunno yaraanta iyo saboolnimada.
- 5 Faafidda cudurada saf-marka ah; gaar ahaan, Ej-Ay-Fi/Aydhiska iyo Malaariyada.
- 6 Dhibaatooyinka deegaan ahaaneed sida isbedalka cimilada aduunka.

Hadaba siday waddamadu isaga difaaci karaan arimahaas aan kor ku soo sheegnay?

Waxay isaga difaaci karaan oo kaliya iyagoo hal dhinac ka soo wada jeedsada ama iskaashada. Waxay arintani ka dhigan tahay in ay wadamadu kaga cayman karaan dhibaatooyinkaas in ay yeeshaan iskaashi ururo heer gobaleed ama caalami ah.

Hawl-galka 4.11



- 1 Muxuu yahay heerka darajo ee Qaramada Midoobay?
- 2 Maxay tahay ujeedada Qaramada Midoobay?
- 3 Maxay yihin dhaleecoyinka wakhti xaadirkan ee Qaramada Midoobay?

Xeerarka ururkii qadiimiga ahaa ee qaramada ee looyaqaan “league of Nations” iyo ka wakhti xaadirkan jira ee Qaramada Midoobay (UN) waxaa khasab ku ah urur gobaleedyadu in ay iskaashi iyo wada shaqayn la yeeshaan. Urur gobaleedyadu waa aalad qaramada midoobay u isticmaalaan in ay ku fuliyan ujeedooyinkooda.

Urur qaaradeedyada iyo urur goboleed yada ugu muhiimsan ee Afrika waxaa ka mid ah.

- *Beesha Dhaqaalaha ee dalalka Galbeedka Afrika (ECOWAS)*
- *Suuqa ay ku bahoobeen dalalka Bariga iyo koonfurta Afrika (COMESA)*
- *Horumarinta Bulsho-waynta dalalka dhinaca Koonfureed ee Afrika (SADC)*
- *Midowga Afrika (AU)*
- *Dalalaka u dooda Biyaha webiga Niil (NBI)*
- *Ururka Dawlad goboleedka Horumarinta dalalka ku bahoobay ee Bariga Afrika (IGAD)*

1 Beesha Dhaqaalaha ee Dalalka Galbeedka Afrika (ECOWAS)

Waa koox goboleed ka kooban shan iyo toban dal oo ku yaalla Galbeedka Afrika. Wuxaan la aasaasay bishii May, 28 deedii 1975kii ujeedooyinkaiisa ugu waawayn waxaa ka mid ah:

- *Is hortaagidda iyo xallinta khilaafyada gobolka.*
- *Ka guul gaarida ama sare uqaadida dhqaalaha midowga ee gobolka.*

Waxaa kale oo ujeedooyinkooda barbar socday talaabooyinkii ay qaateen kuwan soo socda:

- *Waxay joojiyeen dagaaladii sokeeye ee dalka Laybeeriyoo sanadkii 1990kii*
- *Waxay xaqiijyeen gaadiiidka iyo isgaarsiinta gobolka in ay isku xidhaan.*



Hawl-galka 4.12

Isku aadi calamada qaramada iyada oo la tixgelinayo dalalka ECOWAS

Calamada Qaramada			Waddamada
1 	6 	11 	B Benin _____
2 	7 	12 	T Burkina Faaso _____
3 	8 	13 	J Keeb ferdhi _____
4 	9 	14 	X Ayfarikoost _____
5 	10 	15 	KH Gaambiya _____
			D Gaana _____
			R Gini Bisooow _____
			S Gini _____
			SH Laybeeriya _____
			DH Muritaaniya _____
			C Seenigaal _____
			G Siraaliyoon _____
			F Toogo _____

Jaantuska 4.7: Calamada Qaramada ee ECOWAS

Isla falamqeey dhibaatooyinka guud ee haysta dalalkan.

2 Suuqa ay ku bahoobeen dalalka Bariga iyo Koonfurta Afrika (COMESA)

Waa urur ay 1994tii aasaaseen dalal ku yaala Bariga iyo Koonfurta Afrika. Waxaa xubin ka ah ururkan 20 dawladood. Waxaa ururka markii hore loo aasaasay in la helo aag ganaci oo xor ah kaasoo meesha ka saaraya canshuurta. Wuxuu bedalay ganacsigii kala hormarinta aaga ee loo yaqaan (PTA).



Jaantuska 4.8: Khariidad ku tusaysa xubnaha ka tirsan COMESA

Ujeedooyinka ugu waawayn ee COMESA waa in ay:

- Awood u yeeshaan xubnaha ururka ka tirsani iskaashiga horumarinta kheyraadyadooda dabiiciga ah iyo Aadhiba.
- Sare u qaadida ama ku guulaysiga Nabada iyo Amaanka qobalka.
- Abuurista ganacsi xor ah iyo sare uqaadida ganacsiga.



Hawl-galka 4.13

Darsa khariirada sare kadibna ka jawaab su'aalahan soosocda

- 1 Sheeg ururka qaybta khariirada ee ku hadhaysan midabka cagaaran.
- 2 Tax xubnaha Bariga Afrika ee ka tirsan ururka.
- 3 Tax xubnaha ururkan ka tirsan ee aan Bariga Afrika ahayn.

3 *Horumarinta Bulsho waynta Dalalka koonfureed ee Afrika (SADC)*

Waa urur ay samaysteen dawladaha Afrika dhinaceeda koonfureed kaga yaalla. Waxaa la aasaasay Bishii Abrill sannadkii 1980kii shan iyo tobant dal oo Afrikada koonfureed ah. Wuxaan ka mid ah: Angoola, Botswaana, Jamhuuriyada Dimoqraadiga ee Koongo, Lisoto, Malaawi, Saambiya, Taansaaniya, Simbaabwi Koonfur Afrika, Siishelis, iyo Madagaskar.

Ujeedooyinka ururka (SADC) waa:

- *Ladagaalanka Musuqa.*
- *Kor u qaadida Nidaamyada waxbarasho iyo caafimaad ee xubnaha ka tirsan.*
- *Iskaashiga guud ee dhinacyada horumarineed iyo damaanada cunnada.*
- *La dagaalanka cudurka halista ah ee HIV/AIDSka.*



Hawl-galka 4.14

Adiga oo tixraacaya xubnaha ka tirsan ururka ee sare ku xusan dhamaystir weedhahan lagu siiyay:

- 1 Waddanka waagii hore lagu soo xukumayay Nidaamka midab-takoorka ____.
- 2 Waddanka uu soo maanuu layay kelijii taliyihii Mabuuto seese seyko ____.

4 Midowga Afrika (AU)

Midowga Afrika (AU) waxaa markii hore loo yaqaanay ururka midnimada Afrika (OAU). Wuxuu Ururku ka kooban yahay 53 xubnood. Waxaa Ururka Midawga Afrika xarun u ah magaalada Addiis Ababa ee dalka Itoobiya oo ahayd magaaladii lagu aas aasay ururka 25tii Meey, 1963dii.

OAU wuxuu soo ahaa tan iyo intii laga soo gaarayay 2002 oo mar kale magacii laga badalay loona bixiyay (AU).

Midowga Afrika (AU)

- *Hirgalinta Midowga guud ee dhinacyada Dhqaalahsuuq iyo siyaasadeedba.*

Qaarka mid ah dhibaatooyinkii soo wajahay (OAU) wakhtigii uu jiray waxaa ka mid ahaa:

- *Wada shaqayn la'aan dhinaca fulinta go'aamada.*
- *Xubnaha ka tirsan ururka oo kala qaybsanaa gudahooda.*
- *Ka maqnaanshaha uu ka maqnaa in xoog ciidan lagu dejiyo khilaafyada.*

Xaaladahaan ugu dambayntii waxay u horseeday in la sameeyo midowga Afrika (AU) sannadkii 2002dii.

Hawl-galka 4.15



- 1 Isla falanqeeya adiga iyo ardayda saaxiibadaa ah waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee ururkii midnimada Afrika (OAU) uu soo kordhiyay?
- 2 Waa maxay faa iidada inay xarunta dhixee ee (OAU) noqoto oo lagu aasaaso Itoobiya?
- 3 Maxay kula tahay sababta Itoobiya loogu xushay ama doortay xarunta dhexe ee OAU?

Ujeeddooyinka Midowga Afrika (AU) waxaa ka mid ah:

- *In lagu guulaysto midnimo wayn iyo isku xirnaan dhixmarta dalalka Afrikaanka ah oo dhan.*
- *Kor u qaadida Nabada, Midnimada iyo iskaashiga qaaradeed.*
- *In la fuliyo xeerarka ama shuruucda Dimoqraadiyadeed, isku Maamulida sharciga iyo kor u qaadida Maamul ka suuban.*

Kal fadhiga guud ee Madaxda sar-sare ee hogaa miyayaasha iyo xukuumadaha Afrika waa xubinta ugu saraysa ee awood fulinta ururka.

5 Ururka U Olooleeya Biyaha Webiga Niil (NBI)

Iyada oo loo eegayo dhinaca waxtarka wabiga Niil, ayaa u-ololaynta webiga Niil macnaheedu yahay in si ku meel gaadh ah oo habaysan loo aasaaso dalalka wadaaga biyaha webiga Niil. Kulankii lagu aasaasay ururkan (NBI) waxaa lagu qabtay magaalada Daarasalaam ee dalka Taansaaniya 22kii Febraayo 1999 .

Ujeedooyinkiisa ugu muhiimsanaa waa inuu:

- *Gacan ka gaysto horumarinta degenaanshaha iyo iskaashiga wabiga Niil oo ah mid aad muhiim ugu ah dadyawga gobolka.*

Hadaba dalalka wadaaga Biyaha webiga Niil waxaa ka mid ah: Burindi J.D Koongo, Masar, Eriteriya, Itoobiya, Kiinya, Ruwaanda, Suudaan, Taansaaniya iyo Ugaandha.

Waddamadan kor ku xusan kee baa biyaha ugu badan ka helaa webiga Niil?

Majiro wax heshiis ah oo dhexmaray dalalka isticmaala webiga niil. Waxaa jira dalal taageera fikirka odhanaya dhamaan dalalka uu ka dhexeeyo si is le'eg in ay u qaybsadaan biyaha webiga Niil. Dalalkan waxaa ka mid ah Itoobiya iyo dalal kale marka laga reeboo dalka Masar iyo suudaan.

Dalalka Masar iyo Suudaan iyaguna waxay xooga saaraan in meesha isticmaalka biyaha webiga Niil ay keligood iska leeyihin qeybta ugu wayn. Ayaga oo u cuskanaya Arintan heshiis ay kala sexeexdeen xilligii gumaystayaasha oo dhexmaray dalalka Masar iyo Ingiriiska sannadkii 1929 kii khilaafku wuxuu ka dhexeeyaa waddamada webigu meelaha uu u sii durduro ee daaca hoose.

6 Ururka Horumarinta Dawladaha Bariga Afrika (IGAD)

Waxaa la aasaasay ururka 1986dii. Wadamada ururkan ku bahoday waxaa weeye Jabuuti, Eriteriya, Itoobiya, Kiinya, Soomaaliya, Suudaan iyo Ugaandha.

Ururka ujeedadiisa ugu weyn waxay ahayd in ay:

- *Ilaaliyaan nobada iyo amniga gobalka*
- *Ilaaliyaan deegaanka*
- *Dalalka xubnaha ka ah yeeshaan iskaashi dhaqaale*

SOO KOOBIDA CUTUBKA

- Ej-Ay-Fi/Aydhisku wuxuu ka mid yahay cudurada ugu halista iyo dhibaatada badan ee qaaradda Afrika.
- Dhakhsa u koradhka tirada dadka waxay keentaa dhibaatooyin bulsho iyo kuwo dhaqaale.
- Waxaa dhibaatooyinka Afrika hal-bowle u ah saboolnimada.
- Waxaa xuquuqda Aadamiga loo kala saaraa xuquuq shakhsi ahaaneed iyo xuquuq koox ahaaneed.
- Ilaalinta xuquuqda caruurta waa mid waajib ku ah cid kasta.
- Waxay dalalku kaga guulaysan karaan dhibaatooyinka caamka ah iyagoo yeesha ururo heer gobal ama heer caalami ah.

SUAALAH GEBO GABADA CUTUBKA

I *Weedhahan soo socda tii sax ah ku qor “Run” tii been ahna “Been” kuqor.*

- 1 Koritaanka dadka ee degdega ah waa mid la xiriira saboolnimada.
- 2 Cudurka Ej-Ay-Fi/Aydhisku aad uma saameynin cududa wax soo saarka dhaqaale ee Afrika.
- 3 Inkastoo shaqo la aantu ka jirto meel kastoo dunida ah hadana darajada xaga u saraysa ayey kaga jirtaa Afrika.
- 4 Xuuquuquhu waa kuwo sax ah markii loo fasiro ee sharci gu cadeeyo.
- 5 Hababka ugu badan ee dhediga ka dhigay dhibanayaal waa gudniinka fircooniiga iyo kufsiga.

II *Buuxi meelaha bannaan*

- 1 Dalalka ka hooseeya saxaaraaha waxaa lagu qiyaasaa _____ % dadka la nool Ej-Ay-Fi?Aydhis.
- 2 Dalka ugu sareeya boqolkii ba Ej-Ay-Fi/Aydhiska ee Afrika waa _____.
- 3 Had iyo jeer xuquuqda aan la qiyya si Karin garwaaqsi la'aan waa _____.
- 4 Qof waliba wuxuu leeyahay xuquuq inuu noolaado, xor ahaado iyo Amnigiisaba hadaba nooca xuquuqdani waa _____.
- 5 Ururgoboleedyada ugu waawayn Afrika waxaa ka mid ah _____.

III *Jawaab gaaban ka bixi*

- 1 Waa maxay raad reebyada uu dagaankiina ku yeeshay Ej-Ay-Fi/Aydhis?
- 2 Waa nooceee nooca xuquuqeed (Xuquuqda Aadmiga ama xuquuqda Dimoqraadiyada) ee aad muhiimka kuugu ah? Waayo? La falankee saaxiibadaa.
- 3 Waa kee uruur goboleedka ugu xubnaha badani ay katirsan yihiin?
- 4 Magacaw saddex wado oo xuquuqda caruurta loogu xad gudbo?
- 5 Waa maxay farqiga aasaasiga ah e u dhixeeyaa dawlad keli talis ah iyo dawlad Dimoqraadi ah?

IV *Waxqabad ficleed ku muuji*

- 1 Dagaankiina, ka soo raadi qoys uu ka mid yahay dhibne qaba Ej-Ay-Fi/Aydhis, oo ku sugaran guriga. Ka qor warbixin ku saabsan saamaynta uu cudurkani ku hayo qoyska idinkoo u tixgelinaya dhaqaala hooda iyo nolosha bulshada

V *Ka dooro****Dooroo jawaabta ugu haboon***

- 1 Kuwan soo socda waa kee qodobka dhaliya faafida Aydhis ee Afrika .
- B saboolnimada
 - T Ahmiyada siin la'aanta dawlada
 - J Guuritaanka sare ee dadka
 - X Aqoonsiga sare ee Haweenka
- 2 Koox da'ee dyadan kooxdee baa laga helay tirada ugu sareeya Boqolkiiba ee dhibanayaasha Ej-Ay-Fi/Aydhis qaada?
- B 5 – 12
 - T 15 – 24
 - J 50 – 60
 - X 60 iyo wax ka sareya

CILMIGA BULSHADA

BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 7^{aad}

ISBN 978-99944-2-118-3



JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 68.00